

Buuga Jihaynta
ee Soogalootiga Cusub
Twin Cities Immigrant Orientation Guide





Contents

Welcome to Minnesota!.....	2
Acknowledgments	3
Wararka asaasiga ah iyo xaaladaha degdega ah	4
Qaynuunadda iyo qaabka waaxda socdaalka ama Imigereeshinka	8
Soogaletinimo	10
Xuquuqdaadada Aasaasiga ah (rights) iyo Musuuliyadda ku saaran (responsibilities)	13
Qaadashada Liisanka Baabuur Wadidda (Driver's License) iyo Aqoonsiyada kale ee aasaasiga ah	20
Adeegga Bulshada	27
United Way, ESL, Mashruuca dib u dejinta ee gobolka.....	34
Caafimaadka	36
Noocyada Dugsiyada Maraykanka	41
Quryaha/Hoyga	48
Qaadiidka Dadweeynaha	56
Dhaqaalaha Shaqsani ahaaneed.....	62
Wararaka Canshuur Bixiyaha	68
Dhaqamada kala duwan	75



Welcome to Minnesota!

We are glad to have you as our new neighbor. We wish you and your family great success in our wonderful state.

The idea to create this orientation guide came from a community meeting organized by the Immigration and Naturalization Service (this agency is now part of the Department of Homeland Security). Several concerned citizens and social service professionals suggested that immigrants new to the state often do not have good information about their rights, responsibilities, and resources. A committee was formed to create this guide. The members of this committee spent long hours researching, debating, writing and rewriting the information that follows.

We offer this guide as a resource to help you make progress towards becoming a self-sufficient and contributing member of our community. America's story is a story of generation after generation of immigrants who arrived with little, but who worked hard and made smart choices to build a better life for themselves and their children. You are helping to write the next part of this story as you find employment, succeed in school, open businesses, purchase homes, vote and help your neighbors. We hope, in a small way, this guide helps you to realize those goals.

Best Wishes,

Joel Luedtke

Director of Refugee Services, Minnesota Council of Churches



Acknowledgments

This Guide is dedicated to Héctor García, President of Cultural Complementarity Consultants, whose vision, diplomacy, perseverance, and wisdom nurtured it from idea to reality.

This Guide would not be possible without the ideas, resources, and feedback provided by the following


Bula Atomssa, Hennepin County Office of Multicultural Services
Frank Barnett, Sierra Leonians in Minnesota (Sierrasota)
Barbara Bolar, BCIS, Department of Homeland Security
Eric T. Browne
Marilyn Carlson, Minnesotans for Immigration Reform
Frank Daniel, Minnesotans for Immigration Reform
Mark DePauw, Hennepin County Office of Multicultural Services
Asya Fridland, Jewish Family and Children's Service
Bruce Gawtry, Department of Homeland Security
Alan Gregerson, Internal Revenue Service
Marge Higgins, Minnesota Department of Health
John Keller, Immigrant Law Center
Judy LaBrosse, Internal Revenue Service
Kathy Lentz, Greater Twin Cities United Way
Duane Lilja, Walls to Bridges
Ibrahim Noor, Minnesota Department of Economic Security
Warsame Shirwa, Somali Resource Center
Frank Sloan, Department of Homeland Security
Patricia Stoppa, University of Minnesota Extension Service
Theresa Ude, Minnesota Department of Revenue
Larry Walker, Knowledge Management Inc.

The Minnesota Council of Churches produced this Guide. Special thanks to the following MCC staff:

Lisa Endreson Lobejko, lead coordinator, writer, and researcher
Lauren Imboden, research and writing
Chris Dart, layout and print coordination

This project was made possible through a grant from the Otto Bremer Foundation





|

Wararka asaasiga ah iyo xaaladaha degdega ah

- 1.1 Jawaabta xaladda degdega ah
 - Waa maxay lambarada 911?
 - Goorta la waco lambarada 911
 - Ha u wicin 911 si aad
 - Maxaa dhacaya markaad wacdo lambarada 911?
 - Lambarada aanan ahayn kuwa xaalada degdeg ah ee talisyada cidanka Booliiska
- 1.2 Badbaadada Dabka ee Guryaha
 - Sida loo yareeyo khatarta dab ka dhaca gurigaaga
 - Maxaa la sameeyaa hadii uu dab qabsado gurigaaga
- 1.3 Warrar ka si da loo kontoroolo sunta

1.1 Jawaabta xaladda degdega ah



Waa maxay lambarada 911?

• Dalka Mareykanka ayaa u dhaqameeyay (go'aamiyay) in lambarada 911 la waco, haddii ay timaado xaalad degdeg ah oo u baahan gargaar degdeg ah. Lambaradan waxaa laga soo wici karaa talafoon walba marka ay jirto xaalad degdeg ah, isagoo bilaash ah.

Goorta la waco lambarada 911

• Si aad war uga bixiso xaalad u bahan in uu boolis yimaado meesha, xaladahaas waxaa ka mid ah (dil, dhac, xaalad dhibaato

oo qoyska dhex marta).

• Si aad ugu yeerto baabuurta badbaadada xaalada caafimaadka (ee loo yaqaano Ambilaaska), si qof loo daaweeyo.

• Haddii uu dab qabsado, guri, qof, gaari, iwm.

• Si aad fal dambi ah oo lagu jiro war uga bixiso.

• Si aad falal dambi ah oo socda war uga bixisid sida (Alaarmiga) oo qayliya, rasaas dhacaysa ood maqasho, qaylo cawimaad rabta, shanqar sida dhalo jabaysa, qof aanad garan oo alaabka xoog kuugu soo garaaca..



Ha u wicin 911 si aad:

• u waydiiso tilmaan meel lagu tago.

• waraysi ku saabsan xakameeynta xayawaanka.

• inaad ogaato in uu qof xabsi ku jiro.

• si aad warar uga bixisid xaalado aan ahayn kuwo ku shaqaleh booliiska, dab-damiska, ama kuwo u baahan xaalad caafimaad oo degdeg ah. Kuwaas waxaad ka heli karta buugaagta talafoonada, qaybta dowlada si aad u hesho lambaro sax ah.

• war inaad ka bixiso xaalad caafimaad oo aan degdeg ahayn.

• wac xafiiska booliiska kuugu dhow si aad ula hadasho sarkaalka booliis.



Maxaa dhacaya markaad wacdo lambarada 911?

Lambarada 911 waxaa laga jawaaba 6-12 daqiiqo kadib, markaasoo uu talafoonkaagu aamusi doono, lakiin hadhigin talafoonkaaga.

• Hadii aadan af-Ingriisiga ku hadlin waa muhiim inaad u sheegto qofka kula hadlahaya ee ka jawaaba lambarada 911 aadna u sheegto

luqadaad ku hadashid. Mudo daqiiqado ah gudahood ayaa laguugu gudbinayaa qof turjuma.

• Qofka ka jawaaba lambarada 911 waxaa lagarabaa inuu ku weydiiyo su'aalo kala duduwan si uu xaalada degdega ah u qiimeeyo, uuna u ogaado meesha ay ka dhaceeyso., su'aalaha qaarkood baa laga yaaba inay noqdaan kuwo aan daruuri ahayn, balse waa u muhiim dadka badbaadada u soo gurmanaya inay helaan warkaan si ay u helaan cinwaanka saxa ah sida ugu degdega badan.

- Kujir talafoonka mudo dheer inta aad awoodo si aad u caawiso shaqaalaha lambarada 911 inay kuu soo garsiyaan caawimaad degdeg ah.

Lambarada aanan ahayn kuwa xaalada degdeg ah ee talisyada cidanka Booliiska:

Waxaa jirta inaan mararka qaarkood u bahato inaad la xiriirto booliiska iyadoon aysan ahayn xalad degdeg ah. Isticmaal lambaradaan si aad ula hadasho Waaxda Booliiska marka aysan ahayn Xaalad Degdeg ah.

- Minneapolis: 612.348.2345
- St. Paul 651.291.1111
- Lambarada magaalooyinka kale waxaa laga helaa buugga talafoonada qaybta buluuga ah.

1.2 Badbaadada Dabka ee Guryaha

Dalka Mareykanka ayaa wuxuu leeyahay geerida iyo dhaawaca ugu badan ee uu sababo dabku (gubashadu), marka loo fiiriyo dunida inteeda kale. Dabkaas waxa uu u kala baxaa qayb olol ah iyo qayb qiiq ah. Waana kuwa ugu badan ee kalifa geerida shilka ah ee ka dhacda guryaha.

Waxaa jira waxyaabo badan ood qaban karto si aad uga hortagto ama u yareeyso khatarta dab ka dhaca guriga. Haddii aad aqoon u leedahay arrimaha dabka, waxaa jira waxyaabo aad qaban karto oo badbaadin kara naftaada.

Sida loo yareeyo khatarta dab ka dhaca gurigaaga.

- Ha isticmaalin qoryaha ama xaabada dabka lagu shido, haddii aanad aqoon badan u lahayn sida loogu isticmaalo xaabada guryaha casriga ah ee dalkan Maraykanka. Ha u isticmaalin meesha dabka lagu shido in aad wax ku karisid.

Hadii aad isticmaalaysid shay la qaad qaadi karo sida waxa loo yaqaan (Portable Heater), oo koronto loo isticmaalo, ka fogee ugu yaraan sadex dhudhun meelaha ay alaabta gurigu yaalaan sida darbiga, sariirta, kuraasta iyo miisaska. Hadhigin meel ay kaga soo dhici karaan tuwaalo iyo dhar kaleba. Waayir (Xarig koronto) dheer ha u isticmaalin qalabka korontada ee laqaadqaadi karo. Qalabka korontada ee loo yaqaan (Portable Heater) ha u isticmaalin inaad ku qalajiso dhar hana saarin khaanadaha , kuraasta iyo miiseska korkooda.



- Waligaa hadhigin maacuunta, fargeetooyin iyo malqaacado balaastika ah, tuwaalo iyo waliba shay kale oo aan loo isticmaalin in wax lagu kariyo shooladda dusheeda iyo agagaarkeedaba (Stove). Haddii wax la korsaaro shooladda wax lagu kariyo (Stove) dab bay kicin kartaa. Kor isaga laab dharka kacmaha dhaadheer leh ama wata biinen balaastika ah markaad wax karinaysid. Wax kaa dheer ha tiigsanin markaad wax karinaysid. Haddii aad xidhan tahay shay gacmo dheer waxaa laga yaaba inuu dabka qabsado ama u wax kulul kugu soo rogo oo uu markaa kalifo inuu ku gubo. Ha saarin shooladda korkeeda nacinac ama buskud si aysan caruurtu u korin shooladda oo aanay ugu guban.



- Marwalba ka fiirso sidaad wax u karinaysid.



- Kafogee caruurta qaraxadaha iyo kabriidyada una sheeg inaysan qalabkani ahayn wax lagu ciyaaro.
- Sariirta sigaar ha ku cabin.
- Qalabka lagu ogaado dabka dhig qolwalba oo ka mid ah gurigaaga. Hubso inay si sax ah u shaqaynayaan. Sanadkiina mar badal baaterigooda.
- U samee qoyskaaga meel looga baxsado haddii u dab qabsado guriga.

Maxaa la sameeyaa hadii uu dab qabsado gurigaaga:

- Albaabka u gurguuro adoo isticmaalaya lugahaaga iyo gacmahaaga. Dabka ololkiisa iyo qiiqiisuba waxay u baxaan kor sida awgeed dhulka ayaa ugu badbaado badan.
- Hubso albaabka marka hore, hadii uu qaboowyahay isku dhaji kadib tartiib u fur, hadii u kululyahay ama aad dareento qiiq, si dhakhso ah isaga xir.
- Hadii uu albaabku kulul yahay oo aadan ka bixi karin isticmaal dariishadaha. Hadii aadan dariishadaha ka bixi karin caawiimaad dalbo, sida wadhfinta shay la arki karo.
- Markaad dabka ka soo baxsatid, guriga hortiisa qayskaaga kula kulan sugna waaxda dabdamiska oo loo yaqaan (Fire Department).
- Marnaba dib ha ugu noqonin guri gubanaya. Waaxda dabdamiska u sheeg haddii uu jiro qof wali kujira sarta/guriga gudahiisa.
- Raadi taageero caafimaad si aad isaga daaweeyso gubasho iyo dhaawacyo kaleba.

1.3 Warrar ka si da loo kontoroolo sunta

Waxaa jiraa waxyaaba badan oo guryaha gudahooda laga helo oo ku noqonka kara caruurta sun. Waxyaabahaan hadii la laliqo ama la neefsado caruuta waxay kuridi karaan jiro. Mararka qaarkoodna waa khatar geeri keeni karta. Waxyaabaha sunta ah waxaa ka mid ah waxa lagu dhaqo welka, waxyaabaha al isku nadiifiyo xaga caafimaadka, daawooyinka la isticmaalo, rinjiga, khamrida iyo geedaha lagu beero guryaha. Ka ilaali caruurta waxyaabaha keeni kara sunta kagana qafil meel.

Hadii uu qof liqo wax sunleh wac (Minnesota Poison Control Center), si degdeg ah, lambaraduna waa 800.222.1222 waxayna diyaar yihiin maalinwalba 24ka saacadood 7da beri ee weega oo dhan. Qof ku takhasusay kontoroolida sunta ayaa kuu sheegi ama tilmaami waxaad sameeyn lahayd.





2

Qaynuunadda iyo qaabka waaxda socdaalka ama Imigereeshinka

- 2.1 Wararka Waaxda Socdaalka ama Imigereeshinka
- 2.2 Warbixiinta ama soo sheegida dhaqdhaqaaqyo ka dhan ah shrciga Soogaleetinimo
- 2.3 Xaaladaha dal ka saarida
- 2.4 Warar kaa caawiya xaladaha Waaxda
Baro Xuquuqdaada
Isbarbar dhig waxaa loo yaqaan (Notaria-da) iyo Lataliyayaasha xagga sharciga
(Notarios vs. Proper Legal advisors)
Falalka budcadnimo waxaa lagayaabaa inay wax u dhimaan sharcigaaga soo
galeetinimo/qoxootinimo (ee waaxda Socdaalka)
- 2.5 Socdaalka ama immigereeshanka

2.1 Wararka Waaxda Socdaalka ama Imigereeshinka

Howlaha Immigereeshinka waxaa bixiya saddex xaafiis oo kamid ah Wasaaradda Nabadgelyada Dalka ee Mareeykanka (Homeland Security). Magacyadoodu waxay kala yihiin:

- Xafiiska Wadanimada iyo Howlaha Immigereeshinka
- Xafiiska Hawlgelinta sharciyada Immigereeshinka iyo Kastanka (Customs)
- Xafiiska Kastamada iyo ilaalinta Xuduudaha



Xafiiska Hawlaha Wadanimada iyo Immigereeshinka oo loo yaqaano (Bureau of Citizenship and Immigration Services) oo marka la so gaabiyo loo yaqaan (BCIS) wuxuu kaa caawin karaa wararka ku saabsan arjiyada kala duwan iyo waliba faa'iidada laga helo Waaxda Socdaalka ee dalka Mareeykanka, Sida karaka shaqada, karaka cagaaran ee loo yaqaano (Green Card), aqoonsiyada sida kuwa lagu dhoofa, codsiga ehelada la keenayo dalkan Mareeykanka iyo qaadahsada dhalshada dalka Mareeykanka.

Xafiiska Hawlgelinta sharciyada Immigereeshinka iyo Kastanka (Customs) oo loo yaqaano (Bureau of Immigration and Customs Enforcement) oo marka la so gaabsho loo yaqaan (BICE) ayaa wuxuu leeyahay axdi ah inuu howl galiyo qaynuunada iyo shuruucda Waaxda Socdaalka ama Immigereeshinka. Xafiiskani wuxuu baaraa dadka soo-galootiga ah xaaladahooda kuwajahan falalka dambiga ah. Waxaa taa sii dheer xafiiskani waxa uu wakiil ka yahay xidhidda (xabsi u taxaabidda) dadka soogalootiga ah iyo waliba dal ka saarida haddii la xukumo in dalka laga saaro.

Xafiiska Kastamada iyo ilaalinta Xuduudaha oo loo yaqaano (Bureau of Customs and Border Protection) oo marka la so gaabsho loo yaqaano (BCBP) ayaa wuxuu u xilsaaran yahay baaritaanka waxyaabaha soo galaya madaarada (airports)/dakadaha (seaports) iyo weliba xuduudaha dalka Mareeykanka iyo waliba Canshuurtooda. Baaritaanka geyigani inta badan wuxuu ka howl galaa Gegada Dayuuradaha ee Caalamiga ah ee St.Paul iyo Minneapolis oo loo yidhaa (Minneapolis/St.Paul International Airport).

Waxaad ka heli kartaa wararka ku saabsan saddexda xaafiisba iyo walkiba arjiyada khuseeya xafiis walba lambarada Xaruunta loo yaqaan (National Customer Service Center) oo marka la soo gaabsho loo yaqaan (NCSC), oo ah 800.375.5283. Talafoonkani waa bilaash oo waliba waxaa ka jawaabaya saraakiil ka mid ah Waaaxda Socdaalka ama Immigereeshinka oo si gaar ah uga shaqaysa qaybta warbixinta kuwaas oo kaaga jawaabi doona wax aliyaale waxaad rabtid ee ku waajahan waraarka Immigereeshinka. Waxaa la helaa Isniin ila Jimce laga bilaabo



8da subaxnimo ilaa iyo 6da galabnimo. Lambaradan (NCSC) waxaa kale oo ay leeyihiin warbixino cajalad ku duuban o la heli karo xilikasta iyo waliba maalin kasta 24ka saacadood iyo waliba todobada cisho ee weega. Wararka Waaxda Socdaalka ama Imigereeshinka waxaa kale oo laga heli karaa shabakada interneedka bogga www.immigration.gov.

Arjiyada Imigereeshinka waxaa kale oo aad ka heli kartaa xafiiska gayigan oo kuyaala Bloomington, Minnesota. Cinwaanka xafiisku waxa uu yahay: 2901 Metro Drive kaaso u jira Mall of America Ω

Mile Woqooyi Bari iyo 1/2 Mile Koonfur Galbeed Minneapolis/St. Paul International Airport. Saraakiisha Waaxda Socdaalka ama Immigereeshinka waxay ka shaqeeyaan Xafiiska 8da arrornimo illaa iyo 4ta galabnimo Isniinta illaa Khamiista. Waxaa lagugula talinayaa inaad xili hore tagto sida 7da arrornimo si ay hawshaadu kugu dhamaato hal maalin gudaheed. Waxa markasta talo fiican ah in aad wacdo xafiiska NCSC (wararka), kahor inta aadan gelin saf/layn aad u dheer oo laga yaabo in aanay waxba kaaga soo qabsoomin.

2.2 Warbixiinta ama soo sheegida dhaqdhaqaaqyo ka dhan ah sharciga Soogaleetinimo

Waxaad wici kartaa si aad aad u so sheegto dhaqdhaqaaqyo ka dhan ah sharciga soo galootinimo Xafiiska BICE oo lambarkooda magaalada (gayigan) uu yahay 612.313.9040.



2.3 Xaaladaha dal ka saarida

Xaaladaha ama su'aalaha dal ka saarida waxaa kaaga jawaabi kara xafiiska BICE oo u lambarkiisu yahay 612.313.9060.

2.4 Warar kaa caawiya xaladaha Waaxda

Baro Xuquuqdaada

- Haddii aad tahay wadani Mareeykan ah iyo haddii kaleba waxaad leedahay xuquuq aasaasi ah, marba haddii aad joogto dalkan Mareeykanka gudihiisa. Warar ku saabsan xaladahaan fiiri qaybta cudubka saddexaad ee (Xuquuqdaada Aasasiga ah) ee bugan jihataynta.

Isbarbar dhig waxaa loo yaqaan (Notaria-da) iyo Lataliyayaasha xagga sharciga (Notarios vs. Proper Legal advisors)

Gobolkan Minnesota waa mamnuuc inaad ku shaqayso qareenimo haddii aadan haysan shahaado qareenimo, sidoo kale waa mamnuuc in aad bixisaa talo ku saabsan xaaladda sharciga waaxda Socdaalka ama immigereeshinka. Waa inuu qofku noqdaa qareen ama qof loo tababaray hawshaan.

Bulsha kasta oo sogalooti ah waxaa ku jira dad bixiya talooyin ku saabsan Waaxda Socdaalka ama Immigereeshinka kuna qaata dhaqaale ama lacag. Tusaale ahaan afka Spanishka waxaa loo yaqaan (Notarios). Dad kan oo si daacad ah aan u shaqayn ayaa ka faa'iidaysta dad jahawareer ka haysto ama aqoon darro ka haysato sharciga. Ayaga oo loo diiday inay sidan ku shaqeeyan ayeey ku hawl galaan oo ay lacag ku cunaan. Kuwo badan baa lacagta kala baxsada dadka soogalootiga ah, kaba sii darane mararka qaarkood waxay ku dalbadaan magaca qofka soogalootiga ah sharci oo ay ka dalbadaan dawlada, taasoo kalifta in qofkii dalka laga saaro.

Hadaba hadii aad raadinayso wax kaa caawiya xaladaada Immigereeshinka raadso qof loo taba baray oo sharciyaysan. Waa kuu muhiim adeegyada Immigereeshinku. Liistada soo socota ayaa kuu tilmaamaysa meelaha aad ka helikartid adeegyo jaban oo kharash yar.

Falalka budcadnimo waxaa lagayaabaa inay wax u dhimaan sharcigaaga soo galeetinimo/ qoxootinimo (ee waaxda Socdaalka).

Fadlan si fiiro dheer leh u akhri cudubka soo socda ee Xuquuqdaada aasasiga ah. Kuwaasoo ku waajahan qaadashada wadananimada dalka Mareeykanka ama dhalashada dalka Mareeykanka, dambi ku qaadida budhcadnimo, dal ka saaridda iyo masuuliyadda ku saaran iyo xuquuqdaada.

2.5 Socdaalka ama immigereeshanka

Arab-American Anti-Discrimination Committee

1936 Mabel Court
Chaska, MN 55318
Washington DC Office: (202) 244.2990

A civil rights organization committed to defending the rights of people of Arab descent and promoting their rich cultural heritage

Catholic Charities

215 Old Sixth Street
St. Paul, MN 55102
Provides legal assistance on a variety of immigration matters.

Center for Victims of Torture

717 East River Road
Minneapolis, MN 55455
612.627.4294

The mission of CVT is to heal the wounds of government inflicted torture on individuals, their families, and their communities and to prevent occurrences

Hennepin County Immigration Project of the Legal Aid Society

430 1st Ave N, Suite 300
Minneapolis, MN 55401
612.334.5970

Provides immigration assistance to persons of low-income living in Hennepin County. Primarily assists refugees and asylees in adjustment of status, family reunification petitions, and work authorization petitions.

The Immigrant Law Center of Minnesota

179 E Robie Street
St. Paul, MN 55107
(651.) 291.0110

Offers legal services on immigration related matters to individuals of any nationality and primarily represents individuals who live in Ramsey County and Southern Minnesota.

International Institute

1694 Como Avenue
St. Paul, MN 55108
651.647.0191

Offers legal services on immigration-related matters such as citizenship, refugee and refugee resettlement status.

Legal Aid Society of Minneapolis

Downtown
300 Kickernick Building
430 1st Ave N

Minneapolis, MN 55410
612.332.1441

Southside

2929 Fourth Ave S
Minneapolis, MN 55408
612.827.3774

Northside

2507 Fremont Ave N
Minneapolis, MN 55411
612.588.2099

Provides free civil law legal help to eligible low-income, elderly or disabled persons.



Legal Assistance for Minnesota Prisoners

95 Law Center
University of Minnesota
Minneapolis, MN 55455
612.625.6336

Offers legal assistance to immigrants serving a Minnesota sentence in the state of Minnesota.

Lutheran Social Service, Refugee Services

2414 Park Ave
Minneapolis, MN 55108
612.879.5268

Offers legal services on immigration-related matters such as refugee and refugee resettlement status, as well as adjustment of status and family reunification matters.

Minnesota Advocates for Human Rights, Refugee and Asylum Project

310 Fourth Ave S #1000
Minneapolis, MN 55415
612.341.9845

Represents individuals who are seeking asylum in this country due to a well-founded fear of persecution in their country of origin.

Minnesota Council of Churches Refugee Services

122 W Franklin Ave, Ste 100
Minneapolis, MN 55404
612.874.8605

Offers legal services on immigration-related matters such as refugee and refugee resettlement status, as well as adjustment of status and family reunification matters.

Minnesota Public Defenders

Administrative Services Office Suite 900, Tri Tech Center
331 Second Ave S
Minneapolis, MN 55101
612.349.2565

Provides criminal and juvenile legal defense services to indigent clients through a public defender system.

Southern Minnesota Regional Legal Services, Inc. Migrant Legal Services

700 Minnesota Building
St. Paul, MN 55101
651.291.2837

Provides free legal services to eligible migrant farm workers who meet Legal Services corporation standards.

Volunteer Lawyer Network/Park Methodist Walk-In Clinic

Park Avenue United Methodist Church
3400 Park Ave S
Minneapolis, MN 55404

Provides brief consultations and referrals where appropriate to low-income persons living in Hennepin county who have immigration questions. The clinic is open only on Thursday afternoons from 3-5 PM. Clients are served on a first-come, first-served basis, with no appointments necessary.

World Relief

1515 East 66th Street
Richfield, MN 55423
612.798.4332

Offers legal services on immigration-related matters such as refugee and refugee resettlement status, as well as adjustment of status and family reunification matters.





3

Xuquuqdaadada Aasaasiga ah (rights) iyo Musuuliyadda ku saaran (responsibilities)

- 3.1 Dhibatada ka dhex dhacda qoyska
Waxaa loo yaqaana (Crisis Information) si aad u heshid hoyi tageero
Barnnamijyada u aadeega dhaqamada gaarka ah
- 3.2 Badbaada Ubadka ama Caruurta
Si aad war uga bixisid xaladahan nocan ah ee dhibaadada u gaynaysa caruurta
wac addega bulshada magaladaada iyo waliba booliiska.
Maxaa dhaca marka la soo sheego dhibaato nocan ah?
- 3.3 Dambi ku qaadida iyo Dal ka saarida (Criminal convictions and Deportations)
Dambiyada qaar dalka kasari kara qofka
- 3.4 Tigidhada Traafikada (Traffic Violations)
- 3.5 Khamrida/Tubaakada/ iyo Daroogada
- 3.6 Dhilaysiga ama ka bayacmushtar jirka (Prostitution)
- 3.7 Mukhalasnimada (Trafficking)
- 3.8 Cunsirinimo ama Midabtakoor (Discrimination)
- 3.9 What to Do if You Are Stopped by the Police
- 3.10 "Know Your Rights" Information

3.1 Dhibatada ka dhex dhacda qoyska

Dalka Mareeykanka waa ka dambi in qof la jir dilo ama maskaxda iyo niyada laga jabiyo, xitaa hadii ay ubadkaaga ama caruurta iyo xaaskaga ama ninkaaga.

Hadii jir dil ama niyed jabin lagugu haya waxaad wici kartaa lambarada so socda si aad cawimaad u heshid.

Waxaa loo yaqaana (Crisis Information) si aad u heshid hoyi tageero

24 sacadood khadka talefoonka waa (24 Hour Minnesota Domestic Violence Crisis Line)
866.223.1111

Ka ragu waa (24 Hour line for Men) 612.379.6361

Barnnamijyada u aadeega dhaqamada gaarka ah

Brian Coyle Somali Program, 612.338.5282

Si aad warar dheeraad ah u heshid wac lambarada Barnaamijka Dhibatoyinka qoyska (Domestic Abuse Project) ee ah 612.874.7063 xiliyada u dhaxeeya 9ka arrornimo ilaa iyo 5ta galabnimo ee Isniinta ila iyo Jimcaha.



3.2 Badbaada Ubadka ama Caruurta

Hayada layidhaa State of Minnesota Child Protection Services waa addeegyada Badbaadada Caruurta in ay ka difaacdi saqiirka in la jir dilo, in daryeeli waayo iyo waliba la fara xumeeyo isla mar ahaantaana ay ka caawiso qoysaska u baahan in laga caawiyo dhibatooyinkan oo kala si ay uga badbaadan.

Si aad war uga bixisid xaladahan nocan ah ee dhibaadada u gaynaysa caruurta wac addega bulshada magaladaada iyo waliba booliiska.

Anoka County Human Services	763.422.7125
Carver County Human Services	952.361.1600
Dakota County Social Services	952.891.7480
Hennepin County Children & Family Svcs.....	612.348.3552
Olmsted County Community Svcs	507.285.7009
Ramsey County Human Svcs Dept	651.266.4500
Scott County Human Services	952.445.7751
Wright County Human Services.....	763.682.7414

Maxaa dhaca marka la soo sheego dhibaato nocan ah?

Shaqaalaha dagmada ama magaaladaada ayaa la kulmaya qoyska si ay xalada u qiimeeyaan. Magaca qofka warka bixinaya loo sheegi mahayo qoska intiisa kale. Hadii loo baahdo addega u qalma baadbaado, Hayada Badbaadada Caruurta ayaa caawinaysa qoyska un samaynaysa waalidka waano iyo la talin iyo waliba cilmi barid. Muhiimada hayada badbaadada caruurta ayaa waxay tahay in la badbaadsho caruurta lagana hortago wixii dhibaato ku keenaya. Hadii u cunug nabadgal ku helaynin guriga waxaa loo raadinaya meel lagu daryeelo. Wareejinta cunuga laga wareejinayo guriga waxa lagu sammeyn kara walidka oo ogolaada iyo Maxkamad amar ku

bixisa in cunuga loo wareejiyo meel u ku badbaado. Hadii ay tahay xalad u baahan gargaar degdeg ahna booliska yaa amar ku bixin kara cunuga in laga wareejiyo guriga. Maxkamada ayaa go'an ku gaari doonta in cuniuga guriga lagu soo celiyo iyo in kalaba.

3.3 Dambi ku qaadida iyo Dal ka saarida (Criminal convictions and Deportations)

Xaladaha ama sababaha hoos ku xusan la'adligeed Qofkasta oo aan ahyan Wadani Mareykan wadanka waa laga saari kara:

- Asaga oo qofku u ku soogalay dalka Mareeykanka ruqsad la'an.
- Hadii lagu qaaday falal dambi oo xataa u aad u fudud
- Galitaan dambi kale iyadoo maxkamadi horey dambi kuxukuntay.

Dambiyada qaar dalka kasari kara qofka

Haysashada hub aan shati lahayn, oo ay kamid yihiin mindida iyo bustoolada xitaa hadii ay ku jirto baabuur kaaga ama aad xidhantahay. Hadii aad hub iibiso.

- Jirdil ama dhibato oo qoys sida tan xaas ama saxiib lala noolyahay
- Kahadhid la'an qof xidhiidkii idiin dhamaaday, sida xaas ama saaxiib (Stalking).
- Daryeel la'an ubadka ama jirtil caruurta.
- Xadida ama tuugada baabuurta.
- Xatooyada dukaamada ama boobka
- Dhilaysiga ama raadinta dhilayte.
- Gacaan ka hadal ama dagaal ay weheliyaan hub
- Ka baayacmushtarka maandooriyayaasha ama haysashada maandooriye (Drugs).
- Kufsi iyo weerar qof jirkii oo loo ga danlayhay kufsi.
- Laseexashada saqiir ka yar 18 sano.
- Been ka sheegid magacaaga khasatan hadii aad Xakim ama booliiska u sheegtid been.
- Hadii aad isticmaashid aqoonsiyo been ah si aad shaqo u heshid.
- Qoritaan jeeg been ah.
- Kamid hadaa noqoto budhcad dambilayaal ah ama wada falal dambi ah.
- Hadii aad u hanjabtid qof oo tiara waan ku dili.



Hadii aad falal dambi ah oo nocan ah aad gashay wac qareen ku takhasusay arimaha immegereeshinka.

Wararakan waxaan ka helay Xaruunta Sharciyada Soogalootiga ee Minnesota (Immigration Law Center of Minnesota), 193 East Roble Street, St. Paul, MN 55107-2323, 651.291.0110.

3.4 Tigidhada Traafikada (Traffic Violations)

Hadii lagugu xukumo ama lagu siiyo tigid lagugu ganaaxaayo ama mid ka yimid jabin sharciga wadida baabuurka ha ahaado ama ha ahaado mid dhigasho baabuur boos aadan xaq markaa u lahayn, markastaba waxaa lagaa rabaa inaad ku bixiso tigidka mudo cayuman iyo ganaax lacag

oo laxukumay. Hadii aad ganaaxa bixin weeydo waxaa la arkaa in maxkamad lagu diro , waxaa kale oo la'arkaa in lagu jarowaraaq amraysa in lagu soo xidho. Tigidhada taraafikada waxaa laga xukuma Magaalada (County). Xafiiska Magaalada ee Sharciga Jabiyayaasha (County Violation Bureaus) ayaa hawlgalaya. Xafiiskani wuxuu kaa cawinayaa dhinacyada talefoonka, shabakada internetka, iyo shaqsi ahaanba si aad u hesho jawaabo ku wajahan tigidhada, waraaqda maxkamada lagaaga yeedhayo, iyo ganaax bixintaba. Waxaa laga yaaba in lagaaga baahdo inaad maxkamad timaado iyadoo ay ku xidhantahay sida uu u culusyaday dambigu.

Si aad u hesho warar ku saabsan tigidh aad heshay iyo hadii aad rabtid inaad ka dacwootid la xiriir xafiiska magaalada ee loo yaqaan (Violations Bureau). Tusaale ahaan:

Hennepin County (4th Judicial District Court) Violations Bureau:

Hennepin County Government Center
Public Services Level
300 South Sixth Street
Minnneapolis, MN 55487-0014
612.348.2040
www.co.hennepin.mn.us/courts/TVB/tvbmain.htm

Ramsey County (2nd Judicial District Court) Traffic Violations Bureau

City Hall/County Courthouse
15 W. Kellogg Blvd, Room 130
St. Paul, MN
651.266.9202
www.ramsey.courts.state.mn.us/

Hadii aad u baahato talefoonada iyo cinwaanada magalooyinkas kale, ka fiiri qaybta bogaga buluuga ah ee buuga talafoonada ee magaalada (Phone Directory).

3.5 Khamrida/Tubaakada/ iyo Daroogada

Waa dambi waana mabnuuc in qof ka yar 21 sano iibsadaa ama cabaa khamri. Waxaa lkale oo dambi ah ahna mamnuuc in qof wayn uu u iibiyo qof ka yar 21 sano khamri.

Waa dambi waana mamnuuc in qof ka yar 18 sano uu iibsadaa tubaako sida sigaarka iyo tan la calaliyoba. Waa dambi waana mamnuuc in qof wayn u u iibiyo saaqiir ka yar 18 sano tubaako sida sigaar iyo tan la calaliyoba.

Waxaa jira noocyo fara badan oo maandooriyayaal ah ama daroogo oo laga helo dalka Mareeykanka. Waana dambi iyo mamnuuc in laga bacay mushtaro oo laa iibiyo ama la iibsado. Daroogooyinka ama maandooriyayaasha lagu xidhii hadii lagu qabto ayaa ah kuwan hoos ku xusan:

- Wax loo yaqaan "Cocaine/Crystal Meth"
- Xashiishad "Marijuana"
- Khad/Qaad/Jaad/ ama Miraa
- Waxa loo yaqaan "Amphetamines"
- Waxaa loo yaqaan "Opium/Opiates"
- Waxaa loo yaqaan "Ecstasy" (ioy maandooriyayaasha lagu dhax isticmaalo meelaha maaweelada qaarkood)



- Waxaa loyaqaan Heroin
- Daawo qof loo qoray oo aad u isticmaasho daroogo ahaan.

Intaani waa qayb oo kaliya, marka loo eego waxa looyaqaan Maandooriyayaasha. Qofkii lagu qabto waxay kalifeysaa in dambi lagu qaado oo laxiro dalkana laga saaro.



3.6 Dhilaysiga ama ka bayacmushtar jirka (Prostitution)

Waa dambi in uu qofku ku weeydaarsado ama iibiyo jidkiisa si uu u helo lacag, daroogo, ama cunto. Waadambi in uu qofku ku bixiyo lacag, daroogo ama cunto si u qof ula seexdo. Waa mamnuuc oo waa dambi inaad inuu qofku dhilaysto ama qof dhilaysanaya isweeydaarsi la sameeyo.

3.7 Mukhalasnimada (Trafficking)

Waa dambi in uu qof noqdaa Mukhalas. Sharciga u yaala dawlada dhexe (Federal Law) mukhalasnimada waxaa kamid ah

- Mukhalasnimada ama fadaalnimada ku wajahan dhilaysiga. Tas oo noqonkarta mid qofka lagu kalifaya inuu dhilaysto, una qofku ka yar yahay ama yahay saaqiir 18 sano ka yar.
- Mukhalasnimada waxaa kamid ah qof la soo kaxeeysto si u u noqdo qof la guumeeysto, la adoonsado, loo isticmaalo falal ka baxsan ibnu adnimada isla ,markaana laga yeelo wax aliyaale wixii la doono iyo waliba qofka oo la qarsado.

Waxaad wacdaa lambarada 888.428.7581 si aad u so sheegto ama aad war uga bixiso Mukhalasnimada.

Dad la kulma ama ay kudhacdo dhiba tooyinka noocan waxay u qalmaan addegyo bada ee bulshada aydoo ay san ku xirnayn sharcigiisa dalka Mareykanka ama xaalada qof ee Waaxda Socdaalka ama Imigereeshinka. Waaxyaha iyo Hayadaha dawlada dhexe sida FBI, INS oo hada layidhaa (BCIS), iyo xafiiska Xeer ilaalayaha ayaa waxay leeyihiin dad ama saraakiil ku takhasuustay caawimaada dhibanayaasha, si loo baaro dadkii dambiga galay iyo si loo mariyo wajibkooda. Dada ku takhasusay arintaan ayaa waxay tahay inay hubiyaan in dhibanayaashan laga war galiyo xuquuq dooda iyo waliba in loo tilmaamo addegyada bulsha ee ay heli karaan.



Federal Bureau of Investigations (FBI) 612.376.3200

Bureau of Citizenship and Immigration Services (horey u ahaa) "INS" 800.375.5283 iyo

Xaafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud (U.S Attorneys' Offices) 612.664.5600

Xaffis yada kale ee laga heli karo caawimaad la siiyo dhibanayaasha waa

Child Exploitation and Obscenity Section, Criminal Division, U.S Department of Justice
202.312.9639

Office of Refugee Resettlement, 202.401.9246

Office of Victims of Crime, U.S Department of Justice, 800.627.6872 or/ama 800.712.9279 (TTY)

Trafficking in Persons and Work Exploitation Task Force, 888.428.7581

Violence Against Women Office (VAWO), U.S Department of Justice 202.307.6026

Warabixintaan waxaa laga helay Wazaaradaha Dawladda Dhexe ee Dalka Mareykanka oo kala ah— (U.S Department of Justice, U.S Department of Labour, U.S Department of Health and Human Services, and the U.S Department of State.

3.8 Cunsirinimo ama Midabtakoora (Discrimination)

Dalaka Mareykanka waa ka danbi in qof la takoora, sida xaga shaqada, guryaha, addegyada bulshada, tacliinta iyo dayn bixinta baayacmushtarka, iyadoo loo eersanayo ama lagu takooraya qofka

Jinsiyadiisa, Midabka jirkiisa, Diintiisa, Dalak u u dhashay, Lab iyo Dhadig midkuu yahayba, Inuu Xaas yahay iyo hadii kalaba, Hadii u yahay qof aan Dhamayn ama lixda lixaadba qaba, Hadii uu qofku qaato addeegyada Bulashada, Da'diisa, Qofka lagumo takoori karo dookhiisa galmood (Sexual Orientation), Xaladiisa qoys.

Hadii aad aaminsan tahay in lagugu cusuriyeeyay mid kamid ah xaladahaan kor ku xusan waxaad la xiriiri kartaa xafiisya hoos ku xusan:

Minnesota Department of Human Rights

800.657.3704 ama 651.296.5663

ama booqo boga shabakada interneedka ee

www.humanrights.state.mn.us

Equal Employment Opportunity Commission

800.669.4000 (TTY 800.669.6820) si aad u hesho xaafiiska kuu gu dhaw

U.S Department of Justice Office of Special Counsel for Immigration Related Unfair Employment Practices

(oo ku khaas ah takoorka, ku wajahan shaqaaleeynta iyo shaqo ka joojinta).

800.255.7688 (TTY 800.237.2515)



3.9 Waxa la sameeyo hadii uu Booliis ku joojiyo

Hadii aad baabuur kaga wadi oo uu gaadaal kaga yimaado booliis nalka baabuurkiisa ifayo una kaa codsado innad gees u istaagto waa laasim inaad joog sataa. Si deganaansha leh u qabooji baabuur kaga, gees u bax dartiib babuurka u jooji. Fadhi baabuurka gudhiisa sugna inta uu sarkaalka booliiska ahi kaga imanayo. Hadii aad ka soo baxdo baabuurka waxaa laga yaaba inuu booliisku isyiraahdo inaad rabto inaad weererto.

Si aad u fahanto waxaad qaban laheeyd iyo wax yaabaha dhaqanka ka ah Mareykanka fiiri cutubka 13naad ee Buugan Jihaynta. Waxaad kale ood fiirisaa cudubka 3xad si aad u ogaato xuquuqdaada.

Waxaa dheeraad ah

- Si xishmad leh u ula hadal booliiska hadii ay ku joojiyaan. Waligaa af lagaadada iska ilaali.

- Ilaali habka aad u dhaqdhaqaaqaysis iyo dareenkaga qiiri.
- Booliiska ha lamurmin.
- Ogow wax walba oo aad ku hadashaa waxaa lagugula isticmaali karaa maxkamad.
- Gacmahaaga marwalba booliisku ha arko.
- Ha ordin, ha taabanini booliiska.
- Hadiidin booliiska xita hadii aad aaminsantahay inaad tahay sax.
- Haku murmin goobta hana ku dhihin booliiska waad khadantahay.
- Hadii lagu xidho ha ku dhihin booliiska waxba hadal ah sug intaad ka heleeeyso qareen.
- Xusuusnow lambarada sarkaalka booliiska ah suda ka aqoonsi iyo kan baabuurkaba.
- Iskuday inaad hesho markhaati, talafoonada na ka qad.
- Hadii aad dhawacanto isku day inaad sawir ka qaado lakiinse dhakhso u raadi daryeel caafimaad.
- Hadii aad u maleeynayso in xuquuqdaada lagu xad gudbay buuxi xaanshi eed ah una dir waaxda booliiska ee baarda calaacalka ama eedaha dadweeynaha iyo gudaha waaxda booliiska.

WARARKAN WAXAA LAGA Helay (ACLU) SHABAKADA INTERNEDKA WAA WWW.ARCHIVE.ACLU.ORG/ISSUES/CRIMINAL/BUSTCARDTEXT.HTML

3.10 Warbixinta (Baro Xuquuqdaada)

Hadii aad tahay wadani Mareykan ah iyo hadii kaleba waxaad leedahay xuquuq dalka Mareykanka gudihiisa.

- Xuquuqda aad ku aamusnaan karto hadii u boolis ama sarkaal dowlada ah su'al ku weydiyo.
- Xuquuda aad u leedahay inaan la iska kaa baaran karin oo aan la iska kaa qabsan karin iyado aysan jiri xaanshi amar maxkamad.
- Xuquuqda aad u leedahay inaad ka shaqaysa isbadal iyo inaad si xor ah codkaaga u dhiibataa. (Free Speech).

Wararka ku saabsan hadii ay kula so xiriiraan hayada (FBI) ama Saraakiil Imigereeshanka wac qareemada National Lawyers Guild oo laga helo 212.679.5100. Ama gal shabakada internetka ee www.nlg.org.





4

Qaadashada Liisanka Baabuur Wadidda (Driver's License) iyo Aqoonsiyada kale ee aasaasiga ah

- 4.1 Aqoonsiyada lama huraanka u ah in la helo Taysarada Gobolka iyo Liisanka Baabuur Wadidda
- 4.2 Dalbashada Liisanka Baabuur wadidda
- 4.3 Shuruudaha Imtixaanka
 - Imtixaanka Aqoonta Guud (qoraalka)
 - Imtixaanka baabuur wadidda (kaxaynta baabuurka)
 - Baaritaanka Indhaha (aragtida)
- 4.4 Xafiiska Badbaadada Bulshada (*Social Security Administration Office*)
- 4.5 Liisanka dhugdhuglayda (*Bicycle License*)
- 4.6 Kaluumaysiga iyo Ciyaaraha Dibedda
- 4.7 Ogolaanshaha Hubka
- 4.8 Waaxda Socdaalka
- 4.9 Xadidda Sharciyada/aqoonsiga shaqsiga (*Identity Theft*)
 - Wadaagga Warkaaga Khaaska ah (*Sharing Personal Information*)
 - Haddii aad u malaynaysid in lagula isticmaalay magacaaga amaba la xaday ahaanshahaaga sharciyeed
 - Nambarka Badbaadada Bulshada (*Social Security Number*)

4.1 Aqoonsiyada Lama huraanka u ah in la helo Taysarada Gobolka iyo Liisanka Baabuur Wadidda

Si aad u dalbato Liisanka baabuur wadidda ee Minnesota, Liisanka barbaradka ama taysarada gobolkan waa in aad haysataa:


Liisanka baabuur wadidda ee Minnesota, Liisanka barbaradka ama taysarada gobolkan oo aan waqdigiiisii dhicin, ama mid dhacay oo

- Aan dhacsanayn wax ka badan 5 sanno—Haddii uu sawir leeyahay.
- Aan dhacsanayn wax ka badan 1 sanno—Haddii aanu sawir lahayn.

Haddii aanad haysan mid ka mida sharciyada kor ku xusan, waa in aad haysataa laba aqoonsi oo ka kala kooban derejada koowaad iyo derejada labaad. Sharciyada derejada koowaad waxa qasab ah in ay ku qornaadaan magacaaga oo buuxa (magacaaga, kan aabahaa iyo kan awoowgaa), maalinta, bisha iyo sanadka aad dhalatay.

Sharciyada derejada koowaad waxaa ka mid ah:

- Baasboor aan dhacsanayn (not expired) oo aan maraykan ahayn oo uu ku yaalo fiisaha joogitaanka dalkan Maraykanka oo aan weli wakhtigiisii dhicin (I-551 ama I-94).
- Mid ka mid ah sharciyada soo socda oo laga bixiyay Waaxda Cadaaladda ee dalkan Maraykanka. Sharciyada waa in aan weli wakhtigoodii dhicin:
 - Shahaadada qaadadshada jinsiyadda maraykanka (Naturalization Certificate) : N-550, N-570, ama N-578
 - Shahaadada dhalashada maraykanka (Citizenship Certificate): N-560, N-561, ama N-645
 - Taysarada muwaadinnimada ee Maraykanka (US Citizen Identification card): I-179, ama I-197
 - Aqoonsiga degenaanshaha rasmiga ah (Permanent Resident/Resident Alien Card): I-551 ama I-151
 - Aqoonsiga Mariyaanada Waqooyi (Northern Mariana Card): I-873
 - Aqoonsiga Hindida Maraykanka (American Indian Card): I-872
 - Waraaqda shaqada oo sawir leh (Employment Authorization Card with photo): I-688, I-688A, I-688B ama I-766.
 - Waraaqaha Socdaalka (Re-entry Permit/Refugee Travel Document): I-571



Sharciyada derejada labaad waxaa ka mid ah:

- Liisanka baabuur wadidda, Liisanka barbaradka baabuur wadidda, ama taysaro gobol oo laga bixiyay gobol kale oo aan ahayn Minnesota, District of Columbia, Guam, Puerto Rico, the U.S. Virgin Islands, ama dhamaanba gobolada/deegaanada Canada oo aan waqdigiiisii dhicin, ama mid dhacay oo dhacsanaa in ka yar 5 sanno.
- Sawirka waraaqda dhalashada oo nuqlan (certified) oo ka soo baxday maamul dawladeedyada aan ahayn District of Columbia, Guam, Puerto Rico, the U.S. Virgin Islands.
- Waraaqda Guurka (marriage certificate) oo ay bixisay dawladdu.
- Kaarka badbaadada bulshada (Social Security Card) oo aan la birayn, lana bacayn ama aqoonsiga caymiska bulshada ee Canada.

- Aqoonsiga dugsiya sare oo aan weli wakhtigiisii dhicin. Waxa qasab ah in uu ku qornaado aqoonsigan magaca ardayga oo buuxa, taariikhda dhalashada, lambar tixraac oo u gaar ah iyo sawirka ardayguba.

Sharciyada derajada koowaad iyo derajada labaad ee aad kor ku aragtaanba waa tusaale gaaban oo keli ah. Liistada sharciyadaas oo dhamays tiran waxa aad ka heli kartaa:

www.dps.state.mn.us/dvs/DriverLicense/DL_Info/DL_frame.htm

Magaca ku qornaandoona Liisanka baabuur wadidda, Liisanka barbaradka baabuur wadidda (instructions permit), ama taysarada gobolku waxa uu noqondoonaa magaca ku qoran sharcigaaga derajada koowaad (primary document) ama kan ku qoran shahaadada magac bedelidda (legal name change document).



Aqoonsiyadaada waa la baari karaa, lana diidi karaa haddii wax laga tirtiray amaba lagu kordhiyay (if altered). Aqoonsi kasta oo aan ku qornayn afka Ingiriisiga waa in ay wehelisaa turjumid sharciyaysan.

Haddii aad u baahan tahay warbixin intaas ka badan oo ku saabsan shuruudaha aqoonsiyada, fadlan wac 651.297.3378 ama E-mail u dir: drivers.licenses@state.mn.us

4.2 Dalbashada Liisanka Baabuur wadidda

Waxa aad u baahan doontaa:

- Waraaqaha aqoonsiga
- Xaashida Cadaanka iyo Jaalaha ah ee tusaysa in aad ku baastay imtixaankii qoraalka.
- Dhamaanba liisamada baabuur wadidda ee aad haysato. Waa la ogol yahay liisamada dalalka kale aad ka soo qaadatay, haddii aad wada leedahay dhalashada dalkaas iyo tan maraykanka (dual citizenship).
- In aad marto baaritaanka aragga (indhaha).
- In sawir lagaa qaado. Madax qarinta waa la ogol yahay haddii ay ku salaysan tahay "Diin amaba Caafimaad".
- In aad bixiso lacagta lagaaga baahan yahay (fees).

Waxa aad si gaar ah u codsan kartaa Liisanka baabuur wadidda, adiga oo ka buuxinaya waraaqaha loogu talo galay (applications) xafiisyada qaabilsan. Xafiisyadan qaarkood waxa lagu galaa imtixaannada. Liistada xafiisyadan waxa aad ka heli kartaa: www.dps.state.mn.us/dvs/NewResident/License.htm

4.3 Shuruudaha Imtixaanka

Waxa jira saddex imtixaan (Aqoonta Guud, Baabuur wadidda iyo Indhaha) oo qasab ah in aad marto kahor inta aan lagu siin Liisanka baabuur wadidda.

Imtixaanka Aqoonta Guud (qoraalka)

Imtixaanka Aqoonta Guud (qoraalka) waxa aad ka geli kartaa xafiisyada imtixaanaadka, adiga oo aan balan hore sii dhigan. Waa in aad tustaa sharciyadaada marka aad u diyaar garoowdo gelitaanka imtixaanka. Imtixaankanu waxa uu ka kooban yahay su'aalo aad dooranaysid tan saxda

ah (sax iyo qalad) iyo kuwo aad u kala dooranaysid run iyo been. Ujeedada imtixaankanu waxa uu yahay in la hubiyo aqoonta uu shaqsigu u leeyahay sharciyada iyo xeerarka jidadka/ calaamadaha ee Minnesota. Xafiisyada imtixaanada qaarkood waxa aad ka heli kartaa imtixaankii oo aad kaga jawaabayso Kumbiyuutarka dushiisa oo ku qoran afafka Hmong, Vietnamese, Somali, Spanish iyo Russian.

Imtixaanka baabuur wadidda (kaxaynta baabuurka)

Imtixaanka baabuur wadidda (kaxaynta baabuurka) waxa lagugu imtixaamayaa aqoonta aad u leedahay kaxaynta baabuurka iyo in aanad halis galinayn ummadda. Imtixaankanu waxa lagu qaadayaa jidka dhabta ah ee baabuurto marto, adoo ilaalinaya sharciyada dhabta ah ee u yaala gaadiidka. Lagama yaabo in uu ku raaco qof aan ahayn imtixaan qaadaha. Waxa aanu kugula talin lahayn in aad balan qabsato marka aad imtixaan noocan ah gelaysid.

Baaritaanka Indhaha (aragtida)

Baaritaanka Indhaha (aragtida) waxa lagu baari doonaa indhahaaga iyo sida ay wax u arkaan. Waa aalad ama qalab aad fiirinaysid oo lagu cabirayo in aad arki kartid inta ugu yar ee uu sharcigu ogol yahay.

- Haddii aad wax su'aal ah ka qabto warbixinada sare, fadlan la xiriir:

Minnesota Department of Public Safety

651.296.6911

Hours: 8:00 AM—4:30 PM Isniin—Jumce.

E-mail: motor.vehicles@state.mn.us

4.4 Xafiiska Badbaadada Bulshada (Social Security Administration Office)

Xafiiska badbaadada bulshadu waa meesha aad ka dalban karto kaarka badbaadada bulshada (Social Security Card), ka dalban karto Gunooyin badan (benefits): fiiri Cutubka 5aad, Gunooyinka bulshada, si aad u hesho warbixin intan ka badan amaba ka doono warbixinta aad u baahan tahay isla xafiiskaas.

Si aad u hesho xafiiska badbaadada bulshada ee kuugu dhoow, fadlan wac 800.772.1213, maalmaha Isniinta ilaa Jumcaha, 7 subaxnimo ilaa 7 maqribnimo.

Regional Social Security Offices	
1811 Chicago Avenue Minneapolis, MN 55404-1998	316 Robert Street North, Room 185 Saint Paul, MN 55101-1483
3220 County Road 10 Brooklyn Center, MN 55429-3063	401 16th Avenue N.W., Suite 104 Rochester, MN 55901-1854

4.5 Liisanka dhugdhuglayda (Bicycle License)

Magaalooyinka qaar ayaa ay qasab tahay in aad ka diiwaangeliso dhugdhuglaydaada. Dhugdhuglayda waxa aad ka diiwaan gelin kartaa dhamaanba xafiisyada “diiwaan gelinta gaadiidka mooteerka ku socda ama qaar ka midda tukaamada gada dhugdhugleeyada. Waa in aad bixisaa US\$10.00, marka aad diiwaan gelinaysid Dhugdhuglayda. Diiwaan gelintaasu waxa ay socotaa saddex sano oo ka bilaabma 1da January kuna dhamaada 31ka Decenber. Tambeelaha gobolkanu waa waraaq dhalaal badan oo cabirkeeduna yahay 1.5/2.5 inch, laguna dhejo meesha loogu talo galay ee ka hoosaysa kursiga.

Si aad u ogaato xafiiska diiwaangelinta ee kuugu dhoow, fadlan la xiriiir:


Driver and Vehicle Services

445 Minnesota Street
St. Paul, MN 5501
651.296.6911



4.6 Kaluumaysiga iyo Ciyaaraha Dibedda

Waa qasab in aad haysato liisan, haddii aad rabto in aad kaluumaysato, ugaarsato, barafka ku socoto (meelaha banaanka ah) amaba ku ciyaarto gawaarida barafka ee gaarka ah. Si aad u dalbato liisamadaas, fadlan la xiriiir:



Minnesota Department of Natural Resources
DNR Information Center
500 Lafayette Road
St. Paul, MN 55155-4040
651.296 6157

Saacadaha xafiiska: 8:00 subaxnimo—4:30 galabnimo, Isniin—Jumce.

4.7 Ogolaanshaha Hubka

Waa in aad haysataa ogolaansho si aad u qaadato hub (Minnesota). Waaxda booliiska ayaa bixisa ogolaanshahan, kaas oo kuu ogolaanaya in aad ku isticmaasho gobolka oo dhan. Qofka codsanayaa waa in uu tagaa xafiiska booliiska ee magaalada uu degen yahay/ku nool yahay, tusaana Liisankiisa baabuur wadidda amaba aqoonsi kale oo uu ku yaalo cinwaanka meesha uu degen yahay. Haddii aanay magaaladaadu lahayn booliis waa in aad ka dalbataa xafiiska Shariifka ee deegaanka (County) aad ku nooshahay. Si aad u ogaato shuruudaha ogolaanshaha hub qaadashada, fadlan la xiriiir: www.ci.minneapolis.mn.us/police/crime-reporting/gun-permits.asp



4.8 Waaxda Socdaalka

Warbixinada ku saabsan arrimaha socdaalka, fadlan fiiri cutubka 2aad ee qoraalkan, Warbixinta Waaxda Socdaalka.

4.9 Xadidda Sharciyada/aqoonsiga shaqsiga (Identity Theft)

Tuugta xadda Sharciyada/aqoonsiga shaqsigu waxa ay samayn karaan waxyaabo dhawr ah si ay u xadaan wabixintaada khaaska ah (personal information).

Waxyaalaha ay samayn karaan waxaa ka mid ah in ay xadaan shandadaada lacagta (wallet), boorsada garabka (purses), si ay u helaan waraaqahaaga aqoonsiga, wararka ku saabsan bangigaaga iyo kaadhka deynta (credit card). Waxa ay u isticmaali karaan wararka ay kaa heleen in ay ku furtaan credit card cusub, iyaga oo isticmaalaya magacaaga, taariikhdaada dhalashada iyo nambarkaaga Social Security-ga. Waxa kale oo ay magacaaga ku furan karaan akawnd bangi (account) oo cusub, kaas oo ay ku wasakhayn karaan iyaga oo qora jeegag been ah oo magacaaga ku qoran. Runtii waa arrin khatar ah.



Wadaagga Warakaaga Khaaska ah (Sharing Personal Information)

Ka hor inta aanad cidna la wadaagin warakaaga gaarka ah, hubi sida loo isticmaalidoono iyo sida loo ilaalindoono iyo weliba in cid kale loo sii gudbindoono. Weydii in aad doorasho leedahay ku saabsan sida loo isticmaalayo warakaaga gaarka ah. Ma dooran kartaa in warakaaga sir laga dhigo/cid kasta laga qariyo. Talooyinkan dhuux:

- Ha qaadanin kaarkaaga badbaadada bulshada (Social Security Card). Kaga tag meel badbaado qabta.
- Sii nambarkaaga badbaadada bulshada, haddii aad ku qasban tahay oo keli ah.
- Qaado aqoonsiyada iyo kaararka bangiyada (credit & debit) ee aad run ahaan ugu baahan tahay oo keli ah.
- Ka taxadir xayeysiiska beenta ah (promotional scams). Tuugta rabta in ay magacaaga xadaan waxa laga yaabaa in ay kugu soo xero gashaan balan qaadyo been ah si ay u helaan warakaaga gaarka ah.
- Shandadaada lacagta iyo tan garabkaba dhigo meel badbaado qabta, gaar ahaan marka aad shaqaynaysid.

Haddii aad u malaynaysid in lagula isticmaalay magacaaga amaba la xaday ahaanshahaaga sharciyeed

La xiriir qaybta burcadnimada ee mid kasta oo ka mid ah saddexda xafiis ee ugu waaweyn ee ilaalinta rikoodhada daynta (credit bureaus), una sheeg in magacaagii la xaday.

Equifax www.equifax.com 800-525-6285 P.O. Box 740241 Atlanta, GA 30374-0241	Experian www.experian.com 888-397-3742 P.O. Box 9532 Allen, TX 75013	TransUnion www.transunion.com 800-680-7289 Fraud Victim Assistance Division P.O. Box 6790 Fullerton, CA 92834-6790
------------------------------------------------------------------------------------------------	-----------------------------------------------------------------------------------------	------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------

Haddii ay dhacday in akawndadaada si tuugu ah loo galay amaba qaar cusub lagu furtay magacaaga, la xiriir qaybta badbaadada (security department) ee bangigaas (financial institution) amaba deyn bixiyaha (creditor). Xir dhamaanba akawndadaasi. U samee nambarka sir ah (password) akawnd kasta oo cusub oo aad furato.

Dacwad ka fur xafiiska booliiska ee deegaankaaga amaba booliiska meesha magacaaga lagaaga xaday. Hayso sawirka xaashiyaha dacwadaada, si aad u cadayn karto tuugada dhacday haddiiba ay u baahdaan bangiga, dayn bixiyayaasha iyo cid kasta oo ay khusayso.


Nambarka Badbaadada Bulshada (Social Security Number)

Cidda aad u shaqayso (Shaqsi iyo shirkadba) iyo bangiyaduba waxa ay mar kasta u baahan yihiin nambarkaaga badbaadada bulshada (SSN) si ay u diiwaan geliyaan mushaaradaada iyo canshuuraha. Ganacsiyada kale waxa suurto gal ah in ay ku weydiiyaan nambarkaaga SSN-ka si ay u baaraan taariikh daymeedkaaga (credit history), sida marka aad codsato in aad deyn qaadato amaba aad guri kiraysato. Kuma qasbanid in aad ganacsiyadaas siiso nambarkaaga SSN-ka haddii aanad raali ka ahayn. Haddii uu qof ku weydiiyo nambarkaaga SSN, weydii su'aalahan:

- Maxaad uga baahan tahay nambarkayga SSN ?
- Sidee ayaad u isticmaalaysaa nambarkayga?
- Sharcigee dhigaya in aan ku siiyo nambarkayga?
- Maxaa dhacaya haddii aanan ku siinin nambarkayga?

Haddii uu qof isticmaalo nambarkaaga SSN, waa in aad ku dacwootaa Gudiga Dowladda Dhexe ee Ganacsiga (Federal Trade Commission) oo aad ka heli karo:

www.consumer.gov/idtheft ama wac 877.438.4338





5

Adeegga Bulshada

Public Benefits

- 5.1 *Soogaleetnimada iyo u qalmidda Adeegyada Bulshada (Immigration and Public Benefit Eligibility)*
- 5.2 *Mashruuca Maalgelinta Qoysaska Minnesota (Minnesota Family Investment Plan-MFIP)*
- 5.3 *Gargaarka Guud, Kaarka Cuntada, Gargaarka Caafimaadka (General assistance, Food Stamps, Medical Assistance)*
- 5.4 *U qalmidda Badbaadada Bulshada (Social Security Benefits)*
- 5.5 *Xafiisyada Taakulaynta Bulshada ee Deegaan Hoosaadka (County Public Assistance Office Locations)*
- 5.6 *Caymiska Shaqo-Laawayaasha (Unemployment Benefits).*

5.1 Soogaleetnimada iyo u qalmidda Adeegyada Bulshada (Immigration and Public Benefit Eligibility)

Dowladda Maraykanku waxa ay u fidisaa taakulayn dhaqaale dadka qaar, marka ay u baahan yihiin, ayna buuxiyaan shuruudaha looga baahan yahay. Sharcigaaga soogaleetnimo qayb ayuu ka qaataa u qalmidda gargaarkaas (Gargaarka Lacagta, kaararka Cuntada iyo Caafimaadkaba). Sharciyada soogaleetnimo qaarkood ayaan loogu ogolayn in qofkaasu dalbado gargaaradaas.

Waxa muhiim ah in aad ogaato

Qoxootiga/Magan gelyo weydiistayaasha

Haddii sharcigaaga joogitaanku (I-94), waa kaarka cad'e, ay ku taalo shaabad guduud ah(Casaan ah), waxa aad u qalantaa in aad codsato gargaarka dawladda (Gargaarka Lacagta ee qoxootinimada, kaararka Cuntada ee qoxootinimada iyo Gargaarka Caafimaadka ee qoxootinimada). Haddii aad leedahay caruur waxa aad ka mid noqondoontaa qaybta loo yaqaan MFIP oo macnaheedu yahay: Mashruuca Maalgelinta Qoysaska Minnesota / Minnesota Family Investment Plan.

Adeegyada aan ahayn MFIP-ta waxa lagu siinayaa ugu badnaan muddo 8 bilood ah, iyada oo ay ku xiran tahay dhaqaalaha soo gala qoyskaaga. Mararka qaarkood waa suurto gal in lagu


kordhiyo mudada lagu siinayo. Gargaarkan waxaa loogu talo galay in lagu fududeeyo la qabsiga dalkan aad ku cusub tahay ee Maraykanka. Waa in aad ku codsataa gargaarkan 8-da bilood ee ugu horeeya, marka aad soo gasho dalka (Waa qoxootiga dibadda laga soo qaadaye/Refugees) ama Sideeda bilood ee ugu horeeya markii lagu siiyay sharciga magangelyada (Waa haddii aad dalka gudhiisa iska dheebtaye/Asylees). Ha ahaadeen gargaarka qoysaska (MFIP) ama kuwa kaleba'e (non-MFIP), mudada ugu badan ee uu qof qaadan karaa waa 5 sanno noloshiisa oo dhan. Taas macnaheedu waxa uu yahay in inta aad nooshahay oo dhan aad qaadan karto gargaarkan muddo u dhiganta marka la isku dardaro 5 sanno oo keli ah. Fiiri hoos, si aad u aragto habka aad u dalban karto adeegyadan.



Dadka Sharciga Cayiman ee kulmeelgaarka ah haysta (People with Temporary Protected Status/TPS) / Dadka laga joojiyay Mustaafurinta (Deferred Enforced Departure/DED).

In kasta oo laga yaabo in aad u qalanto in lagu siiyo gargaar deegaaneedkan (county eligibility), waxase muhiim ah in aad ogaato in qaadashada gargaarkanu raad

ku yeelandoono helitaanka sharciga degaanshaha rasmiga ah (Legal Permanent Resident/Green Card—holder). Si aad u ogaato raadka ay qaadashada cayrtu ku yeelan karto helitaanka sharcigaaga, waxa muhiim ah in aad la tashato qareen ku takhahusay arrimaha Hey'adda Socdaalka. Fiiri cutubka 2.5 (Legal and Community Resources) ee qoraalkan, si aad u hesho liistada hey'adaha kaa caawin kara arrimaha Hey'adda Socdaalka.



Deganayaasha Rasmiga ah (Lawful Permanent Residents/ Green Card-holders).

Dadku waxay ku helaan sharciga kaarka cagaaran ee degenaanshaha rasmiga ah siyaabo kala duwan (xiriir qoys / family based petition, xiriir shaqo / employment based petition, fiisaha bakhtiyaa-nasiibka ah / the Diversity Visa Lottery).



Inta badan, si lagu siiyo sharcigan, waxa ay u badan tahay in aad adiga amaba qofkale oo qoyskaaga ahi saxeexay waxa loo yaqaan "Affidavit of Support ama Ballan qaadka taakulaynta". Waraaqdan waxa aad ku ballan qaaday amaba qofka kuu saxeexay ku ballan qaaday in aad isku filan tahay, aanadna ka codsandoonin dowladda wax taakulayn ah. Taas macnaheedu waxa uu yahay in aanad u qalmin dalbashada gargaarka dawladda, sharciyanna ay kaa mamnuuc tahay in aad dalbato. Waxase dhacda in mararka qaarkood lagu ogolaado amaba aad u qalanto gargaar degdeg ah. Si aad u ogaato sida sharcigaagu u khuseeyo dalbashada gargaarka bulshada, waxa muhiim ah in aad la xiriirto qareen ku takhakhusay arrimaha Hey'adda Socdaalka. Fiiri cutubka 2.5 (Legal and Community Resources) ee qoraalkan, si aad u hesho liistada hey'adaha kaa caawin kara arrimaha Hey'adda Socdaalka.

5.2 Mashruuca Maalgelinta Qoysaska Minnesota (Minnesota Family Investment Plan-MFIP)



Mashruucan Maalgelinta Qoysaska Minnesota ama MFIP waa mashruuc gaarsiisan gobolka oo dhan, looguna talo galay in lagaga saaro qoysaska reer Minnesota fiqiirnimada. Waxa la siiyaa qoysaskan bilkasta taageero ah dhaqaale lacageed (cash) si kor loogu qaado dakhligooda, waxa laga bixiyaa kharashka loogu hayo caruurtooda (child care costs), caawimo caafimaad (medical assistance) iyo ka caawinta shaqada (employment services). MFIP waxa ay ku egtahay muddo 60 bilood ah(5 sanno) iyo shuruudo la xiriira shaqada oo looga baahan yahay qofka la siinayo. Si aad u dalbato, la xiriir xafiiska deegaankaaga (Fiiri cutubka 5aad si aad u aragto liistada magaalada).

5.3 Gargaarka Guud, Kaarka Cuntada, Gargaarka Caafimaadka (General assistance, Food Stamps, Medical Assistance)

Gargaarka Guud waxa uu suurto geliyaa qaadashada lacag (cash) bilkasta ah, gaar ahaan dadka da'doodu u dhaxayso 18 sanno ilaa 64 sanno ee aan naftooda taageeri karin. Si uu qofku ugu qalmo taageerada waa in uu:

- Ku noolaada Minnesota ugu yaraan muddo 30 maalmood ah
- Aanu shaqayn karin ugu yaraan 30 maalmood
- Aanu haysan qof ka yar 18 sanno oo kula nool isla gurigaas oo uu isagu ka masuul yahay.
- Uu leeyahay dhaqaale aad u yar amaba aanu lahayn wax dhaqaale ah oo soo gelaya, haba yaraatee



- Aanu qaadan gargaarka loo yaqaan SSI (Supplemental Security)

Gargaarka Lacageed ee Qoxootiga (Refugee Cash Assistance/RCA), marka laga reebo qoysaska iyo dumarka uurka leh ee qaata mashruuca MFIP, waxa kale oo RCA-du ay taageero lacageed siisaa qoxootiga aan u qalmin amaba aan qaadan karin lacagta hawl-gabka ee loo yaqaan SSI (Supplimental Security Income), soona galay dalkan Maraykanka 8dii bilood ee ugu dambeeyay ama laga siiyay dalka gudihisa sharciga Magangelyada 8dii bilood ee ugu dambeeyay. Dadka awoodi kara (xoogga leh) waxaa ku qasab ah in ay ka qayb qaataan barnaamij “Shaqo” amaba “Tababar”. Qaatayaasha RCA ee aan caafimaadka qabin (disabled) amaba da’doodu gaarto 65 sanno iyo wixii ka weyn waxa ay ku qasban yihiin in ay dalbadaan gargaarka loo yaqaan SSI. Marka ay qofka ka dhamaato mudaddii loogu talo galay mashruuca gargaarka lacageed ee RCA waxa suurto gal ah in loo raadiyo gargaar/taakulayn kale, haddii aanu weli isku filnayn.



Kaarka Cuntada waxaa la siiyaa dadka dhaqaalahoodu hooseeyo, si ay ugaga gataan cunto tukaamada magaalada. Si loo xisaabiyo in qofku u qalmo taageerada noocan ah waxaa la eegaa dhaqaalaha soo gala qofka (income), raasamaalka u yaala (assets) iyo hantida (property) dadka wada degan guriga ee cuntada wada karsada iyo weliba kuwa lagu tirin karo in ay ka mid yihiin qoyskaaga, sida ku qeexan xeererka mashruucan. Dalbadayaasha taageeradanu waa ay noqon karaan, keli, xaasley caruur leh iyo kuwo aan caruur lahayn. Waa ay noqon karaan da’ kasta, iyaga oo shaqeeya amaba aan shaqaynba.

Gargaarka Caafimaadku (Medical Assistance) waa gargaar ka soo jeeda dawladda sare ee dalkan (Federal) oo loogu talo galay in uu ka caawiyo helitaanka caafimaad iyo xanaaneynta dadka waaweyn, dadka aan awoodayn in ay iska bixiyaan. Waxa jira shuruudo qasab ah in uu qofku buuxiyo oo la xiriiira dhaqaalaha soo gala (income), raasamaal (asset) iyo hanti (property). Qofku waa in uu ka mid noqdaa kooxahan hoos ku qoran si loogu ogolaado caawimadan Caafimaad:

- Ka yar yahay 21 sanno ama gaaray 65 sanno iyo wax ka weyn.
- Jirkiisu kala dhiman yahay (disabled)
- Indho Laayahay (blind)
- Uur leedahay (pregnant)
- Waalidka amaba xanaaneeyayaasha ilmo ka yar 19 sanno (xaaladaha qaar).

Waxa dhici karta in qofku u qalmo amaba loo ogolaado oo keli ah Gargaarka Cafimaad, inkastoo ay dhici karto in uu u wada qalmi karo gargaarrada caafimaad, lacageed iyo/ama kaarka cuntadaba. Caadiyan, kuwa ku qaata gargaarka lacageed ee barnaamijka MFIP ama barnaamijka Taakulaynta Dheeraadka ah ee Minnesota (Minnesota Supplement Aid / MSA) waa ay u qalmaan gargaarkan caafimaad, inkastoo qaar ka reebanayaal ahi jiri karaan. Nooca gargaarka caafimaad ee loo yaqaano “Medical Assistance” waa uu ka duwan yahay nooca kale ee loo yaqaan “Medicare”. Barnaamijka Medicare waa barjaamij ay leedahay dowladda sare (Federal) oo uu maamulo xafiiska Badbaadada Bulshadu (Social security Administration).

Gargaarka Guud ee Caafimaadka (General Assistance Medical Care / GAMC) waa gargaar caafimaad oo heer gobol ah (State) oo loogu talo galay in lagu caawiyo dadka aan iska bixin

karin baahidooda caafimaad. Waxa lagu qiimeeyaa dhaqaalaha soo gala qofka (income), raasamaalka u yaala (assets) iyo hantidiisa (property). Waa in aanu qofku qaadan gargaarada caafimaad ee aan kor ku sheegnay (Medical Assistance). Barnaamijka GAMC ma bixiyo kharashka guryaha lagu xanaaneeyo dadka waaweyn (nursing home care). Waxa suurto gal ah in qofka loo ogolaado GAMC oo keli ah, sidoo kale waa suurto gal in loo wada ogolaado gargaarada GAMC, lacagta iyo/ama kaarka cuntada. Inta badan, dadka qaata gargaarka guud (General assistance) waa ay u qalmaan gargaarka caafimaad ee loo yaqaan GAMC.

Gargaarka Caafimaad ee Qoxootigu (Refugee Medical Assistance / RMA) waa gargaar heer qaran ah (Federal) oo loogu talo galay qoxootiga jooga dalka in ka yar 8 bilood in uu ka caawiyo baahidooda caafimaad. Waxa lagu qiimeeyaa dhaqaalaha soo gala qofka (income), raasamaalka u yaala (assets) iyo hantidiisa (property). Qoxootiga qaata gargaarada caafimaad ee aan kor ku soo sheegnay uma qalmo amaba ma qaadan karo RMA. Tusaale: Qofka qoxootiga ah ee ku jira Medical Assistance waxa uu ku koobnaanayaa barnaamijkaas uu ku jiro oo keli ah. Qoxootiga qaata taageerada lacageed (Refugee Cash Assistance) waa uu u qalmaa RMA, bilaa shuruud, haddii aanu hore ugu qalmin Medical assistance-ka kor ku xusan.

Xanaanaynta Minnesota (MinnesotaCare) waa barnaamij taakulayn oo kala dhiman (subsidized) oo ah helitaanka caymis caafimaad oo jaban, si uu qofku u bixin karo kharashka caafimaadka daruuriga ah (basic), ilkaha (dental) iyo ka hortagga (preventive care). Waa barnaamij loogu talo galay dadka aan caymiska lahayn ee reer Minnesota, buuxiyana shuruudaha looga baahan yahay ee la xiriira lacagta soo gasha (income), raasmaal (asset) iyo hantida (property). Warbixin ku saabsan barnaamijkan iyo sida loo codsada waxa aad wici kartaa: 651.297.3862, 612.879.1900 ama 800.657.3672

Haddii aad rabto in aad codsato mid kasta oo ah gargaarada aan kor ku soo sheegnay (marka laga reebo MinnesotaCare), waxa aad la xiriiri kartaa xafiiska deegaankaaga (Liistada magaaladan, fiiri qaybta 5aad ee cutubkan).

5.4 U qalmidda Badbaadada Bulshada (Social Security Benefits)

Gargaarka dheeraadka ah (Minnesota Supplement Aid / MSA) waxa uu bil kasta siiyaa taageero lacageed (cash) dadka da'doodu gaarto 65 sanno iyo wixii ka weyn ama indho la' ama aan dhamays tirnayn (certified as disabled), isla markaana buuxiya shuruudaha lacagta soo gasha (income), raasamaalka u yaala (assets) iyo hantidiisa (property). Dadka noocan ah intooda badan waxa ay u qalmaan oo kale gargaarka loo yaqaan Supplemental Security Income (SSI) iyo/ama Social Security Benefits (RSDI). Waraaqaha lagu codsado SSI/RSDI waxaa qaabilsan xafiiska badbaadada bulshada (Social security Office) ee magaaladaada. Waraaqahan lagama helo xafiiska deegaan hoosaadka (not county offices). Warbixinada ku saabsan goorta iyo meesha laga dalbado SSI/RSDI waxa aad wacdaa xafiiska Social Security-ga oo aad kala xiriiri karto: 800.772.1213



5.5 Xafiisyada Taakulaynta Bulshada ee Deegaan Hoosaadka (County Public Assistance Office Locations)

Anoka County	Carver County	Dakota County
Human Services Center Family Intake 763-717-7730 1207 890th Avenue NE Suite 400 Blaine, MN	Community Social Services 952-361-1600 Government Center Human Services Building 602 East 4th Street Chaska, MN 55318	Employment and Economic Assistance 651-554-5611 Northern Service Center Mendota Rd. West Suite 100 West St. Paul, MN 55118-4765
Hennepin County		Ramsey County
Family Services (cash, food stamps, and medical assistance) 612-348-3400 Mon-Fri 8:00-5:00 Century Plaza 330 South 11th Street Minneapolis, MN 55404	Adult Assistance Division (for adults ages 18-59, with no minor children in their care) 612-348-2722 Mon-Fri 8:00-5:00 Century Plaza 330 South 11th Street, 3rd Floor Minneapolis, MN 55404	Human Services 651-266-4444 Mon, Wed, Fri 8:00-4:30 Tues: 8:00-7:00 160 East Kellogg Blvd St. Paul, MN 55101
Scott County	Washington County	Wright County
952-445-7750 200 Fourth Ave. West. Shakopee, MN 55379	Washington County Workforce Center 2150 Radio Drive Woodbury, MN 55125	Human Services Agency Financial Unit 763-682-7414 Government Center 10 Second St. NW. Room 300 Buffalo, MN 55313-1191

5.6 Caymiska Shaqo-Laawayaasha (Unemployment Benefits)

Barnaamijka Taakulaynta Shaqo-laawayaashu waxa uu u furan yahay oo keli ah dadka ay ku dhacday shaqo la'aan ku timid wax iyaga awoodooda ka baxsan, sida dadka ka midka ah shaqaale ay dhintay shirkaddii ay u shaqaynayeen (laid off workers). Waxa lagu siinayaa qayb ka mid ah dhaqaalihii ku soo geli jiray, markii aad shaqaynaysay. Caymiskan shaqo laawayaasha (unemployment benefits) waxaa lacagtiisa si buuxda u bixiya dadka iyo shirkadaha loo shaqeeyo (employers). Taakulayntan waa mid caadiyan ay ka siman yihiin dadka u shaqeeyay shirkad/shaqsi madax banaan (gobolka Minnesota gudihisa) ama u shaqeeyay dowladda hoose (local government) iyo /ama dawladda gobolka (State government). Qasab ma aha in aad degenaato Minnesota marka aad dalbanaysid taakulayntan. Waxa qasab ah in aad tahay Wadani Maraykan ah (U.S. citizen), soo galeeto diiwaan gashan (a registered alien) amaba waa in aad haysataa ogolaanshaha shaqada ee dalka (permission to work in the U.S.).

Haddii aad degen tahay Minnesota amaba aad u soo shaqo tagtid Minnesota maalin kasta (degen gobolada deriska la ah Minnesota), waxa aad ka buuxbuuxin kartaa Kumbiyuutarka codsigaaga, adigoo gelaya shabakadda ah: www.MNWorkForceCenter.org/ui amaba waxa aad wici kartaa tilfoonka warbixinta (automated telephone): 651.296.3644 ama 877.898.9090 (bilaa lacag). Haddii aad degen tahay meel ka baxsan Minnesota, waxa aad codsigaaga ku buuxin kartaa qalabka Internet-ka, ama adiga oo wacaya nambarka kor ku xusan amaba waxa aad booqan kartaa xafiiska kuugu dhoow ee Shaqo la'aanta/shaqo Raadinta (Unemployment/Job Service Office).

Waxa aad u qalantaa in aad qaadato lacagta “Shaqo laawayaasha” haddii aad buuxiso shuruudahan hoos ku qoran:

- Aad hore u shaqaysatay dhibco kugu filan (sufficient wage credits).
- Aad shaqo laadahay amaba aad wax yar shaqayso iyada oo aanad u kas u samayn.
- Aad jir ahaan (physically) iyo maskixiyani (mentally) aad awooddo in aad qabato shaqooyinkii aad caadiyan qaban jirtay.
- Aad diyaar u tahay in aad ogolaato haddii ay shaqo kuu soo baxdo (no barriers to accepting a job).
- Aad mashquul ku tahay siddii aad shaqo kuu qalanta u heli lahayd (seeking suitable employment).

Haddii aad hayso su’aalo ku saabsan barnaamijka taakulaynta shaqo laawayaasha, fadlan gal shabakadda internet-ka ee www.MNWorkForceCenter.org/ui ama wac khadka wararka oo ah: 651.284 .3033 ama 877.504.5050. Waxa kuu diyaar ah turjumaano.

Waraaqdan waxaa loogu talo galay in ay kaa siiso figrad gaaban shuruudaha aasaasiga ah (basic eligibility requirements), waxana ay khusaysaa dadka ay ku dhacday shaqo la’aantu, intooda badan.



6

United Way, ESL, Mashruuca dib u dejinta ee gobolka

- 6.1 Jidka Kulanka 2 - 1 - 1 (United Way 2 - 1 - 1)
- 6.2 Sida aad ku heli lahayd "Barashada Luuqadda Ingiriisiga" (English as a Second Language "ESL" Referrals)
- 6.3 Mashruuca dib u dejinta ee gobolka (Qoxootiga iyo magangelyo weydiisayaasha oo keli ah)

6.1 Jidka Kulanka 2-1-1 (United Way 2-1-1)



Maadaama ay kugu cusub tahay nolosha dalkan maraykanku waxaa suur to gal ah in aad u baahan tahay CAA WIMO. Hey'adda United Way 2-1-1 waxa ay kugu caawin kartaa in aad hesho cidda amaba hey'adda ku haboon ee kaa caawin karta baahidaada gaarka ah isla markaana kaaga jawaabi karta su'aalahaaga gaarka ah. Marka aad wacdo (2-1-1) waxa aad la hadli kartaa qof ku takhakhusay warbixinta (information) iyo u gudbinta cidda ku haboon (referral). Qofkanu waxa uu ku weydiin doona su'aalo la xiriira baahidaada gaarka ah, si uu kuugu gudbiyo hey'adda ku haboon ee kaa caawin karta baahidaas aad qabto. United Way ay waxa ay caawisaa qof kasta oo u baahan iyada oo aan u eegayn sharciga uu dalka ku joogo.

Sida aad ula xiriiri lahayd United Way 2-1-1

- Wac 2-1-1, haddii aad joogto 7da deegaan ee magaalooyinka ugu waaweyn iyo/ama deegaanada (counties) Chisago iyo Isanti.
- Wac 651.291.0211, haddii aad joogto meel aan lahayn khadka tooska ah ee United Way 2-1-1
- Booqo Aaladda Internetka ee United' s First Call for Help— www.firstcallnet.org

6.2 Sida aad ku heli lahayd “Barashada Luuqadda Ingiriisiga” (English as a Second Language “ESL” Referrals)

Gudiga Qoraalka ee Minnesota (The Minnesota Literacy Council / MLC) waa hey'ad gargaar oo ujeedadeedu tahay siddii ay u her umarin lahayd qoraalka Minnesota. Waxa ay ku taageeraan dadweynaha reer Minnesota taageero toos ah iyo mid aan toos ahaynba: dadka waaweyn iyo dhalaanka taageerada u baahan (at risk children), dadka dalka u dhashay iyo kuwa soo galeetiga ahba iyo weliba dadka reer magaalka ah iyo kuwa baadiyaha degaba.


SI AAD U HESHO WARBIXIN INTAN KA BADAN, FADLAN WAC 800.222.1990 AMA FIIRI [HTTP://WWW.THEMLC.ORG/](http://WWW.THEMLC.ORG/)

6.3 Mashruuca dib u dejinta ee gobolka (Qoxootiga iyo magangelyo weydiisayaasha oo keli ah)

State Resettlement Program Office (for Refugees and Asylees only)

Haddii aad tahay magangelyo weydiiste amaba qoxooti, aanad u baahan tahay warbixino ku saabsan “Shaqooyinka iyo Adeegga Bulshada” waxa aad la xiriiri kartaa xafiiska Mashruuca Dibudejinta ee Gobolka oo aad ka wici karto 651.296.1884





7

Caafimaadka

Health Care

7.1 HIV/AIDS

Waa maxay HIV/AIDS?

Meelaha lagu baaro HIV/AIDS ee bilaashka ah

7.2 Arrimaha kale ee muhiimka ah ee Caafimaadka

Cudurada lagu kala qaado Galmoodka (STD)

Qaaxo (Tuberculosis / TB)

7.3 Goorta aad u baahan tahay in aad aado/tagto Cusbitaalka

Sababaha macquulka ah ee aad u teli karto qaybta gargaarka degdegga ah

(Good Reasons to Go to an Emergency Room)

Sababaha aan ku haboonayn in aad u aado qaybta gargaarka degdegga ah (Bad

Reasons to Go to an Emergency Room)

7.4 Caymiska Caafimaadka

7.5 Rugaha Caafimaadka ee Bulshada

7.6 Xarumaha Cudurada Maskaxda ee Bulshada

7.1 HIV/AIDS

Waa maxay HIV/AIDS?

HIV waa xanuunka la rumaysan yahay in uu keeno cudurka loo yaqaan AIDS (Acquired Immune Deficiency Syndrome). Cudurkanu oo ah mid dilaa ah waxa uu sababaa xanuuno aad u tiro badan iyo weliba geeri. HIV waxa lagu kala qaadaa 3 nooc.

- Galmood toos ah (iyada oo aan la isticmaalin cinjirka galmoodka/ condom) oo la isaga tago xagga hore, xagga dambe iyo afkaba.
- Dhiigga oo is taabta, taas oo lagu kala qaadi karo irbadaha la isku duro/mudo, dhiigga la isku shubo, qaladaadka ay galaan cusbitaaladu ama waxyaabo kale oo la xiriira dhiigga.
- Hooyada oo u gudbisa ilmaha: ka hor inta aan ilmuhu dhalan iyo marka fooshaba iyo/ama naas nuujinta.

Waxa muhiim ah in aad samayso waxkasta oo aad kaga badbaadin kato xanuunkan dilaaga ah naftaada iyo qoyskaagaba. Sanadkii 2002 tirada qaaday cudurkan HIV ee gobolkan Minnesota 21% waxa ay ahaayeen dadka ka yimid Afrika (shaqsiyaadka ku dhashay Africa ee soo galeetnimada ku yimid gobolkan Minnesota) - Tiradaas oo ah mid aad iyo aad u badan. Waxa muhiim ah in dadka soo galeetiga ahi fahmaan sida loo kala qaado cudurkan HIV iyo weliba sida ay uga hortagi lahaayeen qaadidda cudurkan.

Haddii aad rabto war ku saabsan cudurkan HIV/AIDS waxa aad wici kartaa khadka mashruuca HIV/AIDS oo ah 612.373.2437 (Warka aad sheegto oo dhan waa sir, cid kalena ma ogaan karin, haba yaraato'ee).

Meelaha lagu baaro HIV/AIDS ee bilaashka ah.

Haddii aad u malaynaysid in aad qaaday cudurkan HIV/AIDS waxa aad la xiriirtaa Xarumaha Caafimaad ee hoos ku qoran oo aad ka heli karto baaritaan BILAASH ah iyo SIR TAADA OO QARSOON. Waxa kale oo aad ka heli karta talo, kadib marka lagu baaro.

Free HIV/AIDS Testing Clinics		
Red Door Clinic 525 Portland Avenue Minneapolis, MN 55415 612-348-6363	Room 111 555 Cedar Street, Floor 1 St. Paul, MN 55101 651-266-1352	Minnesota AIDS Project 1400 Park Avenue Minneapolis, MN 55404 612-373-2437
AIDS Line (for information on HIV/AIDS): 612-373-2437		

7.2 Arrimaha kale ee muhiimka ah ee Caafimaadka

Cudurada lagu kala qaado Galmoodka (STD)

Cudurada lagu kala qaado galmoodka oo marka la soo gaabiyo loo yaqaano STD (Sexually Transmitted Diseases) waxa lagu kala qaadaa noocyada kala duwan ee galmoodka (haahaato xagga hore iyo/ama xagga dambe). Qaar ka mid ah cuduradan waa qaar la daweyn karo sida Jabtida (gonorrhoea), qaar kalena la iskama daweyn karo (sida herpes-ka iyo HIV/AIDS-ka). Cuduradan waxa dhacda in looga hortagi karo waxyaabaha la sheego in looga hortago, sida



cinjirka la xirto marka galmoodka la sameynayo (condom). Si aad u hesho war tifaftiran, fadlan la xiriir daryeelayaasha caafimaadka ama mid ka mid ah xarumaha caafimaad ee aanu kor ku sheegnay . Xar umahanu waxa ay bixiyaan baaritaano bilaash ah iyo sir taada oo aan cid kale kaa ogaan. Naftaada ka difaac cuduradan.

Qaaxo (Tuberculosis / TB)

Xanuunka TB-du waa xanuun halis ah oo ku faafa amaba lagu kala qaado hawada, loona dhiman karo. Qaaxada waa la daaweyn karaa. Haddii aad iskaga shikido Qaaxo (ka hor inta aanad iman dalkan Maraykanka iyo kadib markii aad timidba) waxa muhiim ah in aad si degdeg ah ula xiriirto dhakhtar .

Deegaanka Hennepin waxaa ku yaala xarummo ku takhahusay Qaaxada oo dhawr ah.

Tuberculosis Clinics in the Twin Cities Area		
Hennepin County	Ramsey County	Olmstead County
The HAP Clinic 612-348-3033 Neighborhood Health Care Network 651-489-2273	Saint Paul/Ramsey County Public Health 651-266-1343	Olmstead County Public Health 507-285-8537

Waxa kale oo aad la xiriiri kar ta xafiiska caafimaadka ee deegaan hoosaadkaaga, si aad u hesho war intan ka badan. Ka fiiri buugga tilifoonada ee magaaladaada, gaar ahaan bogaga buluugga ah, adigoo aad ka hoos fiirinaysid qaybta caafimaadka (health).

7.3 Goorta aad u baahan tahay in aad aado/tagto Cusbitaalka

Sida ku cad cilmibaaritaan la sameeyay 55% dadka aada qaybta degdega (Emergency Room) ee cusbitaalada, si ay u helaan gargaar caafimaad, run ahaan uma aanay baahnayn in ay aadaan.

Waxa jira xar umo kale oo caafimaad oo kaga haboonaa, sida qaybta loo yaqaan "urgent Care" ama xafiiska digtoor caadi ah iyo xarumaha caafimaadke ee bulshada (Community Clinics).

Sababaha macquulka ah ee aad u teli karto qaybta gargaarka degdegga ah (Good Reasons to Go to an Emergency Room).

- Miyirdoorsoon / Maskaxguur
- Wadhe xanuun aad dar eento in ka badan laba daqiiqo. Waxa ka mid ah xanuunka laga hadlayo: laabta/labxada oo aad ka dareento culays, buuxsan, qaqabasho iyo/ama xanuun. Naaska hoostiisa oo aad ka dareento adayg, kulayl/gubasho, cuncun: laab xanuun dawakhaad wata.
- Qayb jirkaaga ka mid ah oo awood-gabta (Stroke): Waxa ka mid ah; kabuubyo amaba dareen la'aan degdeg ah oo ku timaadda wajiga, gacan, lug, dhinac dhan oo jirka ka mid ah, aragtida oo mar keli ah diciifta amaba aad weydo (gaar ahaan il-qura), haddalka oo kugu dhega, adiga oo hadalku kugu adkaado amaba fahmi waaya hadalka: Madax xanuun



weyn oo kedis ah (oo sabab la'aan ah), daan-daan amaba dawakhaad bilaa sabab ah, miisaanka oo kaa luma ama adiga oo iska dhaca, gaar ahaan marka ay weheliyaan astaamaha kale ee Stroke-ga.

- Naqaska oo kugu dhega.
- Dhiigga oo istaagi waaya muddo ka badan 10 daqiiqo iyada oo la isku deyayo in la daboolo.
- Xanuun kedis ah oo aad u badan.
- Sun/Sumoow (Xusuus: Haddii ay suur togal tahay , wac xafiiska qaabilsan Sunta ee deegaankaaga, 800.222-1222. T ilifoonkan waxaa laga jawaabaa 24ka saacba, habeen iyo maalin, sanadka oo dhan. W eydii taladooda iyo haddii ay jir to wax aad qaban kar to isla markaas - Sunta qaarkood waa in isla markaaba laga soo matajyaa qofka, halka qaar kale ay u baahan yihiin in biyo badan laga daba siiyo qofka sumoobay . Talada u horaysaa waxa ay badbaadin kartaa naftaada.
- Xasaasad/ Elerji sii xumaanaya oo ka yimid qaniinyo xayawaan/cayayaan, daawo aad qaadatay , gaar ahaan haddii ay neefsashadu kugu sii adkaanayso.
- Dhaawac halis ah, sida madaxa oo nabar kaa gaaray .
- Adiga oo dhiig matagaya amaba tufaya ama matag aad u badan oo aan joogsanayn.
- Naftaada oo jeclaysata in ay is disho amaba ay cid kale disho.

Sababaha aan ku haboonayn in aad u aado qaybta gargaarka degdegga ah (Bad Reasons to Go to an Emergency Room).

- Dhego xanuun/Dhego cuncun
- Nabar yar oo dhiigga la joojiyay
- Qaniinyo eey amaba xayawaan oo dhiigana la joojiyay (La xiriir dhakhtarkaaga si uu kaaga talaalo xanuunka laga qaado qaniinyada xayawaanka ee loo yaqaano "Rabies").
- Murkuco (A sprain).
- Gubasho yar oo aan macno ku fadhiyin, sida dhibic yar oo biyo kulul ah oo ku taabatay .
- Qaniinyo cayayaan amaba barar kugu soo baxa muddo dambe (haddii ay neefsashadu kugu adkaato, si degdeg ah u gaar qolka gargaarka degdegga ah).
- Cadanyo/jirka oo cascasaada (rash).
- Xumad (Haddii ay tahay mid miyirdoorsoon keenta, degdeg u gaar qolka adeegga degdegga ah).
- Xanuunada galmoodka lagu kala qaado (STD' s)
- Duray , har gab, cumo xanuun, ivm.



Talooyinka waxaa kuu soo diyaariyay qaybta caafimaadka:

www.thehealthpages.com/articles/ar-erinf.html

7.4 Caymiska Caafimaadka

Marba haddii aad joogto dalkan Maraykanka waa figrad fiican in aad lahaato caymis caafimaad. Caymiska caafimaadku waxa uu kaa bixindoonaa inta badan amaba dhamaan kharashka kugu baxa marka aad jirato/xanuunsato amaba aad dhaawacanto. Dad badan oo ku nool dalkan waxaa bixiya caymiskooda caafimaad cidda ay u shaqeeyaan (employer). Haddii aad shaqaysid, waydii cidda aad u shaqaysid in aad heli karto caymis caafimaad oo ay kaa bixiyaan.

Haddii aanad shaqaynin waxa aad ka raadsan kartaa Caymiska caafimaad maamulka deegaankaaga (County): Fiiri cutubka 5aad, qaybta Adeegyada Bulshada).

7.5 Rugaha Caafimaadka ee Bulshada

Waxa jira Xar umo Caafimaad oo bilaasha ah amaba aad u jaban oo ku yaala magaaladan, looguna talo galay dadka aan lahayn Caymiska. Si aad u ogaato xar umta noocan ah ee kuugu dhoow , wac 651.489.2273 (489.CARE).

Waxa kale oo aad ka heli kar taa cinwaanada xar umahan shabakadda Inter netka ee hey'adda loo yaqaan " Childr en's Defense Fund" oo cinwaankeedu yahay: www.cdf-mn.org/HealthCare/intro.htm

7.6 Xarumaha Cudurada Maskaxda ee Bulshada

Imaatinka dalkan Maraykanka iyo bilowga nolol cusub oo hor leh waxa ay yihiin madax-xanuun iyo werwer joogto ah. Kaba sii daran'e, waxa suurto gal ah in adiga amaba qof kale oo aad taqaano la idinku jir dilay (torture victime) amaba aad soo aragteen naxdin dagaal oo xad-dhaaf ah (war trauma), kahor inta aadan iman dalkan Maraykanka. Haddaba, waxaa jira meelo takhasus gaar ah u leh arrimaha la xiriira baahida caafimaadka maskaxeed ee Soo-Galeetiga (Immigrants). Warbixin intaan ka badan, la xiriir:

Twin Cities Area Mental Health Resources	
Community University Health Care Clinic (CUHCC) (Has Latino and Somali Mental Health Programs) 2001 Bloomington Avenue S Minneapolis, MN 55404 612-638-0700	Center for Victims of Torture 717 East River Road Minneapolis, MN 55455 612-436-4800
Waxa kale oo aad ka heli kartaa cinwaanada xarumahan shabakada Internetka ee hey'adda loo yaqaan "Children's Defense Fund" oo cinwaankeedu yahay: http://www.cdf-mn.org/HealthCare/intro.htm	



8

Noocyada Dugsiyada Maraykanka

The U.S. School System

- 8.1 Kuwa qasabka ah i laga qaybqaato
- 8.2 Habsaanka/Maanaanshaha (Truancy)
 - Waa maxay Habsaanku?
 - Wargelinta Maanaanshaha Ujeedada Leh
 - Natiijada Habsaanka
- 8.3 Talooyinka Waalidiinta si ay uga ilaaliyaan ilmahooda habsaanka
- 8.4 Doorashada Dugsiyada
- 8.5 Talaalka
- 8.6 Gudiga Waalidiinta iyo Macalimiinta (PTA)
- 8.7 Qaadashada Shahaadada Dugsiga Sare (GED)
- 8.8 Xiriiryo Muhiim ah
- 8.9 Waxbarashada sare
 - Waxa aad samayn karto haddii aadan haysan shahaadadaadii/waraaqdii
 - Imtixaanaadka ee aad ka soo qaadatay dalka kale

8.1 Kuwa qasabka ah i laga qaybqaato

Waxa qasab ah in caruur tu si joogto ah dugsiga, laga bilaabo maalinta la soo qoro beerta xanaanada (Kindergarden) ilaa maalinta ay ka gaarayaan da'da 16 jir . Warcigu waxa uu dhigayaa in uu waalidku (kuwa dhalay amaba kuwa korinaya) qaado masuuliyadda ilmaha, uuna damaanad qaado siinta cuntada fiican, hoy iyo tegitaanka dugsigaba. Taaas macnaheedu waxa uu yahay in uu waalidku sameeyo wax kasta oo awoodiisa ah oo suurto gelinaya in uu ilmuhu helo "xanaano iyo ka warhayn joogto ah", isla markaasna uu helo nasasho ku filan habeenkii (HURDO KU FILAN).



8.2 Habsaanka/Maqnaanshaha (Truancy)

Waa maxay Habsaanku?

Ciyaalka waxaa lagu tiriyaa "Habsaamayaal", haddii ay maqnaadaan 7 cisho iyo in ka badan, iyaga oo aan haysan sharaxaad macquul ah. Habsaanku waa habsan, haddii ay maalmuhu yihiin maalmo buuxa (full days) amaba qayb ka mid ah maalmaha (part days). Qasab maaha in maalmaha uu ilmuhu maqnaaday noqdaan maalmo isku xig-xiga.

Wargelinta Maqnaanshaha Ujeedada leh

Dugsiyadau waxa ay u arkaan maqnaanshaha/daahiddaha soo socda kuwo macquul ah amaba sharcigu ogol yahay: Ilmaha oo jirada, Arrin degdeg ah oo ku dhacda qoyska (emergency), Fasax diimeed. Waa in aad wacdaa dugsiga uu dhigto ilmahaagu, si aad u war geliso, xataa haddii uu maqnaanshuhu/habsaanku yahay mid macquul ah.

Natiijada Habsaanka

Waalidka ka qayb qaata maqnaanshaha /habsaanka ilmihisa waxaa lagu qaadi karaa dembiga heerka hoose ah ee loo yaqaano "misdemeanor".



Maqnaanshuhu/habsaanku waxa uu ku yeelan karaa raad aad u weyn noloshada dambe ee ilmaha. Waxa ay ka xanibi kartaa mustaqbal faa'iido leh, waxana la aaminsan yahay in ay qayb weyn ka qaadata isticmaalka maandooriyayaasha (drugs), dembiyada la sameeyo maalintii (daytime crimes) iyo dagaal.

8.3 Tallooyinka Waalidiinta si ay uga ilaaliyaan ilmahooda habsaanka

- Ku cadaadi in uu ilmuhu aado dugsiga
- Haddii aanu ilmahaagu rabin in uu aado dugsiga, waa in aad heshaa sababta. La sheekayso ilmahaaga oo dhegayso jawaabihiisa. Waxa laga yaabaa in ay jiraan dhibaatooyin aad la xalin karto ilmahaaga. Dhalin yaradu waxa ay u baahan yihiin in ay ogaadaan in ay ku tashan karaan waalidkood, haddii ay u baahdaan.

- Ha ka yeelin ilmahaaga in aad u wacdo dugsi, si aad u qariso amaba ugu taageerto habsaankiisa. Ha barin xeer jjabka.
- Isticmaal, kana faa'iidayso barnaamijyada talo bixinta ee ay dugsiyadu bixiyaan.
- La fariiso fasalka ilmahaaga ilaa inta uu ka gaarayo xaalad uu keligii aado.

Wararkan waxaa laga soo dheegtay: Hennepin County's Truancy/Educational Neglect Project Publication. "Truancy: What you as a Parent Need to Know".

8.4 Doorashada Dugsiyada

Waalidiintu waxa ay leeyihiin doorashooyin aad u badan oo ku saabsan nooca dugsi ay ilmahooda u dirayaan. Meelaynta ilmo lagu meelaynayo dugsi waxa ay ku xiran tahay waxyaabo dhawr ah oo ay ka mid tahay doorashada waalidka, gaadiidka, in meeli ka banaan tahay dugsi iyo sharciyada u yaala gobolka (state) iyo degmada (district). Hoos waxaa ku taxan doorashooyinka waxbarasho ee aad dooran karto iyo sharaxaadhada gaaban.



Dugsi Xaafadeedka (Neighborhood Schools) waxa lagu dooran karaa iyada oo la'eegayo cinwaanka uu degen yahay ardaygu. Cinwaan kasta waxa loogu talo galay in uu helo dugsi deegaankiisa. Waxa loogu talo galay gaadiid qaada ardayda degen deegaanadaas si ay u aadi karaan dugsi loo qoondeeyay. Si aad u ogaato dugsi loo qoondeeyay

deegaankaaga waxa aad wici kartaa xarunta loo yaqaan "Student Placement Center". Deegaanka St. Paul waxa aad wici kartaa 651.632.3700 ama deegaanka Minneapolis oo ah 612.668.1840. Haddii aad rabto in ilmahaagu kuu aado dugsi deegaanka ee kuugu dhoow, waalidiintu si toos ah ayay u wici karaan dugsi. Warbixin intaas ka badan, faa'lan wac: 651.632.3760.

Dugsiyada la dooran karo ee Magaalada (Magnet/City wide) waxa lagu bixiyaa maadooyin gaar ah oo dulsocod ka ah maadooyinka lagu bixiyo dugsiyada kale ee caadiga ah. Dugsiyada noocan ah waxaa iskugu yimaadda arday ka kala socota deegaano aad u kala duwan. Dugsiyada noocan ah waxaa inta badan laga caawiyaa gaadiidka/basaska ardayda degen meel dugsi u jirta hal (1) mile iyo in ka badan. Qoysku waa in uu si gaar ah u codsadaa, waana in la soo ogolaadaa kahor inta aanu ardaygu bilaabin tegitaanka dugsi. War intan ka badan, wac 651.632.3760



Dugsi Hoose ee Loodooridda (Elementary Re-Assignment)

waa dugsi xaafadeed. Haddii uu waalidku diido in uu ilmahoodu aado dugsi loo qoondeeyay amaba dugsi laftiisu u diido ilmahaas in uu ka mid noqdo ardaydiisa, waxa loo dooraa dugsi kale (Re-assignment) oo ka mid ah dugsi xaafadeedyada. War intan ka badan ka wac 651.632.3760.

Bedelidda dugsi Hoose (Elementary Transfer)

waxaa loo suubiyaa ardayda dugsiyada hoose ee rabta/doorata in ay aadaan dugsi kale oo aan ahayn kii loo qoondeeyay. Waxa bedelkan la samayn karaa haddii ay meeli ka banaan tahay dugsi ilmaha loo

bedelayo, sharciyada gobolka iyo degmaduna ogol yihiin. Gaadiidka lagama caawiyoo, sida caadiga ah. War intan ka badan, wac 651.632.3760



Dugsiyada Sare (oo ay ka mid yihiin middle school/junior high iyo senior high schools) waxa ay ku kala duwan yihiin qaabkooda iyo maadooyinka takhasuskaba. Ardayda waxaa loogu soo ogolaadaa dugsiyada sare iyadoo la tixgelinayo codsiyadooda (applications), shuruudaha degmada (district guidelines) iyo meel ka banaanshaha degsiga (availability). Marka loo soo ogolaado ardayga dugsiyada sare waxa uu is qori karaa mashruucyada u gaarka ah dugsiyada (specialty programs). Marka uu ardaygu xusho dugsi sare waxaa fiican in uu ku dhamaysto afartiisa sanno ee dugsiyada sare isla dugsiyada. Cilmi-baaritaano ayaa tusaya in ardayda hal dugsi ku soo wada qaatay

waxbarashadoodii dugsiyada sare ay gaaraan guul (waxbarasho) oo ka badan tan ay gaaraan ardayda bedbedeshay dugsiyadoodii sare. Warar intaas ka badan waxa aad wici kartaa 651.632.3761.

Ka qayb qaadashada Furan (Open Enrollment) waxa ay u suurto gelisaa ardayda degen labada magaalo ee St. Paul iyo Minneapolis in ay ka qayb qaataan dugsiyo ka baxsan deegaanka loo qoondeeyay iyo in arday degen dibedda deegaanka labada magaalo ay ka qayb qaataan dugsiyada St. Paul iyo Minneapolis. Ogolaanshaha ka qaybqaadashada furan waxa ay ku xiran tahay meel ka banaanshaha dugsiyada ay khusayso iyo waafaqsanaanta sharciga degmada. Warar intaas ka badan, waxa aad u wici kartaa 651.632.3728

Iskuulada Xamuulka ah ee loo yaqaan Charter Schools waa ay ka madax banaan yihiin maamulka dugsiyada ee degmada. Gudiga Dugsiyada ee Minneapolis waxa uu damaanad qaaday 7 dugsi oo ah noocan loo yaqaano Charter-ka. Liistada magacyada dugsiyadaas waxa aad ka heli kartaa: www.mpls.k12.mn.us/schools/school_guide/charter_school.shtml

Qoysaska jecel in ay doortaan dugsiyada noocan ah waxa ay toos ula xiriiri karaan dugsiyada. U ogolaanshaha in arday loo ogolaado Charter School shaqo kuma laha hey'adda maamulka Dugsiyada Bulshada ee Minneapolis (Minneapolis Public Schools).

Dugsi Guryeed (Home Schooling) waa doorasho u furan waalidiinta jecel in ilmahooda wax loogu baro guriga. Waa talo fiican haddii waalidiinta jecel arintanu si qotodheer uga baaraan arintan rugta buugaagta ee deegaanka (local public library), qoysaska kale ee ilmahooda wax ku bara guriga iyo weliba Gudiga Waxbarashada Guriyaha (Home School Associations). Waalidiintu waa in ay la xiriiraan xafiiska kor-meeraha guud (superintendent's office) ee deegaanka ay ku nool yihiin si ay uga helaan foomamka wargelinta (report forms). Su'aalaha la xiriira shuruudaha wargelinta (reporting requirements) waa in ay wacaan 651.582.8471. Warar kale oo ku saabsan macalinka ilmaha wax ugu dhigi kara guriga, nooca waxbarasho ee qasabka ah iyo shuruudaha imtixaanaadkaba waxa aad ka heli kartaa: www.cfl.state.mn.mn/LOD/home/geninfo.html

8.5 Talaalka

Sharciga Minnesota waxa uu qasbayaa in uu ilme kasta oo dhigta dugsiyada Minnesota uu soo qaatay noocyada ka hortagga ee xanuunada. Taaas oo uu macnaheedu yahay in uu la soo talaalay Arday kasta oo ku cusub dugsiyada St. Paul ama Minneapolis waa in ay keenaan waraaqahoodii talaalka marka ay dugsiyada bilaabaya. Xafiiska qoritaanka ardaydu waxa uu qiimeeyaa, dibna u fiiriyaa



dhamaanba xaashiyaha talaalka. Waxa kale oo la talaalaa ardayda aan soo wada dhamaysan talaaladii looga baahnaa.

Xafiiska qoridda ardayda ee

- St. Paul 651.632.3700
- Minneapolis 612.668.1840 (Xafiiska qoysaska cusub 612.668.3700).

8.6 Gudiga Waalidiinta iyo Macalimiinta (PTA)

Dalkan Maraykanka waxa caadi ah in waali kastaaba ka qayb qaato waxbarashada ilmihisa. Mid kuu fududaynaysa arinta waa in aad xubin ka noqoto gudiga Waalidiinta iyo Macalimiinta ee dugsiga uu ilmahaagu dhigto. Ujeedada gudigan (PTA) ee heer qaran waa saddex:

- Taageeridda iyo u hadlidda ardayda iyo dhalinta dugsiyada, marka la dhexjoogo bulsho weynta iyo marka la hortaagan yahay madaxda dowladda iyo hey'adaha kale ee go'aamin kara arrimaha saamaynta ku leh ciyaalka/ardayda.
- Ka caawinta waalidka in ay bartaan xeelado ay ku caawiyaan, uguna koriyaan ciyaalkooda si fiican oo badbaado qabta.
- In lagu dhiiri geliyo waalidiinta iyo bulsho-weynta kaleba in ay ka qayb qaataan arrimaha waxbarashada ee dalkan.

Warbixintan waxaa laga soo qaatay: www.myschoolonline.com.

Si aad u hesho war ku saabsan Gudiga Waalidiinta iyo Macalimiinta waxa aad la xiriirtaa dugsiga uu ilmahaagu dhigto.

Lao PTA, 612.3029590

Waxa ay mudnaanta koowaad siisaa caawinta qoysaska iyo ubadka ka soo jeeda qoomiyadda Lao, waxase ay caawin kartaa cid kasta oo u baahan caawimadooda. Hawlaha ay qabato waxaa ka mid ah ciyaaraha iyo dhaqanka, istaageeridda iyo waxbarashada gaarka ah (tutoring).



Somali PTA, Maryan Maxamed, 651.486.6595

Waxa ay mudnaanta koowaad siisaa waalidiinta iyo ubadka Soomaalida ah, waxase ay caawin kartaa qof kasta oo u baahda adeegeeda. Hawlaha ay qabato waxaa ka mid ah ciyaaraha iyo dhaqanka, istaageeridda iyo waxbarashada gaarka ah (tutoring).

8.7 Qaadashada Shahaadada Dugsiga Sare (GED)

Imtixaanka lagu qaato shahaadada loo yaqaano "General Education Development Certificate", waxa ay ujeedadiisu tahay in lagu qiimeeyo in qofka imtixaankaas marayaa uu leeyayay aqoon waxbarasho oo la mid ah qofka qaatay shahaadada dugsiga sare ee caadiga ah. Qaadashada shahaadada (GED) waxa ay kuu furaysaa albaabo badan oo aad ku sii geli karto waxbarashada sare amaba shaqooyin fiicfiican. Si aad u qaadato shahaadada GED:

1. Taga ama aad xarunta waxbarashada dadka waaweyn ee Lehmann Center, 1006 W. Lake Street, Minneapolis.
2. Si aad u qaadato shahaadada GED waxa uu u baahan yahay ardaygu in uu qaato shan (5) imtixaan oo kala duwan. Imtixaanada waxa ay kala yihiin: Xirfadaha qoraalka (Writing Skills), Waxbarashada bulshada (Social Studies), Saynis (Science), Turjumidda Suugaanta (Interpreting Literature & Arts) iyo Xisaab (Mathematics).

3. Ardaygu waxa uu kala dooran karaa in uu qaato duruusta u diyaar garoowga iyo in uu hore ka galo imtixaanka. (Iyadoo ku xiran da' daada waxa aad kala dooran kartaa in aad imtixaanka u gasho waxa loo yaqaan GED track amaba high school diploma track).
4. Kuwa doorta in ay qaataan duruusta u diyaargaroowga imtixaanka waxa ay kala dooran karaan fasalada maallintii iyo kuwa habeenkii iyaga oo kala dooran kara dhawr meelood oo kala duwan.
5. Kharashka qaadashada imtixaanku waa \$60.00, haddii uu ardaygu bixinayo. Mar kasta oo lagu noqdo imtixaankuna waa \$15.00/markiiba. Haddii ay hey'adi ka bixinayso qiimaha imtixaan qaadashadu waa \$80.00 iyada oo jeegga lagu qorayo magaca Lehmann GED T Center . Dib u qaadashada imtixaanku waa \$20.00/markiiba.

War intan ka badan oo ku saabsan arintan waxa aad wacdaa xarunta imtixaanaadka GED 612.668.3800

WARKAN WAXAA LAGA SOO DHEEGTAY: WWW.MPLS.K12.MN.US/SERVICES/GED.SHTML

8.8 Xiriiryo Muhiim ah

<p>New Families Center 612.668.3700 2300 Chicago Ave. Minneapolis, MN Open Mon-Fri, 8 AM to 4:30 PM Somali: 612.668.3704</p>	<p>Minneapolis Public Schools Hot Shot Line 612.588.3003 Hot Shot Line has interpreters for families who do not speak English.</p>
<p>Minnesota Department of Education 651.582.8200 1500 Highway 36 West Roseville, MN 55113-4266 www.educ.state.mn.us</p>	<p>St. Paul Student Placement Center 651.632.3700</p> <p>Minnesota Homeschoolers' Alliance 612.288.9662 PO Box 23072 Richfield, MN 55423</p>
<p>Minnesota's Education Helpline 888.234.4939 or 651.603.0057 Hours: Mon, Wed, Fri, 8:30 AM- 4 PM and Tues and Thurs, 8:30 AM – 7:00 PM</p>	

Waalidiinta (parents) iyo dadka kale ee ka masuulka ah korinta ilmaha (guardian) waxa ay ka heli karaan warbixinno iyo taageeraba shaqaalaha khadka tilifoonka, gaar ahaan arrimaha khuseeya: shuruudaha qalin jabinta, waxbarashada gaarka ah, doorashooyinka dugsiyada, habsaanka iyo maqnaanshaha, eedaabta, badbaadada dugsiyada iyo weliba waxbarashada dhalaanka aadka u da'da yar (early childhood education).

8.9 Waxbarashada sare

Haddii aad haysato shahaadada dugsiya sare ama shahaadada u dhiganta ee GED waxa kuu suurtoowda in aad waxbarashadaada sii wadato, adiga oo casharo ka qaadanaya kuuliyadaha sare amaba dugsiyada sare farsamaga gacanta. Waxaa muhiim ah in aad ogaato:

Xarunta Helitaanka Waxbarasho (The Education Opportunity Center /EOC) waxa ay bixisaa taageero waxbarasho oo loogu talo galay dadka waaweyn (adults) ee u diyaar garoobaya in ay

galaan kuuliyadaha sarree iyo/ama tababarada gaarka ah. Waxa ay ka caawiyaan dadka siddii ay u fahmi lahaayeen doorashada mustaqbalkooda (career options), taageerada dhaqaale (financial aid) iyo doorashooyinka waxbarasho (education options). Hey'adda EOC waxa ay leedahay



xafiisyo badan oo ku yaala labada magaalo ee mataanaha ah. Si aad u hesho xafiiska kuugu dhoow waxa aad wacdaa xafiiskooda weyn: 612.349.2524.

Qiimaynta Xaashiyaha Dhibcaha Imtixaamaadku (Foreign Transcript Evaluations) waa muhiim haddii waxbarasho sarree ku soo qaadatay dal aan ahayn Maraykanka. Waxa in maadooyinkaaga iyo dhibcahoodaba lagu soo qiimeeyaa noocaa waxbarasho ee Maraykanka. Laba xafiis oo kaa caawin kara qiimayta shahaadadaadu waxa ay kala yihiin (iyagoo lacag ah):

- World Education Services, 800.937.3898, E-mailkooduna yahay:

Midwest@wes.com

- Education Credential Evaluators, 414.289.3400, E-mailkooduna uu yahay eval@ece.org

Waxa aad samayn karto haddii aadan haysan shahaadadaadii/waraaqdii Imtixaanaadka ee aad ka soo qaadatay dalka kale.

Waa caadi in ay qofka ka lumaan waraaqo muhiim ah sida shahaadadaha iyo waraaqihii imtixaanka, marka uu qofku soo maro xaalado dhibaato iyo kala guur ah. Haddii ay kaa lumeen shahaadadahaagii, iwm, aanay suurto galna kuu noqonayn in aad ka dalbato dugsi gaagii sare ama jaamacadaadii, waxa aad samayn kartaa in aad qaadato imtixaanada maadooyinkii aad hore u soo qaadatay. La xiriir qaybta gelitaanka (admissions department) ee dugsi gaagii aad rabto in aad bilowdo, si aad uga hesho war intan ka badan.





9

Guryaha/Hoyga

- 9.1 Guryaha jaban (affordable) iyo kuwa la kabo (subsidized)
- 9.2 Saddex nooc oo guryaha jaban ee kirada ah
- 9.3 Xiriirka Guryaha (HousingLink)
- 9.4 Tallooyin la siinayao guri raadiyayaasha
- 9.5 Jida Kulanka 2-1 (United Way 2-1)
- 9.6 Helidda War sax ah oo ku saabsan guryaha (Fair Housing Information)
- 9.7 Kiro mise Qadasho
 - Kiro
 - Qadasho/libsasho
- 9.8 Ka hor inta aanad gelin heshiis kiro
- 9.9 Marka aad ku nooshahay guri kiro ah
 - Kirada
 - Kabid/Hagaajin
 - Kiro bixin waaye (Unlawful Detainer)
 - Nadaafadda
 - Sharciyada degenaanshaha (Occupancy Rules)
- 9.10 Gebogebaynta Heshiiska Kiraysiga (Ending the Rental agreement)
 - Wargelin ku haboon (proper notice)
 - Dib u helidda deebaajiga (Security Deposit Refund)
- 9.11 Nolal Ibnu-aadaminimo Leh (Habitat for Humanity)

9.1 Guryaha jaban (affordable) iyo kuwa la kabo (subsidized)

Guryaha jaban ama la goyn karo (affordable housing) waa guryaha qiimahoodu aanu kor u dhaafin in ka badan 30-40% dakhliga guud ee soo gala qoyska sanadkii oo dhan (fiiri: www.housinglink.org). Gur yaha la kabo (subsidized) waa gur yaha ay kabto gebi ahaanba ama qayb ka mid ah dowladdu (www.affordablehousingonline.com/whatis.htm). Si aad u hesho liistada dhamaanba xafiisyada gur yaha bulshada (Public Housing), la xiriir: www.hud.gov/offices/pih/pha/contacts/states/mn.cfm

Minneapolis Public Housing Authority 1001 Washington Ave. N. 612-342-1400	St. Paul Public Housing Authority 480 Cedar Street, Suite 600 651-298-5664
Richfield Public Housing Authority 6700 Portland Ave. S. 612-861-9700	Carver County Housing Authority 705 N Walnut Street, Chaska, MN 55318 612-448-7715
Dakota County CDA 1228 Town Centre Drive, Eagan, MN 55123 651-675-4400	St. Louis Park Housing Authority 5005 Minnetonka Blvd 612-924-2578

9.2 Saddex nooc oo guryaha jaban ee kirada ah

Gur yaha Bulshada (Public Housing)-W aaga gur yo ay leedahay ama maamusho bulshadu oo loogu talo galay dadka dhaqaalaha hooseeya.

Mashuur ca loo yaqaano Project-based Section 8 Housing: W aaga gur yo ay leeyihiin ama maamulaan shirkado/dad gaar ah (private) oo loogu talo galay dadka dhaqaalaha hooseeya.

Nooca loo yaqaano Section 8 Housing Choice V ouchers : W aaga mashruuc ay dowladdu maalgeliso oo loogu talo galay in dadka dhaqaalaha hooseeyaa geli karaan guryaha lagu kireeyo qiimaha suuqa ee qaaliga ah iyada oo ay dowladdu kabayso.

WARARKA KU SAABSAN MASHAARIICDAN WAXA AAD FIIRISAA: WWW.HOUSINGLINK.ORG

9.3 Xiriirka Guryaha (HousingLink)

HousingLink waa barnaamij loogu talo galay in laga helo wararka ku saabsan helitaanka guryo qiimo jaban leh. Ujeedada ugu weyn ee mashruucanu waxa uu yahay sidii dadka dhaqaalaha hooseeya amaba dhaqaalaha dhexdhexaadka ah leh ay u heli lahaayeen war iyo taageero ku saabsan helitaanka iyo ku jiridda guryo qiimahooda ay goyn karaan. HousingLink waxa ay jeclaan lahayd in la tirtiro carqaladaha hor taagan helitaanka wararka (information) guryo nadiif ah/badbaado qaba oo la goyn karo qiimahooda.



HousingLink ma bixiso taageero toos ah (direct service) - Taas oo ah in aanay dadka toos uga caawin baahidooda guri raadinta, umana qabaan tabobar iyo in ay dadka la raadiyaan guryo.

Sida ugu fiican ee aad u heli karto wararka ku saabsan guryaha banaan, liistada guryaha,

hey'adaha guryo raadinta waa in aad fiiriso shabakadooda internet-ka oo ah:

www.housinglink.org

- Sida aad ula xiriiri lahad HousingLink
- 612.522.2500
- info@housinglink.org

9.4 Talooyin La siinayao guri raadiyayaasha

Waraqaha talo bixinta waxaa loogu talo galay in ay kaa caawiyaan talooyinka ku saabsan:

- U diyaar garoowga guuritaanka
- Doorashada guriga
- Saxiixidda heshiiska
- Waxa aad samayn lahayd haddii lagu diido guri.

Waraqaha talo bixinta waxa aad ka daabacan kar taa : www.housinglink.org

9.5 Jida Kulanka 2-1-1 (United Way 2-1-1)

Hey'adda United Way 2-1-1 waxa ay kugu caawin kar taa in aad hesho cidda amaba hey'adda ku haboon ee kaa caawin karta in ay kaaga jawaabaan su'aalahaaga ku saabsan "Guryaha". Marka aad wacdo (Wac 2-1-1) waxa aad la hadli kar taa qof ku takhahusay warbixinta (informational) iyo u gudbinta cidda ku haboon (referral). Qofkanu waxa uu ku weydiin doona su'aalo la xiriira baahidaada gaarka ah, si uu kuugu gudbiyo hey'adda ku haboon ee kaa caawin karta baahidaas aad qabto.

Sida aad ula xiriiri lahayd United Way 2-1-1

- Wac 2-1-1, haddii aad joogto 7da magaalo ee deegaankan (county) ugu waaweyn iyo/ama deegaanada (counties) Chisago iyo Isanti.
- Wac 651.291.0211, haddii aad joogto meel aan lahayn khadka tooska ah ee United Way 2-1-1
- Booqo Aaladda Internetka ee United' s First Call for Help - www.firstcallnet.org

United Way 2-1-1 waxa ay leedahay turjumaano ku turjuma afaf kale saacadaha shaqada ee 8da subaxnimo ilaa 5ta galabnimo. Afafka lagu turjumo waxaa ka mid ah

- Spanish 2-1-1 ama 651.2910211
- Hmong 2-1-1 ama 651.291.0211
- Russian 651.698.9167



9.6 Helidda War sax ah oo ku saabsan guryaha (Fair Housing Information)



Sharciga dowladda sare ee cadaaladda guryaha, sharciga xuquuqul iinsaanka ee Minnesota, Sharciga xuquuqda shicibka ee Minneapolis iyo sharciga xuquuqul iinsaanka ee Saint Paul, waxa ay dhamaantoodba mamnuucayaa in lagu takooro qof arrimaha ku saabsan, jinsiyadiisa (race), lab/dhidig nimadiisa (gender), diintiisa (religion) iyo dookhiisa galmood (sexual orientation).

Mamnuucidanu waxa ay khusaysaa marka la kiraysanayo amaba la gadanayo guri, la xayeeyiinayo guri ama loogu hanjabayo/lagu yasayo qof. Waxa jira dhawr meelood oo oo ku yaala magaalada oo ka caawin kara dadka u malaynaya in lagu sameeyay takoor sharcidarro ah (illegal discrimination). Booqo: www.housinglink.org, 2002

Haddii aad rabto war ku saabsan sharciyada cadaaladda guryaha (fair housing laws) amaba aad rabto in aad xerayso dacwad ku saabsan takoor, fadlan u qor, booqo ama wac mid ka mid ah ururada hoos ku qoran:

<p>Housing and Urban Development 220 S. 2nd St. , Minneapolis, MN 55401 612-370-3185 www.hud.gov/discrim/html</p>	<p>MN Dept. of Human Rights 190 E. 5th St., St. Paul, MN 55101-1637 651-296-5663 www.humanrights.state.mn.us</p>
<p>St. Paul Dept. of Human Rights 15 W. Kellogg Ave. Room 900, St. Paul, MN 55102 651-266-8966 www.stpaul.gov/depts.humanrights/</p>	<p>Minneapolis Civil Rights Dept. 350 S. 5th St. # 237, Minneapolis, MN 55414 612-673-3012 www.ci.minneapolis.mn.us/citywork/civilrights/</p>

Haddii aad u malaynaysid in uu si xun kuula dhaqmay qofka guriga leh (landlord), sida isaga oo kaaga saaray si aan sax ahayn, uu samayn waayay dayactir lagama maarmaan ah amaba dhaqan kale oo xun) waxa aad ka qaadi kar taa qofkaas guriga leh talaabo shar ciga waafaqsan. W arar intaas ka badan, la xiriir:

Legal Aid Society
430 1st Ave N
Minneapolis, MN 55410
612.332.1441

9.7 Kiro mise Gadasho

Kiro

- Haddii uu qorshahaagu yahay in aad joogto dalkan Maraykanka in ka yar saddex sanno, waxaa kuu fiican (inta badan) in aad guri ijaarato
- Guuritaanka inta badan waa ku fudud in aad degto nooca guryaha ee loo yaqaano "Apartments".
- Kiradu inta badan kaagama baahna kharsah badan oo kaaga baxa dayactir (maintenance) iyo daryeel (repairs).

Gadasho/libsasho

- Guriga adigaa iska leh/Cid kuu sheegataa ma jirto
- Waxa laga yaabaa in aad faa'iido ka hesho canshuur celinta
- Haddii aad bixinaysid casuurta laga bixiyo mushaarada ee dalkan Maraykanka, marka aad guri leedahay waad ku xisaabsanaysaa (deductible).
- Gurigaaga waxa aad ku samayn kartaa wax alle wixii aad doonto.

Haddii aad rabto in aad gadato guri la xiriir Mashruuca gargaarka guri gadashada ee St.paul 651.266.6626



9.8 Ka hor inta aanad gelin heshiis kiro

Iska fiiri guriga, kahor inta aanad saxiixin heshiiska

Waxyaabaha muhiimka ah in aad iska fiiriso waxaa ka mid ah korontada, biyaha, gaasta, iwm., qasabadaha, kulayliyayaasha, qufulada iyo daaqadaha. Haddii ay jiraan wax dhibaato ah waa in aad la codsataa in qofka guriga ka masuulka ah (amaba iska leh) in uu saxeeexo heshiis ah in uu sixi doono wixii qaldanaa (jabnaa). Qoraalkan waxaa loo yaqaanaa "list of repairs".



Kharashka codsiga (application fee):

Waxaa dhacda inta badan in dadka/shirkadaha guryaha lihi ka codsadaan qofka codsanaya in uu kiraysto guriga in uu bixiyo lacag loo yaqaan "application fee). Kharashkan caadiyan waxaa loogu talo galay in lagu bixiyo kharashka ku baxaya in la soo baaro qofkaas guriga kiraysan raba. Marka weydii ama hubi in lagaa rabo lacagtaas iyo haddii lagaa rabo inta ay tahay .

Deebaaji (deposit)

Dadka/shirkadaha guryaha lihi waxa ay xaq u leeyihiin in ay ka qaadaan qofka guriga ka kiraysanaya lacag deebaaji ah. Deebaajigu waa lacag uu bixiyo guri kiraystuhu, uuna gacanta ku hayo guri kireeyuhu si uu ugu bixiyo kharashka ka soo kordha, dhaawac guriga gaara, lacagta kirada oo ka dhimanta iyo lacag kasta oo lagu yeesho qofka guriga kiraystay (haddii uu sharcigu dhigayo). Qofka guriga leh ayaa go'aamiya inta ay lacagta deebaajiga ahi dhantahay , marka waa muhiim in aad weydiiso cadadkeeda. Marka uu dhamaado heshiiskii kiraysigu waxaa qasab ah in qofka guriga lihi u soo cesho guri-kiraystaha dhamaanba lacagtii deebaajiga ahayd ee uu ka haystay iyada oo weliba ay la socoto lacagtii dulsocodka ahyd (interest). Guri kireeyuhu waxa uu xaq u leeyahay in uu la haro lacagta macquulka ah ee uu ku hagaajin karo, haddiiba uu kiraystaha gurigu soo gaarsiiyay wax dhaawac ah hantidiisaas (guriga).

Heshiiska Kiraysiga (Lease)

Shuruudaha heshiisku waxa ay ku cad yihiin heshiiska dhex maray kiraystaha iyo laga kiraystaha. Heshiisku waxa uu noqon karaa mid qoraal ah oo la kala saxeeexo ama/iyo mid hadal ah (is fahan af ah), iyada oo ay ku xiran yahay tirada guryaha (units) ee ku wada yaala hal dhisme. Haddii ay yihiin 12.guri deegaan (residential units) oo ku wada yaala hal dhisme iyo in ka badan waxa qasab ah in heshiisku uu noqdo mid qoraal ah oo la kala saxeeexo.

Waxa jira laba nooc oo heshiis kiro ah

- The periodic tenancy lease - oo ah heshiis aan wakhtigiisu go'nayn, bil kastana la jabin karo.
- The definite term lease - oo ah heshiis cadad go'an leh, sida heshiis lix bilood ah amaba hal sanno ah.

Adeegyada Aasaasiga ah (Utilities): telefoonka, hiid-ka, qashinka, biyaha, korontada, iwm.

Heshiisku waa in uu qeexaa cidda ka masuulka ah bixinta kharashyada aan kor ku soo sheegnay. Haddii aanay ku cadayn heshiiska waa in aad weydiisaa qofka kaa kiraynaya guriga cidda bixinaysa kharashyadaas.

6. Daryeelka (maintenance)

Sharciga Minnesota waxa uu dhigayaa in xaq-laha gurigu (qofka/shirkadda guriga iska leh) ka masuul yahay in gurigu noqdo

- meel lagu noolaan karo
- daryeelo/u dayactiro si macquul ah
- Mishiinada yaalaa ay waafaqsan yihiin xeer hoosaadyada u yaala caafimaadka iyo guryaynta. (www.tenant.net/Other_Area/Minnesota/hb2.html)

9.9 Marka aad ku nooshahay guri kiro ah

Kirada

Bixinta: Guri kiraystuhu waa in uu bixiyaa kirada maalinta lagu heshiiyay . Nooca heshiisku saamayn kuma laha bixinta kirada la bixinayo wakhtigeeda. W akhtiga kir o bixinta iyo cadadka la bixinayaaba waxa ay ku cad yihiin heshiiska guri kiraysiga. Haddii uu kiraystuhu (tenant) bixinwaayo kirada, waxa uu guri kireeyuhu (landlord) xaq u leeyahay (sharciyan) in uu guriga ka saaro kiraystaha. Haddii la bixiyo kirada wakhti ka dambeeya wakhtigii lagu heshiiyay in la bixiyo, waxa uu xaq-luhu xaq u leeyahay in uu ka codsado kiraystaha in uu bixiyo lacag dheeraad ah oo loo yaqaano (late fee). Lacagta Habsaanku (late fee) waxa ay ku cadahay heshiiska kala kiraysiga.

Haddii nooca heshiiskaagu yahay nooca loo yaqaano "periodic lease", ama heshiis wakhti cayiman leh, qofka/shirkadda guriga lihi iskama kordhin karto qiimaha kirada iyada oo aan qofka siinin qoraal sax ah oo sharciga waafaqsan. Haddiise uu heshiiskaagu yahay mid bille ah (month to month), sharcigu waxa uu dhigayaa in lagu siiyo digniin ku'eg hal bil iyo maalin (haddii aad kirada u bixiso bil ahaan) ama hal todobaad iyo maalin (waa haddii aad kirada u xiso todobaad'e. Haddii heshiiska kiradaadu tahay nooca loo yaqaano "definite term lease" oo macnaheedu yahay heshiis kama dambays ah, lama kordhin karo haddii marka hore aanay ku cadayn in la kordhin karo.

Kabid/Hagaajin.

Sharciga Minnesota waxa uu dhigayaa in xaq-luhu hagaajin amaba kabid (reapir) macquul ah ku sameeyo guriga uu kir eeyay . Masuuliyaddan lama saari kar o kiraystaha. Haddii uu xaq-luhu gudan waayo waajibaadkan waxa uu kiraystuhu xaq u leeyahay in uu sameeyo:

- Ku dacwodo dembibaarayaasha (inspector) qaybta guyraha, caafimaadka, tamarta (energy) iyo dabka ee deegaanka hoose. Isaga oo ka codsanaya in ay soo booqdaan gurigiisa, si ay ula arkaan dhibta jirta. Haddii aad degen tahay Minneapolis, wac hey'adda loo yaqaan Inspections Housing Services Condition Requests & Complaints oo nambarkoodu yahay 612.673.5858. Haddii aad degen tahay St. paul waxa aad wacdaa Property Code Inforcement oo nambarkoodu yahay 651.266.1900.
- Ka codso maxkamadda kiro jaajin (rent escrow), si xaq-laha loogu qasbo in uu hagaajo meelaha jajibay ee looga baahan yahay in uu kabo. Arrintan waxaa kaa caawin kara hey'ada sharciyada ee loo yaqaan Legal Aid oo nambarkoodu yahay 612.332.1441.
- In aad joojiso kiro bixinta.



- In aad toos uga dacweyso xaqlaha maxkamada degmada (sue the landlord). Arrintan waxaa kaa caawin kara hey'ada sharciyada ee loo yaqaan Legal Aid oo nambarkedu yahay 612.332.1441.
- Ku dacwo maxkamadda dhexdhexaadinta (reconciliation court) ama maxkamadda degmada (district court), si aad uga codsato kiro dhimid (rent abatement).
- Adeegso ama ku xooji dacwadaada arrinta ah in aan xaqluhu gudan waajibaadkiisii ahaa in uu guriga hagaajo (kabo), haddiiba uu go'aansado in uu guriga kaaga saaro qasab (eviction), ku salaysan kiro bixin la'aan.

FIIRI SHABAKADA INTERNETKA EE: WWW.TENANT.NET/OTHER_AREAS?MINNESOTA/HB2.HTML

Kiro bixin waaye (Unlawful Detainer)

Haddii uu qofku bixinwaayo kiradiisii, waxa uu xaqlaha guriga lihi ku dacwoon karaa maxkamadda. Haddii uu xaqluhu helo garta, waxa ay maxkamadu amraysaa in guriga laga saaro qofkii kirada ugu jiray, taas oo haddii ay dhacdo kuu gelaya diiwaanka ma haraanka ah ee kiraystayaasha (renter's permanent rental history). Mar haddii ay diiwaanka kuu gasho kiro bixin la'aantu (unlawful detainer oo marka la soo gaabiyo loo yaqaano UD), waxa aad iyo aad u adkaandoonta in lagaa kireeyo guri dambe.

Nadaafadda

Nadaafadda iyo xanaanada guriga aad kiraysatay adiga ayaa ka masuul ah. Haddii uu xaqlaha guriga lihi kugu arko adiga oo aan ilaalinayn nadafada gurigaaga waxa uu kugu dacweyn karaa qaybta ilaalinta guryaha (housing code enforcement), taas oo keeni karta in guriga lagaa saaro.

Sharciyada degenaanshaha (Occupancy Rules).

Waa masuuliyad ku saaran in aad ilaaliso sharciyada uu dhigay xaqlaha gurigu (haddiiba ay yihiin kuwo macquul ah). Haddii aad raaci weydo sharciyadaas waxaa dhici karta in xaqlaha guriga lihi kaa saaro guriga.

9.10 Gebogebaynta Heshiiska Kiraysiga (Ending the Rental agreement)

Wargelin ku haboon (proper notice)

Marka ay xaqlaha iyo kiraystuhuba soo gebogebaynayaan heshiiska kiraysiga waxaa qasab ah in ay waafaqaan shuruudaha heshiiskii u dhexeeyay iyo kuwa gobolkaba.

Sida uu sharcigu dhigayo, haddii nooca heshiiskaagu yahay nooca loo yaqaano "periodic lease", ama heshiis wakhti cayiman leh waa in qofka heshiiska soo gebogebaynayaa uu u diro qofka kale wargelin cad oo qoraal ah (written notice) ugu yaraan hal maalin kahor maalinta ugu dambaysa ee kiro bixinta.

Haddii uu heshiisku ahaa nooca kama dambaysta ah (definite), waxa caadiyan loo baahan yahay in la isku wargeliyo (qoraal ahaan) muddo 30 ilaa 60 maalmood gudahood ah.

Sharciga gobolku waxa uu dhigayaa: Haddii uu gurigu yahay nooca ogolaada kaalmada dawladda sare ee loo yaqaano "Section 8", in uu xaqlaha guriga lihi siiyo ugu yaraan "Hal Sanno" oo wargelin qoraal ah (One year written notice), marka:

- Uu heshiiska Section 8-ku dhamaanayo.
- Uu xaqluhu go'aansado in uu ka baxo mashruucii Section 8-ka ahaa.
- Xaqluhu uu wada bixinayo daynkii uu ku gatay guriga (prepay mortgage) amaba uu iskuu uga baxayo Section 8-ka.

Dib u helidda deebaajiga (Security Deposit Refund).

Waa in uu xaqluhu soo celiyaa dhamaanba deebaajigii uu ka qaaday qofka guriga ka kiraystay marka uu ka baxo gurigii. Waxa qasab ah in uu lacagtaas la soo cesho ugu yaraan 4% oo dulsocod ah (interest) oo ah lacagta faa'iidada ee uu bangigu bixiyay mudaddii ay lacagtu ka maqnayd kiraystaha. Haddii aanu xaqluhu soo celin dhamaanba lacagtan amaba qayb ka mid ah lacagtan, waxaa qasab ah in uu siiyo kiraystaha waraaq sharaxaysa sababta keentay in qofka aanu helin deebaajigiisii.

SI AAD U HESHO WARAR INTAAS KA BADAN, FADLAN FIIRI: WWW.STPAUL.GOV/HOUSING/INFORMATION/

9.11 Nolol Ibno-aadaminimo Leh (Habitat for Humanity)

Habitat for Humanity waa hey'ad caalami ah oo u dhista guryaha dadka dakhligoodu hooseeyo, iyada oo adeegsanaysa dad aan mushaaro qaadan oo tabarucayaal ah (volunteers).

Guryahan waxaa loogaga gadaa dadkaas dhaqaalahoodu hooseeyo qiime aad u hooseeya. Caddiyan dadka guriga loo dhisayo waxaa laga filaa in ay geshaan wakhtigooda, si ay uga qaybqaataan tabarucan. Qoyska caadiga ah waxaa laga fishaa in ay geliyaan inta u dhaxaysa 300 - 500 saacadood, iyaga oo taageero buuxda ka helaya dad aqoon u leh hawsha ay qabanayaan. Waxa jira shuruudo qasab ah in uu qofku buuxiyo si uu u helo guryaha noocan ah. Si aad u ogaato war intaas ka badan, amaba aad u fiiriso in aad u qalanto in aad hesho guryaha noocan ah, fadlan wac: 612.331.4090





10

Gaadiidka Dadweeynaha

10.1 Gaadiidka Dadweeynaha

Warabixinada ku saabsan qiimaha lagu raaco Baseska.

Wararka ku saabsan xiliyada iyo jidka basku marayo

Waxaad kale ood booqan kartaa Xafiiska Macamiisha oo laga heli wixii bas kaga dhex luma oo laga helo

10.2 Wararka ku saabsan Baabuur wadida xiliga Jiilaalka iyo meelaha baabuurat ala dhigo.

Gargaarka degdedga ah ee gurida barafka ee Minneapolis:

Gargaar ka degdeg ee magaalada St. Paul (St. Paul Snow Emergencies):

10.3 Maxaa la sameeyaa hadii shil baabuur kugu dhaco.

10.4 Warbixino ku saamsan Habka Caruurta Baabuurta Loo gu Qaado.

10.5 Caymiska Baabuurta (Auto Insurance).

Maxaan ugu bahanahay Camiska baabuurta.

10.6 Basic Map of Twin Cities

10.1 Gaadiidka Dadweeynaha

Gaadiidka Dadweeynaha ee labada Magaalo ee Mataanaha ah oo loo yaqaano (Twin Cities Metro Transit) ayaa ilaa haatan ah gaddidka kaliya ee dadweeynaha ee ukala socdaala labada Magaalo ee Mataanaha ah. Gaadiidka Dadweeynaha ee (Twin Cities Metro Transit) ilaa iyo hadan waa Buses.

Warabixinada ku saabsan qiimaha lagu raaco Baseska.

Basasku waxay qaataan hal (1) doolar iyo qadaadiic. Darawalada iyo mashiinada basaska ma samayn karaa sarif. Waxaa jira kaarar laga iibsano karo dukaamada oo faaido badan u leh qofka baska raaca waayo, lacag bbad badbaadinaysa markaad kaar iibsato.

	REGULAR		WAXA LOO YAQAANO	
	xiliga caadiga ah waa	xiliga degdeg ah	xiliga caadiga ah waa	xiliga degdeg ah
Qofka wayn ama inta u dhaxeysa 13-ila iyo 65	\$1.25	\$1.75	\$1.75	\$2.25
Ages 65+ & Ages 6-12	\$0.50	\$0.50	\$1.75	\$2.25
Dad aan qabin lixda lixaad ama	\$0.50	\$0.50	\$0.50	\$0.50
Xiliyada degdega ah waa Isniinta ilaa Jimcaha 6da subaxa rnimo ilaa 9ka subaxa iyo 3.30ka galabnimo ilaa iyo 6.30ka galabnimo. Kuma jiraan maalmaha feestooyinka ah.				

Wararka ku saabsan xiliyada iyo jidka basku marayo

Wac 612.373.3333 si aad ula hadasho qof Xafiiska Metro Transit.

Ama wac 612.341.4287 afar iyo labaatanka saac (24hr Automated bus information) ama kaba hel warbixino boga shabkada internetka ee www.metrotransit.org

Waxaa kale oo aad heli karta warbixin ku saabsan jidka u basku maro.

Waxaad kale ood booqan kartaa Xafiiska Macamiisha oo laga heli wixii bas kaga dhex luma oo laga helo

Customer Relations and Lost and Found

570 Sixth Ave N, Minneapolis

Waxaad kaloo wici kartaa 612.349.7415 si aad timaamo uga bixisid ama u ogaatid waxaad baska ku soo ilawday. Xafiisku wuxuu furanyahay Isniin ilaa Jimce laga bilaabo 7da subaxnimo ilaa 6da Fiidnimo.



SuperSaver Hotline

Wac lambarada loo yaqaan Super Saver Hotline kuwa soo ah 612.349.7681 si lagugu soo diro hadii aad jaclaysato inaad karka baska u kugu yimaado guriga. Tan waxaa la yidhaa (mail Order).

Dad ka aan dhagaha wax ka maqlin waxaa loo sameeyay lambaro ay wici karaan oo ah kuwan soo socda

Warabixinta Jidka ee xiliga waa 612.341.0140

Ladhaqanka Macaamisha

612.349.7439

Metro Commuter Services

Waxaa loo yaqaan Metro Commuter Services oo ah kuwa u kala goosha duleedyada labada Magaalo ee Mataanaha ah 651.602-1253



10.2 Wararka ku saabsan Baabuur wadida xiliga Jiilaalka iyo meelaha baabuurat ala dhigo

Marka uu baraf dao Magaalooyinka inta badan waxay leeyihiin mashruuc ka gura barafka magaalada. Si ay darawalnimadu u noqoto mid nabad galyo leh. **Magala walba iyadaa qaynuun keeda gaar u leh. Hadii aad dhigto baabuur kaga meel aan la ogolayn xiliyada qaarkood, baraf la'adligii, aadaa bixinya kharashka ku bixi inaad babuur kaga la soo baxdid.**

Gargaarka degdedga ah ee gurida barafka ee Minneapolis:

Si aad u fahantid aad n aula socotid meelaha la dhigi karo baabuurta iyo meelaha aan ladhigi karin xiliyada qaar kood baraf lagurayo la'adligii wac lambarada

Af Ingriis 612.348.7669

Af Somali 612.673.2141

Hadii u qof dhagaha wax ka maqli wuxuu garaaci kara lambaradan TTY: 612.673.2116

Hadii lagaa jiito baabuurka oo la geeyo meesha lagu hayo ilaa inta aad ka bixinaysid ganaaxa – wuxuu kujiri xerada loo yaqaano (Impound Lot), fadlan wac lambaradda 612.673.5777. Diyaari baabuur kaga liisan lambarkiisa.

Si aad u heshid baabuur kaga waa inaad tagtaa xerada lagu hayo ee (Impound Lot) aad na lacagta bixisaa si aad baabuurkaga u soo wadatid. Waa daruuri inaad wadataa aqoonsi, lahaanshaha baabuurka, camiskiisa, iyo waliba lacagta ganaaxa. Si aad u ogaato meesha u (Impound Lot) kaga yaalo Mineapolis waa : **51 Colfax Ave N, Mineapolis, MN 55405.**

Gargaar ka degdeg ee magaalada St. Paul (St. Paul Snow Emergencies):

Jidad ka magaalada St. Paul waxaa laga xaaqaa barafka laba xili oo kala ah habeen iyo maalin (Night Plow Routes iyo Day Plow Routes).

Jidadaka qaar waxaa laxaaqaa maliintii kuwana habeenkii. Kuwa maalintii la xaaqo waxaa la bilaaba 8da subaxnimo ilaa 5ta galabnimo. Jidka ayaa waxaa lagu qori dhinaca la xaaqayo, tusaale ahaan in laxaaqayo (East West side ama North South side). Jidka ayaa kuu tilmaami meesha la xaaqayo hadii ay tahay Bari, Galbeed, Koonfur ama Wuqooyi.

Kuwa habeenikii laxaaqo waxaa la bilaaba 9ka fiidnimo ilaa 6da subaxnimo.

Hadii lagaa jiito baabuurka waa inaad tag taa xerada lagu hayo ee St. Paul Police Department Impound Lot. Si aad u ogaato in baabuur kagu xerada ku jiro waa inaad wacdaa lambarada xerada ee 651.603.6895. Sida oo kale waa inaad diyaar la ahaata liisan lambarka baabuur kaaga. Sidoo kale hadii aad rabtid inaad baabuur kaga xerada kala soo baxdid waa inaa diyaar la ahataa aqoonsigaaga, camiska baabuurka iyo waliba lacagata ganaaxa. Xerada St. Paul ee baabuurta lageeyo waxay ku taala : **1129 Cathlin Street (oo jidka Como Avenue kabaxa) St. Paul, MN**



10.3 Maxaa La sameeyaa hadii shil baabuur kugu dhaco

Marnaba ha ka tagin goobta shilka. Wac booliiska, u sheeg goobta uu shilku ka dhacay, codsana hadii aad u baahato daryeel caafimaad.

Hadii aad ku so beganto meel shil ka dhacay oo aad tahay qofka ugu horeeya u jogsada dad ka shilka galey, cawii hadii aad xirfad u leedahay, una garaac lambarada 911 hadii aysan awoodin oo u shilkoodu aad u xunyahay. Ogowna inta qof ee shilka gashay.

Hadii aad adigu shil gasho waa lasim inaad istaagtaa oo aad hadii aad awoodo jidka gees uga badaa. Hadii uu dhawac ku soo gaaro dalbo cawimaad. Waa lasim inaad bixisa magacaaga, taariikh dada dhalasho, camiska baabuur kaga iyo waliba meesha aad dagantahay. Waa laasim inaad jog taa gobta shilka. Hadii laga codsada waa inaad dhiibta liisan kaga baabuur wadida. Warar kaa oo dhan waxaad sinaysaa sarkaal kasta oo booliis ah.

Goobta uu shilku ka dhacay waxaa kale oo kaa codsan kara adna aad ka codsan kartaa qofka shilka kulagalay ama baabuur kii kale qof kii waday, inaad is weeydaar sataan magacyaha, liisanka baabuurta, camiska iyo waliba qof ka kuu ama u ah waxa loo yaqaan (Insurance Agent).

Hadii aad awoodi waydo in aad warka dhamaytirto waa inaad mudo 72.sacadood ah gudahood aad warbixin dhamaystran dhiibtaa. Kuwaso ah Magacaaga, Liisanka Baabuurka, Caymiska baabuurka, Cinwaankaga, Taariikh dada dhalasho. Hadii aad intaa ku dhamaystiri weydo 72.guda hooda waa fal dambi ah.

Hadii u baabuur ku ku soconwaayo dhakhso u raadi cawimaad ka wada jidka.

Wararkan waxaa laga soo tabiyay shbakada internetka ee hayada (Minnesota Driver and Vehicle Service— oo ah— www.dps.state.mn.us/dvs/crash%20Records/crash.htm.)



10.4 Warbixino ku saamsan Habka Caruurta Baabuurta loo gu Qaado

Sharciga Minnesota State ee Habka Caruurta Baabuurta loo gu Qaado ayaa amraya in cunugu hadii uu ka yar yahay 4 sano ay

tahay lasim in lagu fadhiisiyo kursi baadbaado leh ee caruurta. Kaas oo loo bahanyahay in u waafaqo habka dawlada dhexe.

Dhalaanka ka yar 1 sano ama 20 boundi (pound) ayay tahay laasim inay ku dhex jiraa kursi fiirinaya gadaal oo badbaado.

Hadii u qofku shurudahan mari ama waafaqi waayo waa fal dambi oo fudud oo lagu bixiyo ganaax lacag ah.

Waxaa kale oo lagu talinayaa in qof kasta oo 13 sano kayar u fadhiisto gadaasha baabuurka oo kaliya.



10.5 Caymiska Baabuurta (Auto Insurance)

Camiska baabuurta waa axdi ka dhexeeya ama kunturaad adiga iyo shirkada caymiska (insurance company). Waxaad bixisaa lacag waxaana lagugu badalayaa camiska oo ka balan qaada inu kaa bixiyo wax yaabo cayuman oo ah kharashka loo bahdo hadii u baabuurku ku timaado bahi lacag, waana inta ay idiin socdaan kunturaadu.

Maxaan ugu bahanahay Camiska baabuurta.

State-yada qaarkood waa daaruuri inaad leedahay hadii aad rabtid inaad baabuur wadid, inaad hesho taarikada baabuurka.

- Waxa layidhaa (liability coverage) waa kharashka lagaa bixiyo hadii dhibaato u geeysato baabuurta kale.
- Waxa layidha (No-fault coverage) waa kharashka laga bixiyo ee caafimaad dadka adiga kula socday dhaawaca soo gaara hadii aad khaladka leedahay iyo hadii kaleba.
- Waxa loo yaqaan (Both Coverage)

Xitaa State-yada aysan daruuriga ahayn inuu qofku leeyahay caymis waa laasim inay bixiyaan kharashka ama dhaawaca ay u gaystaan dadka kale waana sharci. Lahaanshaha caymiska ayaa kuu fududaynaya inaad qaynuunadan oo dhan. Dhibatada baabuurta so garta inta badan waxaa caymisku bixiyaa maal gali ama iibsasho baabuur.


- Caymis la'an waxaad khatarku tahay inaad kharashka oo dhan bixisaa.
- Bedalka baabuurkaga hadii u jabo ama hadii la xado.

Wararkan waxaa laga helay State Farm Insurance, oo shabakada internetka www.statefarm.org/insurance/auto/whatis.htm.

Hadii lagugu qabto baabuur caymis la'an ah waxaa laga yaaba in lagu ganaaxo ilaa iyo \$1000.00 ama lagu xidhaa 90 bari-tan ayaa laga yaaba inay dhibaato u keento sharcigaaga dalka Mareykanka xaga Imigereeshinka iyo inaad noqoto wadani Mareykan ah. (Warkan waxaa laga helay) (Ramsey County Vilations Bureau).

Fiiri buuga talafoonada ee (Yellow Pages) si aad u hesho waxa ku haboon caymis ahaan baabuur kaga. Hubso inaad heshaa qiimo kuu wanaagsan, is barbardhig shikado badan. Kabacdi dooro tan kuu fiican.

10.6 Basic Map of Twin Cities





II

Dhaqaalaha Shaqsani ahaaneed

- II.1 Lacagta dalka Mareeykanka
- II.2 Bangigu Muxuu yahay ?
 - Jeegaga iyo Kayd ka
 - Sidan baa jeega loo qoraa (How to write a check)
 - Lacagta sida toos ka ah u gasha koontadaada (Direct Deposit)
- II.3 Mashiinada Bangiyada (Automated Teller Machines "ATM")
 - Sidee loo isticmaala Mashiinada
 - Istcmaalka ATM waa lacag
- II.4 Deynta iyo Sumaacada
 - Wamaxay Kaarka Deyntu (Credit Card)
 - Isticmaalka Kaarka Deynta Musuliyada kaa saran
 - Maxaa la sameeyaa hadii ayy kugu dhacdo dhibaato xaga deynta ah?
- II.5 Xawilaada
- II.6 Addeega Shaqalaawayaasha
 - Waxaad u qalmi (Unemployment Benefit) hadii aad buuxiso shuruutaha hoos ku qoran

II.1 Lacagta dalka Mareeykanka

Lacagta dalka Mareeykanka waxay ku timaada ama ka sameeysantahay xaanshi(paper bills) iyo qadaadiic (Coins). Halkii (Dollar) waa 100 senti (cents). Fiiri sida ay lacagta dalka Mareeykanku u kala baxdo, sida ku xusan hoos:

Penny (One Cent)



1¢ \$0.01

Kennedy Half-Dollar (Fifty Cents)



50¢ \$0.50

“Susan B. Anthony” Dollar Coin (\$1.00)



Nickle (Five Cents)



5¢ \$0.05

“Sacajawea” or “Golden” Dollar Coin (\$1.00)

Dime (Ten Cents)



10¢ \$0.10





Quarter (Twenty-Five Cents)



25¢ \$0.25

“Eisenhower” or “Silver” Dollar (\$1.00)



	X 100 =	
	X 20 =	
	X 10 =	
	X 4 =	

One Dollar Bill \$1.00



Two Dollar Bill \$2.00
aad loo ma isticmaalo (very rarely used)



Five Dollar Bill \$5.00



Ten Dollar Bill \$10.00



Twenty Dollar Bill \$20.00



Fifty Dollar Bill \$50.00



One Hundred Dollar Bill \$100.00



11.2 Bangigu Muxuu yahay ?

Bangi waxa weeye hayad ku haynaysa oo kuu badbbadinaysa lacagtaada. Oof kale oo lacagtaada taaban kara majiro. Bunuugtu waxay kale oo u qabtaan macaamiishooda howllo kale oo badan.

Jeegaga iyo Kayd ka.

Koontada jeegaga waxay fursad kuu siinaysa inay lacagtaada u isticmaasho si fudud oo ah qoraal jeeg. Waxaad isticmaali kartaa jeegaga si aad u bixisid kharash yadaada ama aad wax ku iibsatiid. Waxaad isticmaali kartaa jeegaga xaanshida ah ama waxa loo yaqaan (Check Card), waa kaar bangigu bixiyo, si aad u isticmaasho sidii lacag oo kale hadii ay koontadaada lacag ku jirto. Kaarka bangiga ayaad u isticmaali kartaa si aad lacag ogala soo baxdo mashiinada mbamgiga ee loo yaqaan ATM.



Koontada kayd ka way ka duwan tahay kuwa kale. Koontada kayd ku waxa ku siinaysa lacag dheeraad ah oo loo yaqaan (interest) hadii aad klacagtaada bangiga u deeyso. Lacagta dheeraad ka ahna waxaa bixinaya bangigaaga. Hadii aad u bahato waad ka soo sari karta lacag koontada kaydka adigo isticmaalaya karaka ATM ama bangigaaga ood tagto.

Si aad bangiyada oga furato koonto waa inaad arji buuxisa oo aad la tag taa bangiga laba aqoonsi oo mid sawir leeyahay. Mida waxaa noqon kartaa xaanshi ku timid cinwaankaaga sida ku biilasha korontada. Waxaad kaleoo u bahanaysaa inaad lacag galisaa koontadaada.

Sidan baa jeega loo qoraa (How to write a check)

Your Name			
Address			
Phone (Optional)		DATE <u>June 6, 2003</u>	3000
Drivers License Number (Optional)			75/409
PAY TO THE ORDER OF <u>Xcel Energy</u>		\$ <u>23.49</u>	
<u>Twenty-Three and $\frac{49}{100}$</u>			DOLLARS
FIRST BANK 123 CENTER STREET ANY TOWN, MN 55555			<small>Security features included. Details on back.</small>
MEMO <u>Electric Bill</u>		<u>Your Signature</u>	
⑆ 2345690 1234 12 335 2334 ⑆ 3000			

Bangigu wuxuu kuu soo diri bilkasta xaanshi ku tudinaysa sidaad u isticmaashay kontadaada. Wixii aad galisay iyo waxaad saartay.

Lacagta sida toos ka ah u gasha koontadaada (Direct Deposit)

Waxaad sameeyn katrtaa inaad mushahaarkaga si toos ah ugu ridato koontadaada. Macnaheedu waxa weeye jeegaagu shaqada laasim ma'aha inuu guriga kugu yimmado. Si aad u sameeyso (direct deposit) waa inaad bangigaaga iyo shaqadaadaba lakulantaa.

11.3 Mashiinada Bangiyada (Automated Teller Machines "ATM")



Mashiinada bangiyadu waxay yihiin mashiino sameeya howlaha bangiyada inta badan sida koontada ood lacag galisaa, lacag ka ssartaa, biil ku bixisaa, iyo waliba lacag u wareejisaa meel kale. Mashiinada ATM waxaad ku isticmaali kartaa karaka bangiyada. Mashiinada ATM ka waxaa laga helaa gobo badan. oo ay kamid yihiin kuwa kuyaala dukaamada, bangiyada, suuqaqa waweeyn, maqaaxiyaha qaarkood iyo meela kale oo badan.

Sidee loo isticmaala Mashiinada

Kaarkaaga ayaad dhex galinaysaa kabacdi mashiinkam aya kaa codsan doona inaad galiso lambarada sirta kuu ah, lambaradan waxaa ku siin doona bangigaaga, waana kuu sir. Mashiinku wuxuu ku weeydiin inaad rabto inaad lacag galiso ama aad laca la soo baxdo, adiga aya go'anka leh. Mashiinko waxaa kale oo u ku weeydiini doona inaad xaanshi rasiid ah rabtid, taasna waa mid adiga kugu xiran.

Isticmaalka ATM waa lacag

Mashiinada ATM ka qaarkood aya laga yabaa inay kaa jaraan lacag markaad isticmaashid. Hadii u mashiinku lacag kaa rabo wuu kuu sheegi inaad rabtid inaad lacagta bixisid iyo in kale. Adaa go'anka leh.

11.4 Deynta iyo Sumaacada

Deyntu waa lacag ama rasamaal Igu siiyo, waxaana lagu qiimeeyaa hadba saad isaga bixinkartid. Hadii deynta aad bixis waxay kuu dhisaysaa sumaacad oo waxaa la arkaa in lagu kordhiyo xolaha lagu deymiyo. Waxaa kale oo ay ku xidhantahay deymaha lagu siin karo dhaqaalahaaga.

Wamaxay Kaarka Deyntu (Credit Card)

Kaarka Deynta waxaa weeye kaar ay bangiyadu bixiyaan oo lagu qaato deynta sida iibsashada waxyaabo kale duwan oo ay kamid yihiin, baabuurta, guryaha, iyo iwl. Kaar walba wuxuu leeyahay qiyaas lagu qiimeeyo iyadoo ay ku xirantahay dhaqaalaha qofka. Bil kasta waxaa lagu soo diri kharash lagaa rabo inaad bixisid. Sida aad deymaha isaga bixisid ayay ku xirnaanaysaa sumaacadaada deynta. Waa lasiim hadii u qofku qaato kaar deyn inuu ilaaliya sumaacadiisa.



Isticmaalka Kaarka Deynta Musuliyada kaa saran.

Inkastoo oo uu isticmaalka karaka deyntu kaa caawin karo qaadashada ama iibsashad baabuur guryo iyo wixii lamid ah hadana waa mihiim inaad isgalinin kharash badan ama deyn badan.

Maxaa la sameeyaa hadii ayy kugu dhacdo dhibaato xaga deynta ah?

Waxaa jira addegyo ku takhasusay xaladaha deynta oo kaa caawin kara. Ha dhagaysanin kutiri ku teen ama hadal qof aan xirfad u lahayn howshan. Raadi hayadaha kaa caawin kara xaladaha ku saabsan deyntaa oo xumaata. Waxaa jirta hayad loo yaqaan African Credit Education iyo kuwa kale oo la mid ah. Wac lambarada 612.813.0501 Africa Credit Education si aad u hesho talo.

11.5 Xawilaada

Waa dhici kartaa in gooba badan oo caalimka ka mid ah loo diro lacag. Waxaa jiraa meelo badan oo ku yaala Labada Magaalo ee Mataanaha ah (St Paul iyo Minneapolis). Ka fiiri buuga talfoonada ee gayigaaga si aad u ogaato tan kuu gu dhow.

11.6 Addeega Shaqalaawayaasha


Addeega soo gala shaqalaawayaasha waxaa u qalm dad ka ay shaqadu ka dhamaato iyaaga oo aan khalad galin ama aan sabaabin in shaqadu ka dhamaato. Dhaqaalaha soo gala ayaa loo yaqaan (Unemployment Benefit). Aalaa waxaa u qalma dadka shaqadu ka dhamaato (Laid Off). Addeegani wuxuu soo celiyaa dhaqaalihii aad qaadan jirtay qayb ka mid ah. Addeega waxaa bixiya dhaqaalihisa Caymiska Shaqalaawayaasha. Lacagta Caymiska Shaqalaawayaasha waxaa weeyye qayb kamid ah canshuurtii qofka lasiin jiray markii uu shaqaynjiray. Dhamaan dadka sida shaciga ah uga shaqeeyay Minnesota ayaa u qalma (Unemployment Benefit) hadii dowlada u shaqeeyay iyo hadii shirka u shaqeeyay amaba hadii u iskiis u xoog saday. Waa lasim inaad noqotaa, wadani Mareeykan ah, qof degenaansho leh, qof diiwaan gahsan iyo qof sharci u leh inuu dalka Mareeykanka ka shaqeeyo.

Hadii aad degantahay Minnesota ama aad u soo kala gooshto Minnesota iyo State daris ah waxaad ka heli kartaa arjika codsiga (Unemployment Benefit), www.MNWorkForceCenter.org/ui ama wac lambarada mashiinka automaatkada ah ee 651.296.3644 (877.898.9090) waana bilaash ama kharash la'aan. Hadii aad ku nooshahay meel kabaxsan Minnesota wac waxaa loo yaqaan (TELECLAIM), waa codsiga aad ku heli kartid khadka talafoonka. Lambaraduna waa kuwaa kor ku xusan. Hadii kale waxaad tag taa goobta kugu do wee Xafiiska laga raadsado shaqooyinka (Unemployment /Job Service office).

Waxaad u qalmi (Unemployment Benefit) hadii aad buuxiso shuruutaha hoos ku qoran.

- Hadii aad sameeysay dhaqaale ku filan inaad qaadatao (Unemployment Benefit).
- Hadii aadan shaqo hayn ama aad shqeeyso xili yar oo aadan khaladka shaqal'aanta u san kaa imen.
- Hadii aad xoog ahaan iyo maskax ahaanba aad caafimaad qabto inaad shaqeeyso ama aad qaban karto shaqadaad haysay.
- Aad na diyaar u tahay inaad shaqeeyso.
- Aad si dadaal leh u raad saneeyso shaqo.

Hadii aad su'al ka qabto barnaamijka shaqalaawayaasha (Unemployment Benefit) gal khadka internetka ee www.MNWorkForceCenter.org/ui ama wac lambarada 651.284.3033 (877.504.5050). Durjumayaal ayaa diyaar kuu ah.



12

Wararaka Canshuur Bixiyaha

Taxpayer Information

- 12.1 Waa maxay Canshuurtu, maxaynuse u bixinaa?
- 12.2 Lambarada Canshuur Bixiyaha (Taxpayer Identification Numbers)
- 12.3 Markaad Tahay Shaqaale
- 12.4 Qofka iskii u shaqaysta ama bilaabaya bacaymushtar yar
- 12.5 Xeraynta Canshuur Celinta
- 12.6 Qof ka aan Degenansho ku Lahayn dalka Mareykanka: (Non- Resident Alien)
- 12.7 Ganaaxyada ama Ciqaabaha (Penalties)
- 12.8 Gobolka Minnesota Canshuur Celintiisa (Minnesota Income Tax Return)
- 12.9 Warbixin ku saabsan adeegyada ama caawimaad ku waajahan canshuur celin/buuxin.

12.1 Waa maxay Canshuurtu, maxaynuse u bixinaa?



Dowladu waxay dadweynaha u qabataa adeegyo bulsheed oo fara badan. Si ay dowladu u bixiso kharashkeeda waxay u baahantahay dakhli ama lacag soo gasha. Lacagta ay inta badan dowlada dhexe isticmaasho waxay ka soo gashaa canshuurta. Canshuurta waxa laga qaadaa dhaqaale khaas ahaaneed oo shirkad ama qof leeyahay, waxayna u soo war eegtaa dowlada. Waxaa jira noocyo badan oo kala duwan oo canshuur ah: Noocyada canshuurta ah waxaa ka mid ah tan loo yaqaan badbaadada bulshada ama Social Security, tan caafimaadka, tan wax la qaado marka wax la iibsho iyo tan rasamaalka.

Lacagta canshuurta ee uu qofku celiyo amaba bixiyo waxaa in loo celiyaa dowladda dhexe, iyadoo inta badan lagu cesho dowladaha gobolada (State Governments). Lacagta aad bixinaysaa waxay inta badan ku saleeyaan tahay dakhliga ku soo gala ee kaa soo gala mushahaarka shaqaadaada. Waxaa kale oo laga jaraa dhaqaalaha kaa soo gala maalkaaga khaas ahaaneed. Lacagta loo jaro dowlada dhexe waxaa inta badan lagu maal galiyaa: Difaaca qaranka, wasaradda arrimaha dibadda iyo addeega halgamayaasha qaranka, addegyada bulshada iyo horumarinta dadweynaha, nabadgalyada iyo booliiska iyo weliba bixinta deynta qaranka. Addeega dadweynaha ee loo yaqaan (Social Security) iyo canshuurta caafimaadka ayaa marka la isku daro noqda waxa loo yaqaan (FICA) - oo ah (Federal Insurance Contributions Act tax), oo macnaheedu noqonkaro "Qaynuunka Canshuurta Camiska Qaranka". Mashruuca Badbaadada Dadweynaha ee loo yaqaan Social Security wuxuu gargaaraa dadkii howlgabka noqday ee shaqayn jiray amaba haddii ay dhinteen waxa ay lacagtii qaata qoyskii ka haray ee u qalma qaadashada lacagtan. Canshuurta loo yaqaan Medicare tax, waxay gargaartaa dadka qarkood markay gaaraan 65 sanno. Canshuurta loo yaqaano Sales Tax waxa qimeeya dowladaha hoose ama kuwa gobolada, waana qiyaas ku jaan-go'an waxa la iibsado. Excise Tax waxaa la yidhaahdaa canshuurta laga jaro tilifoonada iyo tigidhada dayuuradaha. Property Tax waxaa la yidhaahdaa canshuurta laga jaro hantida uu qofku leeyahay, sida guraha iyo baabuurta.

12.2 Lambarada Canshuur Bixiyaha (Taxpayer Identification Numbers)

Si loo bixiyo ama loo xereeyo canshuurta qofku wuxuu u bahanyahay lambaro isaga u gaar ah oo aan cidna la wadaagin. Lambarada waxaa loo yaqaan Taxpayer Identification Numbers ama Social Security Numbers. Waxaana laga bixiyaa xafiiska Maamulka Canshuur Celita ee la yidhaahdo Social Security Administration. Waxaana Canshuur Celinta (Internal Revenue Service) oo marka la soo gaabiyo loo yaqaan (IRS) waxay siisaa dadka aan caadiyan lahayn waraaqaha degaanshaha ee rasmiga ah waxa loo yaqaano Individual Taxpayer Identification Number oo loo soo gaabiyo ITIN. Siinta lambarkaas ITIN macnaheedu ma aha in aad xaq u leedahay adeegyada bulshada, sida Social Security-ga, iwm.

Qofkasta oo xaq u leh inuu ka shaqeeyo dalka Mareykanka waa qasab inuu lahaadaa nambarada loo yaqaano Social Security Numbers-ka. Si aad u hesho Social Security Number waa inaad wacdaa Xafiiska maamula arrimaha Social Security-ga. Fiiri liistaha ku qoran qaybta 4.4 ee Buugan Jihayna si aad u heshid xafiiska kuugu dhoow. Haddii aad rabtid inaad codsato lambarada ITIN, ee aan kor uga soo faaloonay, buuxi Xaanshida loo yaqaan Form-W-7, taas oo

laga heli kar o shabakada internetka ee waaxda Canshuuraha oo ah www.irs.gov, ama wac lambarada (IRS) ee ah 800.829.3676 ama soo gudbi arjiga Form W-7 asaga oo aad la soo raacisay sawirada aqoonsiyada loo baahan yahay oo dhan.

12.3 Markaad Tahay Shaqaale

Canshuurta Dowlada Dhexe (federal) iyo tan Goboladaba (State Governments) waxay canshuur ta ka jaraan mushaharka shaqaalaha. Waxa axaana laga jaraa Jeeg walba lacag go'an. Saanadku markuu dhamaado ayaa ay dowladda dhexe iyo tan gobolkuba fiiriyaan lacagtii ay qofka ka jareen iyaga oo go'aan ka gaara in qofkaas laga jaray lacagtii xaqa loogu lahaa iyo weliba in ay wax raaceen amaba lacag dheeraad ah laga jaray.

Markaad shaqo cusub bilowdo dadka ku shaqaleeysiiyay waxay kaa codsanyaan inaad buuxiso Xaanshida loo yaqaan W-4, taas oo cadaynaysa inta lagaaga baahan yahay in aad bixiso. Haddii aad hayso laba shaqo fadlan buuxi hal xaanshi oo W-4 ah, kabacdina u kala qaybi shaqooyinkaaga isla xaanshiidasa. Tusaale ahaan waxaad ka jari kartaa canshuurta lagaaga baahan yahay oo dhan hal shaqo, adoo islamarkaana sheegaya waxa kaa soo gala shaqooyinkaaga kale.

Canshuurta waxaa kale oo sii dheer oo ay tahay in aad ka bixiso canshuurtii ay lahaayeen qaybta Social Security-ga iyo/ama Medicare-ku.



12.4 Qofka iskii u shaqaysta ama bilaabaya bacaymushtar yar

Waxaa loo yaqaana ama uu yahay qofka iskii u shaqaystaa, qofka isagu kaligii ka baayacmushtar ee wax uu kaligii ka shaqeeyo, uuna leeyahay, ama uu ku shaqeeyo xirfad farsamo yaqaanimo ah oo uu keligii maamusho. Sidoo kale haddii aad la wadaagto dad kale baayacmushtar ama shirkad baayacmushtar ah, waxaad tahay waxa loo yaqaan Self Employed. Haddii aad tahay dadka kor ku xusan waxaad soo galaysaa qayb gaar ah, markay noqoto canshuur celinta. Si aad war fahfaahsan u hesho, fadlan wac lambarada IRS-ta oo ah 800.829.1040 oo ah qaybta khuseysa Canshuur Celinta dawladda dhexe ama booqo boga www.itr.gov.

12.5 Xeraynta Canshuur Celinta

Canshuur Celinta dalka Mareykanka waxay ku taxaluqdaa canshuur celiyaha ama dadweynaha inay soo celiyaan canshuurtooda, soona sheegaan waxay lacag sameeyaan sanad kasta, si loo ogaado waxa ay dowladu ku lahaanayso.

Inta badan canshuur celiyayaasha ama dadweynaha waxaa looga baahanyahay inay soo gebo-gabeeyaan oo ay soo xereeyaan canshuurtooda ugu dambayn tariikhdu markay tahay 15ka habeen barkii bisha 4raad sanad walba (By midnight April 15). Wixii qofka lagu lahaadana waa inu soo diraa ugu dambayn isla tariikhda iyo xiliga kor ku xusan.

Waa qasab inaad canshuur taada xereysaa haddii aad tahay wadani Mareykanka ah ama aad leedahay degaansho dalka Mareykanka. Waxaad tilmaamo ka helaysaa Xaanshida loo yaqaan

Form 1040 oo laga helo www.irs.gov ama wac 800.829.3676. Sanad walba waxaad xar eyn kar taa hal canshuur celin , xataa haddii aad ka shaqaysay ama ka shaqayso meelo badan. Wax aha kale oo aysan ku xir naysan inta xaanshi ee aad wadato ee loo yaqaan W -2 For ms ama inta gobol ee aad ka shaqaysay .

Qofkasta oo ah canshuur celiye ahi wuxuu bixinayaa xaanshiyaha loo yaqaan Form-1040, Form 1040A ama Form 1040 EZ. Xaanshida aad buuxinaysaa waxay ku xiran tahay hadba sida dhaqaalahaagu yahay ama sida aad lacag u bixinaysid ama ay kugu soo noqonayso. Wax aha laga yaaba inaad u baahato xaanshiyo kale oo kuu faahfaahiya sida aad canshuurta u buuxin lahayd. Xaanshiyahaas waxaad ka heli kar taa www.irs.gov ama wac 800.829.1040, si aad warbixin sax ah u heshid.

Waxaa jir ta shan qaybood oo ay u kala baxaan canshuur ta celinteedu. Guud ahaan canshuur celitaadu waxay ku xirantahay inaad tahay xaas ama aadan ahayn. Xaasku wuxuu noqon karaa oo kaliya guur sharciyeeyaan oo ka dhexeeya nin iyo naag. Fiiri qooraalka xaanshida 17 oo aad ka heli kar tid www.irs.gov ama wac lambarada 800.829.1040.

Waxyaabaha lagaa reebi karo iyo dadka kugu hoos nool (Personal Exemptions and Dependents) Haddii ay dad badan kugu hoos nool yihiin (dependents) waxaa lagaa reebi karaa in lacag badan lagaa jar o. Waxaa lagu ogol yahay in adiga iyo xaaskaaga la'idinka daayo wax/lacag la idinka jari lahaa. Xaasku waa naagtaada (haddii aad nin tahay) ama ninkaaga (haddii aad haween tahay). Wax aha kale oo lagu ogol yahay in aad dalbato ama sheegato inta qof ee kugu hoos nool, sida caruur taada. Wax aha dar uuri inaad buxisaa shur uudaha qaarkood si aad u noqotid qof ah ka reebane (Exemption). Wax ahaabaha muhiimka u ah canshuur celiyaha waxaa ka mid ah inuu noqdaa wadani Mareeykan ah, ama qof ku nool dalka Mareeykanka, ama degan dalalka (Canada iyo Mexico). Fiiri Xaanshida Qooraalka ee 17naad, si aad warar faahfaahin leh u heshid. Wararkan waxaad ka heli kar taa www.irs.gov ama wac lambaradda 800.829.1040 ama la hadal qof ku takhasusay canshuur celinta.

U qalmidda in aan lagaa jarin canshuur badan Waxaa laga yaaba inaad u qalantid in aan lagaa jaran canshuur badan. Fiiri qaybta 9aad ee cutubkan, ama raadi qof ku takhasusay canshuurcelinta si uu kuu caawiyo.

Waxaa jira wax loo yaqaan Non-Refundable Credits. Kuwaas waxaa ka mid ah Hope credit waxa looya qaana iyo waliba tan waxbarashada, atn caruurta, dadka waaweyn , daryeelka qof kale, daynta guryaha ama baabuurta, hawl gabnimada iyo tan bixinta tabarucaadka, si aad u heshid warar ku khuseeya la xiriir qof ku takhasusay canshuur celinta.

Credits-ka lacagta aad shaqaysatay iyo tan caruur tuba waa lacag lagu soo celin kar o. Tan waa lagu soo celin karaa xataa haddii lacag lagugu leeyahay ama xataa haddii aadan lacag lagaa haynin.

Haddii adiga iyo xaaskaaguba aad rabtaan inaad isla xaraysaan canshuur celinta waa inaad buxisaan shuruudaha guud. Haddii aad tahay qof haysta (ITIN) oo aan kor ku soo faahfaahinay ama aad haysato waxa loo yaqaan Adoption Taxpayer Identification Number - (ATIN), uma qalantid canshuur celinta noocan ah.

Buuxinta Canshuur Celinta Buuxinta canshuur celintu waxay tahay in uu qofku buuxiyo oo u dhamaystiro Xaanshiyaha Canshuur Celinta oo uu u dir o Internal Revenue Service (IRSt). Wax aha lagu diri karaa arjiga canshuur celinta boostada caadiga ah amaba shabakada internetka oo loo yaqaano electronic mailing, loona diro IRS-ta ee gayigaaga. Cinwaanada lagu diro waxay ku yaalaan bogga gadaal ee xanshida loo yaqaan Form 1040. Sidaan kor ku soo xusnay waa in la

xareeyaa canshuurta ugu dambayn habeen barkii 15ka bish 4aad ee sanad walba (Midnight April 15).

Waxaa laga yaabaa in lagu ganaaxo haddii aad ka soo gaarsiin weydo taariikhda. La hadal qof ku takhasusay canshuur celinta si aad u ogaato in lagaa reebi karo taariikhda kama danbaynta ah.

Waxaad u baahan tahay inaad xafiddo xaanshiyahaaga canshuur celinta oo dhan (Form 1040 and supporting documents). Dowladda dhexe waxay kaydisaa xaanshiyahaas muddo saddex sano. Gobolka Minnesota wuxuu hayaa muddo saddex sano iyo bar ah xaanshiyaha canshuur celinta. Waxase la arkaa inaad u bahato inaad xafiddo xaanshiyaahaga mudo intaa ka dheer .

12.6 Qof ka aan Degenaansho ku Lahayn dalka Mareykanka: (Non-Resident Alien)

Haddii aadan ahayn qof degenaansho ku leh dalka Mareykanka way ka duwan yihiin shuruudaha lagaaga baahan yahay kuwa wadaniyiinta iyo waliba dadka degenaanshaha ku leh dalka Mareykanka. Fiir o Xaanshida Qooralka 519, taas oo laga heli kar o www.irs.gov ama wac lambarada 800.829.1040 si aad u ogaado in shuruucda canshuur celinta dalka Mareykanka ay ku khuseeyaan iyo in kale, iyo waliba si aad u ogaato xaanshiyaha la buuxiyo haddii ay ku khuseeyaan.

12.7 Ganaaxyada ama Ciqaabaha (Penalties)

Haddii aadan xereynin canshuurtaada taariikhda maalinta ugu dambaysa ee ay dawladdu cayintay , waxaa laga yaaba inaad ganaax bixisaa. Waxaa kale oo ganaax lagu saari karaa haddii aadan run ka sheegin dhaqaalihii ku soo galay ama aadan cadaynin dhakhligaaga oo dhan iyo waliba haddii aadan cadaynin lamabarada Social Security-gaaga. Haddii aad ku buuxiso canshuur celintaada warar aan sax ahayn waxaa la'arkaa in ay danbi noqdaan oo aad ganaax wayn bixiso.

Waxaa laga yaabaa in lagu qaado danbi oo aad maxkamad timaaddo haddii aad sameyso falalka soo socda;

Inaad ka dhuumato canshur celinta, in aad ogaan u buuxinweydo canshuurtaada, in aad bixiso warar aan sax ahayn, in aad ku kacdo falal budhcadnimo ah oo aad ogaan ugu buuxiso canshuur celin aan sax ahayn.

12.8 Gobolka Minnesota Canshuur Celintiisa (Minnesota Income Tax Return)

Gobolka Minnesota wuxuu canshuurta uga ururiyaa dhamaan wadaniyiinta iyo dadka aan degaanshaha kulahaynba siyaabo kala duwan. Gobolka wuxuu dhaqaaluhu ka soo galaa xagga canshuurta, raasamaalka, badeecadka, khamrada, tubaakada iyo baabuurta., iwm. Lacagta canshuurta la uririyo waxaa lagu bixiyaa waxbarashada, adeegyada dadweynaha, nabadgalyada iyo waxyaabaha kale ee loogu addeego bulshada.



Qofka degen Minnesota Noqoshada qof degen Minnesota waxay ku xiran tahay waxyaabo dhowr ah oo ay kamid tahay inaad rabtid inaad noqoto qof degan Minnesota. Haddii aad u so guurto Minnesota oo aad guri kiraysatid ama aad iibsatid waxa lagaa rabaa inaad noqoto canshuur bixiye reer Minnesota ah, iyadoo aysan ku xirnayn dhaqalahaaga. Haddii aad ku noolaato Minnesota mudo dhan 183 cisho/12 bilood gudahooda waxaa lagu aqoonsanayaa inaad tahay qof reer Minnesota ah sidaas daraadeed waxaa lagaa rabaa inaad bixiso canshuurta gobolka Minnesota xiligii aad deganayd Minnesota. Warar dheeraad ah waxaad ka helayaa (Income Tax Fact Sheet #1 oo laga heli karo www.taxes.state.mn.us ama wac lambarada 651.296.4444.



Masuuliyada saaran qofka degan Minnesota Noqoshada qof degan Minnesota ayaa waxay tahay mid cadaynaysa inaad leedahay xuquuq iyo waajibbaad. Masuuliyadaada waxa kamid ah inaad bixiso canshuurta Minnesota. Maadaama aad tahay qof degan Minnesota waxaa lagaaga bahanyahay inaad bixiso canshuurta Minnesota iyo tan dowlada dhexeba. Marar waxaa jirta dadka qaarkood aan looga baahnayn inay buuxiyaan canshuurta qaranka, laakiin ay qasab tahay in ay xereeyaan tan gobolka.

Buuxinta ama xeraynta canshuur celinta Minnesota: Tani waxay ku xirantahay bixinta canshuur celinta Qaranka (Federal). Waa qasab inaad xeraysaa canshuur celinta qaranka intaaden xarayn tan Minnesota. Isticmaal xaanshida (Form M1) ee Minnesota si aad u xaraysid canshuur celinta Minnesota. Xaashidan waxaad ka helayaa Minnesota Department of Revenue. Xaashidan iyo warbixin dheeraad ah oo kuu cadaysa in aad u qalanto inaad canshuur celin ku qasban tahay waxaad ka helayaa shabakada internetka ee www.taxes.state.mn.us ama wac 651.296.4444.

- **Lacagta la sooceliyo:** Minnesota waxay leedahay sifo badan oo lagu soo celiyo lacag canshuur celin ah. Sida keliya ee aad ku heli karto ayaa ah inaad buuxiso canshuur celintaada. Inta badan waxay yihiin kuwa u soo noqda dadka dhaqaalaha yar.
- **Lacagta u soo noqota qoyska shaqaynaya:** Tani waa lacag u soo noqota dadka dhaqaalaha yar, waxayna ku xirantahay sida aad u heshid tan qaranka. Haddii aad tan qaranka u qalantid si toos ah ayaad tan Minnesotana ugu qalmaysaa.
- **Nooca loo yaqaan K12-Education Credit:** U qalmidda noocanah waxa ay khusaysaa oo keli ah canshuur bixiyayaasha ubadka ku leh dugsiyada laga bilaabo kindergaden ilaa fasalka 12naad (12th grade). Si lacag laguugu soo celiyo waa in dhaqaalaha guriga soo galaa ka yaraado \$37,500.00 sanadkii.
- **Tan layiraa Child and Dependent Care Credit:** Waa nooca ama u qalmidda laguugu soo celiyo iyadoo marka uu kharash kaaga baxay ilaalinta ama daryeelka ubadkaaga marka aad shaqaynaysid amaba aad iskuulka ku maqan tahay. Waa in aad u qalantaa tan qaranka si aad ugu qalantid tan Minnesota.
- **Mida loo yaqaan (Property Tax Refund):** Tani waa ta loo soo celiyo dadka degan Minnesota ee leh rasamaalka hadana dhaqalahoodu yar yahay. Waxay kaloo ku xidhantahay inta qof ee qoysku ka kooban yahay iyo dhaqaalaha soo gala. Dadka iygu kiraysta guryaha waxay ku xidhantahay inta ay kirato bixiyaan. Waa inuu qofka kaa kirateeya guriga ku siiyaa xaanshi cadaynaysa intaad kiro ku bixisid. Xaanshida waxaa la yidhaa (Certificate of Rent Paid). Haddii aadan helin Certificate of Rent Paid (CRP) ilaa iyo bisha labaad ee (Februuary) wac Waaxada 651.296.3781.

Warar dheeraad ah oo ku saabsan canshuuraha waxaad ka helayaa shabakada internetka ee www.taxes.state.mn.us

www.taxes.state.mn.us ama wac lambarada 651.296.3781.

Maxaa dhaca haddii uu qof buuxin waayo canshur celin looga bahanyahay inuu xareeyo amase uu been ka sheego canshuur celintiisa?

Waaxda Canshuuraha ee Minnesota waxay warar ka heshaa meelo iyo hay'ado kala duwan. Sanad walba wararkan dib ayaa loo fiiriyaa. Haddii la ogaado inaan canshuur laxareeynin, waaxdu xaanshi bay kuu soo diraysaa, ay kaaga codsanayso inaad canshuurta buuxiso.

Haddii ay wax ka khaldan yihiin canshuur celinta: Waxa aaxda ayaa saxaysa waxayna kuu soo diraysaa xaanshi oo waxay kula socodsiiinaysaa isbadalka. Haddii ogaan wax loo khaldo hay'adu waxay kuu soo diraysaa ganaax iyo waliba danbi ku qaadid. Dadka si u kas ah amaba ula kac ah u khaldada canshuur celinta waxaa lala tiigsan karaa maxkamadda budhcadnimada.

12.9 Warbixin ku saabsan adeegyada ama caawimaad ku waajahan canshuur celin/buuxin

Dad badan oo tabarucad ku shaqeeya ayaa jiraa, oo ka caawiya dadweynaha xarumaha loogu addeego bulshada (Community Centers). Addeegani waa bilaash ama lacag la'an, khasatan dadka dhaqaalahoodu yaryahay iyo kuwa luuqadka Af-Ingiriisiga ku yar tahay iyo waliba dadka aan awoodin dhaqdhaqaaqa badan. Wac lambarada 651.297.2499 si aad u ogaato goobaha adeega.

Waa kuwan addeegyo laga helo Gobolka Minnesota.

Minnesota Department of Revenue Web site: www.taxes.state.mn.us


Minnesota income tax information	651.296.3781
Free volunteer tax preparation sites	651.297.2499
Refund information and forms ordering	651.296.4444
Taxpayer Rights Advocate	651.296.0992



Warbixino ku saabsan Canshuuraha xeer Qaran waxaad ka helaysaa (IRS at Tax Assistance Centers) ee goobaha hoos ku xusan

Bloomington:	2001 Killebrew Drive, Suite 239
Duluth:	515 W 1 st St, Room 105
Mankato:	209 S 2 nd , 4 th floor
Minneapolis:	330 Second Avenue S, Suite 275
Rochester:	21 SW 2 nd St, 3 rd floor
St. Cloud:	720 W St Germain St
St. Paul:	316 N Robert St, Room 385

Waxaa kale oo lagugu caawin karaa talafoonka wac 800.829.1040 waxaa kale oo diyaar ku ah inaad hesho xaaanshiyaha haddii aad wacdo 800.829.3676. Waxa kale oo warbixin ka heli kar taa shabakada internetka ee www.irs.gov oo aad waliba ka heli kar tid xaanshiyaha canshuuraha oo dhan.



13

Dhaqamada kala duwan

Waxyaabaha Caadiga ah ee ay Dhaqamadu ku kala duwan yihiin Marka laga fiiriyo tusaala ahaan dhinaca wadamada Galbeedka Afrika

13.1 Baabuur wadida

Booliiska sida loo la dhaqmo

Liisanka baabuur wadida (Drivers License)

Caymiska (Insurance)

Waditaan Baabuur adiga oo maandoorsan ama sakhraansan (Drinking and Driving)

13.2 Guurka xidhiidhyada ka dhexeeya dadka ee ku waajahan shukaansiga

Guurka

Fara xumayn

Qacmo is Qabashada

13.3 Korinta caruurta

Daryeel la'aanta ubadka

Adaabta (Discipline)

13.4 Lacagta, Canshurta iyo Adeegyada Dawlada

Jeegeg Been ah

Saxiix been ah

Been ka sheegid aad doonayso inaad uga faai'adaysato Adeegyada Bulshada

Waaxda Canshuur Celinta

13.5 Waxyaabo kale oo dhaqamadu ku kala duwan yihiin

Meel Fagaara ah oo loo isticmaalo musqul ahaan

Xafladaha iyo Casuumaadaha

Hanjabaada

Dagaalka ama gacan kahadalka

Isgaarsiinta ama wadhadalka

13.1 Baabuur wadida

Booliiska sida loo la dhaqmo

Dalalka Galbeedka Afrika waa caadi haddii uu booliis istaajiyo darawal, inuu darawalka ka soo dego baabuurka una soo kicitimo dhinaca booliska xishmad awgeed. Halka dalkan Mareeykanka lagaaga baahanyahay inaad fadhido (dirawalku fadhiyo) oo aad ku ekaato kursiga baabuurkaaga, marwalbana uu booliisku arki karo gacmahaaga. Haddii aad ka soo dagto baabuurkaga, waxaa la arkaa inuu booliisku umaleeyo inaad weerareeyso oo aad ladagaleeyso. Sidaas daraadeed waa muhiim inaad kursiga baabuurka fadhidaa.

Liisanka baabuur wadida (Drivers License)

Dad farabadan ayaa Afrika ku wada baabuurta ayaga oo aysan u dhameystirnayn shuruudaha iyo xaanshiyaha looga bahan yahay. Dalka Mareeykanka waxaa la qaataa marka hor ee uqsada waraaqda barbaradka, taaso fursad kuu siinaysa inaad tababar u qaadato baabuur wadida iyadoo uu ku waheliyo darawal liisankiisu sax yahay. Mudo kadib (3 bilood kadib) ayaad codsankartaa oo aad heli kartaa inaad qaadato liisanka baabuur wadida (Drivers License). Haddii aadan qaadan liisanka baabuur wadida inta aanay kaa dhicin xaashida barbarashadu lama ogola inaad baabuur wadid. Haddii aad jabisid qaynuunkaan waa lagu ciqaabi, waxaana lagugu ciqaabi sharciga u yaala gobolka aad joogto ee ku wajahan baabuur wadida.

Caymiska (Insurance)

Caymisku waa nooc shati ah oo loogu talagalay in lagu badbaadiyo darawalka (dhaqaale ahaan) haddii u shil ku dhaco. Marka aad shil gasho adiga oo caymis leh waxaa kharashka intiisa badan kaa bixinaya shirkadda caymiska (waxa ay ku xiran tahay nooca caymiska aad lahayd iyo nooca shilka aad gashay). Haddii aadan lahayn caymis oo aad shil gasho adaa ka masuul ah burburka baabuurkaaga iyo waliba qofka iyo baabuurka kale ee aad shilka la gashay. Dad farabadan ayaa Afrika ku wada baabuurta caymis la'aan laakiinse gobolkan Minnessota waa sharci ama qaynuun inuu darawal walba sitaa ama leeyahay caymis. Camis la'aan waa dambi aad u wayn.

Waditaan Baabuur adiga oo maandoorsan ama sakhraansan (Drinking and Driving).

Khamri cabid iyo baabuur wadid waa caadi dalalka Galbeedka Afrika. Run ahaanti waxaa loo arkaa inay tahay calaamad barbaarnimo iyo calaamad taajirnimo marka loo fiiriyo xagga dhalinyarada. Dalka Mareeykanka marka hore lama ogola in qof ka yar 21 sano uu ibsado/cabo khamri. Waa dambi in lawadaa baabuur haddii uu qofku sakhraansan yahay. Waana dambi in qofku asaga oo wada baabuur u khamri cabaa. Haddii lagu arko adoo baabuur wada oo sakhraansan ama adoo khamri gacanta ku haysta oo cabahaya, liisanka baabuurka iyo baabuur wadidaba waa lagaa joojinayaa. Haddii aad sidaa ku sii socoto oo aad baabuur kaxaysidna liisanka waa lagaa qaadayaa, gebi ahaantiisba, waxaana la arkaa in lagu diro meel lagugu soo daaweeyo.

13.2 Guurka xidhiidhyada ka dhexeeya dadka ee ku waajahan shukaansiga

Guurka

Guurka ka badan hal qof waa dambi dalka Mareeykanka, waxayna kalifikartaa dal ka saarid iyo waliba diidmo lagu diidi inaad qaadato dhalashada ama wadanimada dalkan Mareeykanka. Dalalka Afrika dumarku waa inay dhagaystaan nimankooda iyo waliba waxa ay rabaan. Haddii ay diidaan ragooda waxaa laga yaabaa in la ciqaabo. Dalka Mareeykanka ciqaabaha noocan ku yimaada waxaa loo yaqaana (Spouse Abuse) waxayna kalifi kartaa dal kasaarid iyo waliba diidmo lagu diidayo inaad qaadato dhalashada dalka Mareeykanka ama wadanimada dalka Mareeykanka.




Galmada (galmoodka) dalalka Afrikada Galbeed waxaa loo yaqaana inay tahay wax laga xishoodo in laga hadlo. Dadku uma furfurna inay ka hadlaan telefshinadana, lagama soo daayo, meelaha fagaraha ahna dadku iskuma muujiyaan jacaylka ay isu qabaan. Dalkan Mareeykanka dadku aad bay u muujiyaan jacaylkooda, tusaale ahaan meel fagaara ah beey isku dhunkan karaan.

Dalal badan oo Afrika ah waxaa la arkaa in ay caadi u tahay in uu nin wayn ama oday ah guursado gabar yar . Gobolkan Minnessota waa dambi in nin wayn uu guursada gabar yar Dhaqanka nocan ah waxaa looga arkaa gobolkan Minnessota fal kufsasho (Statutory Rape) haddii ay gabadhu ka yar tahay 18 sano. Dambiga noocan ah waxaa uu kalifi karaa in qofka la xiro oo xabsi loo diro, in dalka laga saaro iyo waliba in loo diido inu qaato dhalashada dalka Mareeykanka ama wadanimada dalka Mareeykanka.

Fara xumayn

Dalalka Afrika qaarkood waxaa caadi ka ah in u nin taabto qof dumar ah una kabixiyo fikradiisa jirkeeda isaga oo ula jeeda xaalad shukaansi. Dalkan Mareeykanka falalkan oo kale waxaa loo arkaa inay yihiin kuwo dambi ah oo loo yaqaano (Sexual Harassment), niinkii falalkaas ku kaca waxaa la arkaa inay dhibaato xag sharci ah ku timaado, khasatan haddii ay kadhacdo meel shaqo.



Gacmo is Qabashada

Dalal badan oo Afrika ah waa caadi in laba nin oo aan ahayn nimanka isu galmooda inay gacanta is qabsadaan. Laba nin oo waawayn oo aan ahayn kuwa isugalmooda ayaa isku sariir ku seexan kara. Dalka Mareeykanka caadi ma'aha in ay laba nin kacmaha isku qabsadaan meel fagaara ah. Dadka qaar baa u arki kara in labada nin caashaq ka dhaxeeyo.

13.3 Korinta caruurta

Daryeel la'aanta ubadka

Dalka Mareeykanka lama ogola in caruurta kaligood meel looga tago, iyadoo uusan lajoogin qof daryeela. Dalalka Afrika waa caadi in caruurta galigood la-isaga daayo banaanka iyo guryaha agtooda iyadoo uusan qof wayn ilaalineynin. Dalkan Mareeykanka haddii aad ka dagto caruurtaada oo ka yaryar 18 sano waxay kuu keenaysaa dhibaato aad u badan oo ay ka mid tahay inay dawladdu kaala wareegto caruurtaada.



Aadaabta (Discipline)

Dalalka Afrika qaarkood dhaqama ayaa jira ah in caruurta lagu edbiyo qaab ciqaab ah sida iyagoo loo diido cuntada, meel ay seexdaan iyo waliba gacansaar/jirdil. Edbinta noocan ah oo dhan waxaa loo yaqaana dalka Mareeykanka (Child Abuse). Dalka Mareeykanka cunugaagu wuxuu kugu dacwayn kara dawladda, taasi waxay kuu keeni kartaa dhibaato badan oo ku waajahan xagga sharciyada. Waxaa kale oo ay kuu keeni kartaa dhibaato edbinta cunug aadan dhalin.

13.4 Lacagta, Canshurta iyo Adeegyada Dawladda

Jeegeg Been ah

Qaxootiga iyo Soogalootiyaashuba waxaa caadi u ah inay dhagaystaan oo ay maqlaan saaxiibadood ama dadka ay la sheekaystaan, horaanta marka ay ku cusub yihiin dalkan Mareeykanka. Mararka qaarkood saaxiibadaas ayaa u tilmaama qofka cusub inu qoro jeeg been ah. Waxay ku yiraahdaan waa caadi waayo iyagaa horay u qoray jeeg been ah. Kabacdina qofka cusub ayaa qora jeeg been ah, mudo yar kadibna wuxuu dhaxgalaa dhibaato.

Dalka Mareeykanku waa ka dambi inaad qortaa jeeg been ah khasatan markaad ogtahay inaad lacag ku hayn akoontadaada (account) amaba kasii daran ee aad ogtahay inaad xidhay akoontadaada. Dadka qaarkood ayaan ogayn ama aqoon in wakhti la siiyo jeegga lagala boxo akoontada haddii aad jeeg qortid, sida maalmo uu jeegu ku sii socdo bangigiisa. Khaladka ay sameeyaan ayaa wuxuu yahay: Tusaale ahaan waxay qori jeeg, kadibna mudo kabacdi waxay tagayaan bangiga oo ay waydiinayaan inta lacag ugu jirtaa koontada iyagoo aan ka fiisanaynin jeege ay horey u qoreen, kabacdina waxay codsanayaan inay labaxaan lacagta ugu jirta bangiga iyagoo jeege ay qoreen wax oga tageeynin. Tusaale ayaa waxay sababaysaa in ay dambi budhcadnima ah dhaxgalaan. Tani waa dambi dalkan Mareeykanka.

Saxiix been ah

Dadka Afrikaanka ah qaarkood waxay isticmaalaan buugta jeegaga ee saxiibadood kabacdi waxay qorayaan jeeg ayagoo ku saxiixayaa magaca saxiibkood, waxayna moodayaan inay sidani tahay caadi. Dalkan Mareeykanka haddii aad qof kale magaciisa ku saxiixdo jeeg waa fal dambi ah, xataa haddii uu yahay saaxiibkaa amaba qof qoyskaaga ah.

Been ka sheegid aad doonayso inaad uga faa'iidaysto Addeegyada Bulshada

Soogalootiga kayimaadda Galbeedka Afrika qaarkood ayaa been ka sheega xaaladooda dhaqaale si ay u helaan ama uga faa'iidaystaan addeegyada bulshada sida gargaarka loo yaqaan (welfare), ama guryaha jaban ee dawlada iyo kaararka caafimaadka. Arrimahan oo dhan waa fal ka dhan ah shaciga, waana dambi. Haddii lagugu qabto falkan waa dambi waana lagu xidhi karaa. Waxa qasab ah in aad dawladda u celiso lacagteedii. Sharciyada dhalasada ama wadaniimada waa lagu diidi karaa, dalkana waa lagaa saari karaa.

Waaxda Canshuur Celinta

Markaad ka shaqaysid dalka Mareykanka sida caadiiga ah waxaad bixisaa canshuur laga gooyo mushaharkaaga. Dhamaadka sanadka dawladdu waxay rabtaa inay ogaato inaad shaqeesay iyo intii aad dawlada siisay ee aad canshuur ku bixisay. Haddii aad dawlada siisay lacag badan waxaa dib kuugu soo noqon doona lacag. Dadka qaarbaa been ka sheega canshuur celinta. Qaarbaa waxay leeyihiin waxaan masruufnaa caruur badan si lacag badan loogu soo celiyo. Qaarbaa waxay leeyihiin waxaan tabarucad ama kaalmo ugu dirnaa lacag dalka dibadiisa. Haddii dad ka mid ah qoyskaaga ay jiraan dalka Mareykanka dibadiisa waxaad ogaata inaad canshuur ku xareeysan karin. Been ka sheegida canshuur celinta waa dambi aad u wayn kaaso xabsi ku galin kara ama ganaax badan kugu kalifi kara iyo walib adoo lagu diido qaadashada dhalashada ama wadaniimada dalka Mareykanka.

13.5 Waxyaabo kale oo dhaqamadu ku kala duwan yihiin

Meel Fagaara ah oo loo isticmaalo musqul ahaan

Dalal badan oo katirsan Galbeedka Afrika ayaa la arkaa inay caadi u tahay in raggu u isticmaalaan meel fagaara ah inay ku kaadiyaan. Rag badan baa isticmaala toga, muska iyo waliba gadaasha guryaha. Dalka Mareykanka waa ka mamnuuc oo waa dambi in loo isticmaalo meel fagaara ah musqul ahaan. Haddii lagugu qabto waa lagu ganaaxi. Dalkan Mareykanka dadku waa inay isticmaalaan musqulaha loogu talagalay dadweynaha ee banaanka.

Xafladaha iyo Casuumadaha

Mararka qaarkood casuumadaha dadka Galbeedka Afrika aad bay u qaylo badan yihiin wakhti dheerna weey qaataan. Magaalooyinka intooda badan waxay leeyihiin qaynuuno ilaalinaya/mamnuucaya qaylada habeenkii, khasatan gobolka Minesota. Jabinta qaynuunada noocan ah waxay kalifayaan ganaax. Waxa lagu jari karaa juwan ama tigidh lacag badan ah.

Hanjabaada

Galbeedka Afrika waa caadi haddii ay laba nin murmaan inay isu hanjabaan oo isugu hanjabaan dil. Waxa kale oo caadi ka ah inay is yiraahdaan ama fariin isu reebaan sida kuwa talefoonka oo uu midba midka kale ugu hanjabo inuu dili doono. Waxa kale oo caadi ah inu qof ugu hanjabo qof: "Waxaan ku dili". Hanjabaadaha noocan ah waa ka dhan sharciga dalka Mareykanka waana dambi. Qofkii qof ugu hanjaba inuu dilayo, waa la xiri, waxaana lamarin ciqaab sharci ah



Dagaalka ama gacan kahadalka

Dagaalka iyo gacan kahadalku waa wax caadi ka ah dalalka Galbeedka Afrika. Dadbaa markay murmaan ayagoo isla jooga ama talafoon ku hadlahaya iska balan qaada dagaal marka dambe ee ay is arkaan. Afrika Galbeed waa ka caadi inay laba qof isdiriraan kabacdina kala socdaan. Dalkan Mareykanka waa ka dambi in la diriro. Haddii aad aragto dad diriraya oo fal gacan ka hadal ah kujira, waa muhiim in la waco booliiska, kadibna la xirto oo qofkii dagaalka waday. Waxa kale oo dhacda in lagu ganaaxo. Waxa kale oo ay kalifi karntaa in ay sharci gigaaga saameeyso oo xaaladaada immigereeshinka soo dhex gasho.

Isgaarsiinta ama wadahaadalka

Isgaarsiinta ama wadahaadalku uma fududa dalalka Afrika. Dalalka qaarkood haddii aad doonaysid inaad booqato saaxiib macno wayn kuma fadhido haddii adoon wicin (oo aan u digin) aad gurigiisa tagto. Si kastaba way kuu soo dhaweynayaan ayagoo kugu faraxsan. Dalka Mareykanka waxaa caadi ka ah inaad wacdo oo aad xili qabsato aad soo booqato saaxiibkaa.

Dalka Mareykanka caruurta waxay ula hadlaan dadka waaweyn sideey doonaan, tusaale ahaan waxay ugu yeedhi karaan qofka wayn magaciisa sida "Xuseen" halka Afrika ay ugu yeedhi lahayeen "Adeer Xuseen iyo/ama Abti Xuseen". Dalalka Afrikada caruurta waxay ugu yeedhaan dadka wawayn sida Habar yar, Eedo, Abti, Adeer, iwm